Axkaamta Jinniga

Waxaa dhigay
Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan

Waxaa daabacday

Daaru Al Seerah
P.O. Box 200984 – Boston, MA 02120 – USA

Axkaamta Jinniga

Waxaa dhigay
Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan

Waxaa daabacday

Daaru Al Seerah
P.O. Box 200984 – Boston, MA 02120 – USA

Tusmada Kitaabka

Mawduuca	Bogga
1. Tusmada Kitaabka	3
2. Aarrata dhigaha kitaabka	5
3. Jinniga	6
4. Abuuridda Aadan iyo colaadinta Ibliis	6
5. Ruuxa iyo ku sugnaantiisa jirka Aadan	7
6. Malaa'igta sujuudda la amray	8
7. Sujuudda	9
8. Qaybta kale ee Xadiithka sujuudda	10
9. Abuuridda Xaawo	11
10. Meesha Xaawo lagu abuuray	12
11. Meherka Xaawo: Salliga Nabiga, SCW	12
12. Geedka laga reebay	14
13. Xaasidnimada ibliis	15
14. Intuu ibliis Ilaahay caabudayay	16
15. Ibliis oo albaabka jannada yimid	16
16. Wada hadallada Ilaahay Tacaalaa iyo Aadan	19
17. Soo degashada Aadan	20
18. Dhiigga caadada haweenka	21
19. Boohinta Aadan	22
20. Koofaarta Aadan ee Abuu Muxammad, SCW	24
21. Ka cunidda geedku ma dambi waynbaa?	27
22. Xikmada iyo naxariista soo degidda Aadan	28
23. Ilaahay Tacaalaa oo Aadan qalbiga u qaboojiyay	29
24. Eryidda ibliis	31
25. Deeqaha Aadan la siiyay	33
26. Sawirnimada Ibliis	34
27. Ilamaha Aadan iyo Xaawo	35
28. Qaabiil iyo Haabiil	36
29. Qaabiil	38
30. Shiith	38
31. Yaanish	39
32. Cadawnimada ibliis	40
33. Dhimashada Aadan	40
34. Cunnada jinniga	41
35. jinnigu waa is dhalaa	42
36. Anwaacda jinniga	42
37. Jinnigu waa dhintaa	43
38. Degmada jinniga	44
39. Markay qorraxdu dhacdo ayuu shaydaan hawl usoo baxaa	45
40. Kuhaanta Carabta iyo Bicthada SCW	46
41. Siday Carabtu u haysatay xiddigaha la ganayo	49
42. Ganidda shayaadiinta	50
43. Jinniga Quraanka dhegeystay	52

44. Cumar bin Cabdu Al Caziiz 53
45. Go'idda kuhaanada 54
46. Kaahinadda Al Ghaydhalatu 54
47. Khadhar: kaahinka Banuu Lihb 55
48. Kaahinka qabiilka Janb 57
49. Cumar iyo Sawaad 57
50. Riwaayada Al Suhaylii ee Cumar iyo Sawaad 58
51. Sawaad iyo qabiilkiisa Daws 61
52. Sawdaa'a bintu Zuhrah: kaahinadda Quraysh 61
53. Arrinka jinniga Nasiibiin 62
54. Jinniga Quraanka dhegeystay oo islaamay 65
55. Ma bannaana in faaliye loo tago 65
56. Nabiga, SCW, jinnigana waa loo diray 66
57. Xadiithka Calii, CS 69
58. Shaydaan iyo heshiiska Al Caqabah 70
59. Afarta goor oo uu ibliis, Allaha lacnadee, qayliyay 71
60. Jinnigu dadkuu dhex galaa 71
61. Zinniirah 73
62. Khaatimka Nabinnimada 73
63. Xikmada Khaatimka Nabinnimada 75
64. Shaydaanka qof walba ku lammaansan 75
65. Sababta astaantaas khaatim loo yiri 76
66. Ekaanshaha khaatimka 76
67. Khudbada ibliis ee is nicidda 77
68. Sida shaydaan guryaha looga celiyo 80
69. Sida shaydaan la isaga ilaaliyo 81
70. Aayatu Al Kursii 82
71. Carshiga iyo Kursiga 82
72. Asalka biyaha 83
73. Faataxada 86
74. Macnaha Faataxada 89
75. Magacda Faataxada 90
76. Xirziga iyo qardhaasta la xirto 92
77. Caruurta iyo ghayrkoodba waxa lagu ilaaliyo 94
78. Shaydaan wuxuu la jiraa kan jamaacada ka leexda 96
79. Shaydaanku wuxuu jecel yahay acmaasha xun 96
80. Hubkuu shaydaan dadka u adeegsado 98
81. Carada 98
82. Shaydaan Allaha lacnadee riyaan ku arkay 99
83. Jahannama riyaan ku arkay 100

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Araarta dhigaha kitaabka

Al xamdu Lillaahi Rabbi al caalamiina, wa al th-thanaa'u li Allaahi, wa Sallaa Allaahu Caalaa sayyidinaa wa mawlaanaa Muxammadin,wa calaa Aalihi wa saxbihi, wa Sallam tasliiman kathiiran. Kutubbada loo noqon karana oo aan kasoo qaadannay waa Tafsiirka Quraanka, gaar ahaan Tafaasiitka Al Baghawii, Al Qurdhubii, Dhaahir Caashuur. Tafsiirka af Soomaaligana waxaan la kaashaday Kitaabka uu tarjumay Sheekh Maxmuud Maxamad Cabdi Allaha dambigiisa dhaafee. Waxaan kaloo kasoo qaatay kutubbada Xadiithka oo lagu kalsoon yahay sida Al Bukhaarii, Muslim iyo Axmad iyo Sunanka; Kutubbada Siirada sida Ibnu Hishaam (oo dhintay laba boqol saddex iyo toban sanadka Hijriga), Al Rawdu Al Unuf ee Al Suhaylii (oo dhintay shan boqol kow iyo sideetanka ee sanadka Hijriga), kitaabka Taariikhu Al Khamiisi ee Al Qaadii Al Imaamu Xusayn bin Muxammad bin Al Xasan Al Diyaarbakrii (oo dhintay sagaal boqol lix iyo lixdanka sanadka Hijriga), kitaabka Al Siirah Al Xalabiyyah ee Al Imaam Calii bin Burhaanuddiin Al Xalabii (oo dhintay kun afar iyo afartan ee sanadka Hijriga), kitaabka Sharxu al callaamah Al Zarqaanii (oo dhintay sanadka kun iyo boqol iyo labo iyo labaatan Hijrada) calaa Al Mawaahibi Al Laduniyyah bi Al Minaxi Al Muxammadiyyah uuna dhigay al callaamah Al Qasdhalaanii (oo dhintay sanadka sagaal boqol iyo saddex iyo labaatan Hijrada). Qaalli Badru Al Ddiini Abii Cabdi Allaahi Cumar bin Cabdi Allaahi Al Sh-shiblii al xanafii, o la oofsaday sanadka toddoba boqol sagaal iyo lixdan Hijriga, dhigayna kitaabkiisa Aakaamu al murjaani fii axkaami al jaanni oo lagu daabacay Daaru Al Qalami Bayruut, arliga Lubnaan sanadka kun afar boqol iyo sideed Hijriga, una dhiganta kun sagaal boqol sideed iyo sideetanka miilaadiga, uuna sharxay Al Shaykhu Qaasim Al Shumaacii Al Rifaacii, oo ah guddoomiyaha waaxda arrimaha diinta ee Daaru Al Fatwaa ee jamhuuriyadda Lubnaan. Waxaan kitaabkaan wax uga soo qaadannay axkaamta jinniga, cadawtinnimadiisa iyo sida la isaga ilaalin karo. Shaydaanku waa cadaw aadan u jeedin, aan dhibaatayntaada ka nasanayn oo aan il biriqsina ka harayn inuu ku halaago. Marka waa inaad cadawgaaga taqaan iyo xeeladihiisa si aad uga digtoonaatid, isagana celisid.

Waxaanna Ilaahay ka baryayaa inuu iga aqbalo, qofka akhristana uu ku anfaco, ajarkiisana uu aniga iyo labadii i dhashay nasiiyo. Kitaabkaani waa nicmuu Ilaahay igu galladeystay, waxa qalad ah oo ku jirana waxay ka yimaadeen aniga iyo shaydhaan.

Waxaa dhigay midka naxariista iyo dambi dhaafka Ilaahiis faqiirka u ah,
Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan
South Riding, Virginia, USA

Maalin isniin ah, ee saddex iyo toban bisha Rabiicu Al Aakhar ee sanadka kun iyo afar boqol iyo sideed iyo labaatanka Hijriga, una dhigantah soddonka bisha Abriile ee laba kun iyo toddoba Miilaadiga.

Jinniga

Erayga jinni wuxuu ka yimid oo kasoo askumay erayga ah jannana ama janna, oo uu Al Rraazii yiri inuu macnihiisu yahay: " loomana jeedo, oo waa kaa qarsoon yahay". Sidoo kale ayuu erayga janno, oo ah midduu Ilaahay muslimiinta ka ballaan qaaday, halkaas ka yimid oo macnihiisu yahay beer geedo badan oo geedeheedu madaxa is gashadeen oo waxa dhexdeeda ku jira qariyay oo aan loo jeedin. Cunugga caloosha hooyadiis ku jirana sidaasaa loo yiraahdaa janiin, oo looma jeedo, siduu Ilaahay Tacaala Aayadda laba iyo soddonaad ee Suuratu Al Nnajmi: **"wa ith antum ajinnatun fii budhuuni ummahaatikum**(32)**"**, oo macneheedu yahay: "adinkoona ku ah ajinnatun, kuwa ku qarsoon, caloosha hooyooyinkiin dhexdooda(32)." Jinnigu wuxuu ka mid yahay makhluuqaatka Ilaahay Tacaalaa uu abuuray. Ilaahay Subxaanahu wa Tacaalaa wuxuu Aayadda toddoba iyo labaatanaad ee Suuratu Al Xijri ku yiri: **"Wa al jaanna khalaqnaahu min qablu min nnaari al ssamuumi**(27)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "jinnigana hore, waana Aadan hortiis, ayaan ka abuurnay dab kulayl badan. Al Ssamuumu waxaa la yiraahdaa dabayl kulayl badan oo intay dadka daloollada jirka ka gasho disha. Waana dab aan qiiq lahayn. Halkaas ayayna kasoo degaan biriqdu, waana dab yaalla inta u dhexeysa Samada iyo Xijaabka, siduu Al Baghawii u sharxay(27)." Ibnu Cabbaas wuxuu yiri: "Ibliis waa aabaha jinnigoo idil dhalay, siduu Aadan dadkoo idil u dhalay. Jinnigu wuxuu leeyahay muslimiin iyo gaalo, kuwa gaalada ahna waxaa la yiraahdaa shaydaan. Jinnigu way nool yihiin, wayna dhintaan. Jinnigu cunnada ayuu cunaa, wax buu cabaa, wuxuu leeyahay labood iyo dheddig, wayna is dhalaan sida dadka.

Abuuridda Aadan iyo colaadinta Ibliis

Al Dhabarii, iyo ghayrkiisba, wuxuu kitaabkiisa taariikhda Mujalladka koowaad bogga laba iyo lixdan ilaa afar iyo lixdan ku yiri: "Markuu Ilaahay Tacaalaa doonay inuu Aadan abuuro ayuu malaa'igtiisa u sheegay, wuxuuna ku yiri: **"Innii jaacilun fii al ardi khaliifatan**(30)**"**, ahna Aayadda soddonaad ee Suuratu Al Baqarah oo macneheedu yahay: "Anigu waxaan abuurayaa khaliifo arliga camirah, oo ay dhashiisu facba faca kale uga dambeeyo(30)." Markaasay waxay ku yiraahdeen: **"a tajcalu fiihaa man yufsidu fiihaa wa yasfiku al ddimaa'a wa naxnu nusabbixu bi xamdika wa nuqaddisu laka qaala inni aclamu maa laa taclamuuna**(30)**"** oo ah isla Aayaddaas oo macneheeduna yahay: "ma waxaad arliga dhexdiisa yeeleysaa mid fasaadiya, oo fasaad waxaa la yiraahdaa diididda iyo khilaafidda awaamirta Ilaahay, dhiigna ku daadsha? Annaguna Adiga xamdigaagaan ku tasbiixsanna oo ku hufnaa, kuna waynaynnaa! Wuxuu yiri: "Anigu waxaan ogahay wax aydnaan adinku ogayn(30)", oo ku saabsan Ibliis. Markaasuu Ilaahay wuxuu arliga u diray Jibriil Calayhissalaamu inuu uga keeno dhoobo uu Aadan ka abuuro. Markaasuu dhulku wuxuu ku yiri, markuu damcay inuu dhoobo ka qaado: "Ilaahay ayaan kaa magan galay inaad jirkayga wax ka naaqusisid, aadna i

fool xumaysid oo aad meel iiga dhacdid." Markaasuu ka gaddoomay isagoo aan waxba ka qaadin, wuxuuna Ilaahay Tacaalaa ku yiri: "Rabbiyow, dhulku adiguu ku magan galay, markaasaan magan geliyay." Markaasuu Miikaa'iil soo diray, oo uu dhulku isagana Ilaahay ka magan galay. Markaasuu ka gaddoomay, uuna yiri wax la mid ah wuxuu Jibriil yiri oo kale. Markaasuu soo diray Malaku Al Mawti, oo uu dhulku Ilaahay ka magan galay. Markaasuu malaguu wuxuu yiri: "aniguna Ilaahay ayaan ka magan galay inaan laabto anigoo aan amarkiisa fulin." Markaasuu dhulka wajigiisa kore wuxuu ka qaaday dhoobo, kamana uusan qaadin meel keli ah, ee wuxuu ka qaaday meelo kala duwan oo wuxuu qaaday oo isku daray dhoobo guduudan, mid cad, mid madaw. Taas ayaana u sabab ah inuu banuu aadanka midabyadiisu u kala duwan yihiin. Wuxuu ka qaaday arliga macaan iyo midka cusbada leh, midka carfoon iyo midda qurmoon, midda fiican iyo midda xunba. Taas ayaana u sabab ah inay dadku kala duwan yihiin. Aadan waxaa magacaas loogu bixiyay in laga abuuray adiimi al ardi oo ah wajiga arliga oo adiim la yiraahdo." Dhoobadaas biyo ayaa lagu qasay. Markaasuu Ilaahay labadiisa gacnood ku sameeyey oo uu markaas Aadan isagoo dhoobo qallashay oo dhoob oo kale noqotay ah, intaan nafta la gelin horteed wuxuu yiillay afartan habeen (afartan sanana waa la wariyay). Markaasuu Ibliis soo maraa oo uu lugtiisa ku dhuftaa, markaasuu jirka dhoobka ahi dhawaaqaa. Kaddibna intuu afka ka galo ayuu dabadiisa ka baxaa, oo uu dabadiisa ka galaa afkiisana uga baxaa, kaddibna uu ku yiraahdaa dhoobadaas qallashay: "waxba ma ihid! Mana ogi waxa laguu abuuray. Haddii awood la ii kaa siiyana waan ku halaagayaa, haddii adiga awood la ii kaa siiyana waan ku caasiyayaa oo amarkaaga diidayaa!" Waaba tuu Ilaahay Tacaalaa Aayadaha sagaal iyo soddonaad iyo afartanaad ee Suuratu Al Xijri ku yiri: **"Qaala Rabbi bimaa aghwaytanii la uzayyinanna lahum fii al ardi wa la ughwinnahum ajmaciina**(39)**Illaa cibaadaka minhum al mukhlasiina**(40)**."** Aayadaha macneheedu waxaa weeye: "ibliis wuxuu yiri: "Rabbiyow i baadiyayntaada darteed arliga dhexdiisa ayaan u qurxinayaa, waana wada luminayaa dhammaantood(39)Intaan ka ahayn addoomaadaada si dhab ah kuu caabuda mooyee(40)." Wuxuu kaloo Ilaahay Aayadda laba iyo lixdan ee Suuratu Al Israa'i ku yiri: **"Qaala ara'aytaka haathaa allathii karramta calayya la'in akh-khartanii ilaa yawmi al qiyaamati la axtanikanna thurriyatahu illaa qaliilan**(62)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "ibliis wuxuu yiri: "bal ka warran midkaan aad aniga iga karaamaysay, oo iga sharaftay oo iga kor marisay, haddaad dib ii dhigtid oo aadan i dilin ilaa maalinta qiyaame, xididdada ayaan baadinnimo ugu siibayaa baadiyeen dhashiisa, in yar mooyee(62)."

Ruuxa iyo ku sugnaantiisa jirka Aadan

Jacfar bin Muxammad wuxuu yiri: "ruuxu wuxuu ku sugnaa madaxa Aadan boqol sano, oo ah inta laabta ka korreysa, laabtiisana wuxuu ku sugnaa boqol sano, oo ah inta lugaha ka korreysa; labadiisa lugoodna wuxuu ku sugnaa boqol sano, oo ah inta laabta ka hooseysa oo ay calooshu

ka mid tahay". Muraadka laga leeyahay tirooyinkaas waa badin zamankaas iyo mudadiisa la badinayo, tanoo aan diideyn in mudada u dhexeysa bilowga abuuriddiisa ilaa usoo degiddiisa arligaan ay tahay saddex boqol iyo sideetan sano." Sidaasoo kale waxaa isaguna yiri ibnu Jariir, oo mudadaas afar bilood ka dhimay. Ibnu Jariir ghayrkiisna waxay yiraahdeen: "Mudadu intaas wax badan ayay ka badantahay." Shiikhuna wuxuu isku kallifay inuu helo wax is waafajiya tirada uu sheegay iyo midda uu Jacfar sheegay, wuxuuna yiri: "Tiradaasi waxay ku saleysan tahay in mudada uu Adan dhoobo ahaa ay ahayd intuusan jannada gelin ka hor, ama in laga soo saaray jannada maalinta ku xigta marka abuuriddiisa dhexdeeda lagu bilaabay, abuuriddiisuna ayan kaamilmin muddo dheer kaddib mooyee. Waxaana jirta inuusan Jacfar qabin aragtida Ibnu Jariir, uusanna taas raalli ku ahayn, ayadoo uu Ibnu Cabbaas yiri: "Wuxuu Adan jannada dhexdeeda ku sugnaaday shan boqol oo sano." Waxaa kaloo la yiri: "intaasoo kale, waa shan boqol oo sanee, ayay Malaa'igtu sujuuddooda ku sugnaayeen, ka badanna waa la yiri." Sidaas ayay u jiraan aragtiyo kala duwan, waxaana habboon in midkood la raajixiyo, mase ay habboona in lagu madax adkaado in aragtiyadaas la mideeyo oo xagga caqliga laga banneeyo.

Malaa'igta sujuudda lagu amray

Kaddib Ilaahay wuxuu amray malaa'igta inay Aadan u sujuudaan. Malaa'igtaasi, sida uu eraygu mid guud u yahay, waa dhammaantood, ayadoo aan midkoodna lagu gooni yeelin. Ama waa malaa'igta arliga, ama waa Ibliis iyo inta malaa'igta ah oo isaga kala qayb gashay la dagaallanka jinniga, ayadoo uu Ilaahay Tacaalaa, markii hore ayaga arligaan dejiyay, markaasey dhexdiisa fasaad ka rideen. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu u diray ciidan malaa'ig ah oo uu Ibliis hoggaaminayo. Markaasey laayeen oo ay jasiiradaha iyo buuraha dushooda ku takooreen intoodii ka hartay. Malaa'igtana waxaa la amray inay u sujuudaan Aadan kaddib markuu Ilaahay cilmiga siiyay. Markaasuu malaa'igta weydiiyay, markay aqoon weydeyna uu Aadan magacda shay walba sheegay, oo Ilaahay sidaas kusoo saaray deeqda uu malaa'igta dheer yahay, ayna ayaga waajib ku noqotay korkooda inay isaga u adeegaan, taasoo uu ku mutaystay cilmiga uu dheer yahay. Sidaas ayayna Aayadaha Suuratu Al Baqarah u kala hormarinayaan dhacdooyinkaas. Waxaa kaloo la yiri: waxayba u sujuudeen horeba marka Aadan ruuxa lagu afuufay, siday u muuqato Aayadda sagaal iyo labaatanaad ee Suuratu Al Xijri. Imaamka dhigay kitaabka Siirada ah ee la yiraahdo Taariikhu Al Khamiisi iyo ibnu Caqiil waxay yiraahdeen fa'da ku jirta Aayadda ee faqacuu waaba daba marin iyo dib u dhigid muddo kaddib, kaddib marka ruuxa lagu afuufay.

"Markaasey sujuudeen intaan Ibliis ka ahayn oo diiday. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa naxariistiisa ka eryay, kana fogeeyey jannadiisa, taasoo ah dullayn adduun iyo aakhiraba, kaddib markuu ka mid ahaa koox malaa'ig ah oo la yiraahdo Al Jinnu, sida laga wariyay Ibnu Cabbaas iyo Ibnu Mascuud iyo ghayrkoodba. Al Qurdhubii wuxuu sheegay inuu Jamhuurku

(waana culummada intooda badane) ay sidaas qabaan, Al Nawawina uu saxiix ka dhigay inaan la warin in ayaga ghayrkooda la amray inay sujuudaan, oo soociddaas laga reebay Ibliis inay sujuudeen isaga mooyee, waa malaa'igtaas sujuudda la amray. Qaalli Cayaadna wuxuu yiri: "Culummada intooda badani waxay leeyihiin inuusan Ibliis il biriqsina malaa'igta uga mid noqon, uuna isagu yahay asalka ay jinnigu ka farcameen, sida uu insigu Aadan uga farcamay oo kale, uuse ka mid ahaa jinniga ay malaa'igtu ka adkaatay oo ay laysay, oo uu markaas malag isaga soo qafaalay isagoo yar, oo uu Samada la aaday." Sidaas ayuuna Al Sayyuudhii raajixay, in malaa'igta oo idil la amray, oo ay wada sujuudeen, sida ay Axaadiithtu kusoo aroortay." Hadalka Al Nawawii oo ah inaan la warin in ghayrkood sujuudda la amrayna waxaa diiday warinta ibnu Caqiil oo, Tafsiirkiisa ku diiday iyo Taariikhu Al Khamiisi oo wariyay in malaa'igta iyo caalanka oo idil markaas la amray, laakiinse hadalka amarka ah ayaga malaa'igta ah loo jeediyay, ayagoo waqtigaas khalqiga ugu sharaf badnaa, inta kalena ay ayaga raacsan yihiin."

Sujuudda

Waxaa la isku khilaafay sida ay malaa'igtu u sujuudeen, intooda badanna waxay yiraahdeen: waa amar malaa'igta lagu amray inay wajiyadooda dhulka dhigaan, sida sujuuddeenna markaan tukaneynno salaadda, oo af ahaan iyo sharci ahaanba taas ayaa sujuud la yiraahdaa, sidayna u tilmaameyso Aayadda sagaal iyo labaatanaad ee Suuratu Al Xijri: **"Fa qacuu lahu saajidiina**(29)**"** oo macneheedu yahay: "Ugu dhaca sujuud(29)".

Waxaa kaloo Ubayya iyo ibnu Cabbaas laga wariyay inay sujuuddaasu ahayd al inxinaa'u oo ah dhabarka oo hore loo soo laabo, ayanse ahayn ayadoo dhulka lagu sujuudo, sida la yeelo marka madaxda waaweyn lala kulmo oo dhabarka hore loo soo laabo. Qolana waxay tiri inay sujuuddaasi tahay is dullayn iyo hoggaansan, ayadoo uu Ilaahay malaa'igta Aadan iyo dhashiisa ugu sakharay soo dejinta iyo soo di'inta roobka iyo ilaalinta raadkooda iyo dhigidda acmaashooda iyo la koriddeeda ayagoo sida Samada. Sujuudda ay Aadan u sujuudeenna waxay ahayd sujuud waynayn iyo salaamid iyo muujin deeqdiisa iyo u hoggaansanaan iyo adeecid amarka Ilaahay, mana ayan ahayn sujuudid cibaado iyo addoonsi, ayadoo ayan cibaado u sugnaan Ilaahay Tacaalaa mooyee, lana mid ah sujuudday ay Yuusuf walaalihiis isaga laftiisa u sujuudeen. Kan loo sujuudayaana run ahaantana waa Ilaahay Tacaalaa, Aadanna waa Qiblada oo kale, sida markaan tukaneynno aan Kacbada Qibladeenna ah ugu jeesanno, laakiinse aan Ilaahay u sujuudeynno. Qataadana wuxuu yiri: "sujuuddaasi waxay ahayd khidmo ama adeegid Ilaahay iyo xurmayn Aadan la xurmeynayo, sida salaadda janaazada oo kale ay cibaado Ilaahay u tahay, isla markaasna duco maytka loo ducaynayo." Al Xasan wuxuu yiri: "Sax waxaa ah inay sujuuddaasi ahayd salaan Aadan gooni ahaan loo salaamayay, oo hadday cibaado Ilaahay ahaan lahayd, Aadanna uu Qiblo ahaan lahaa, Ibliis iskalama kibreen oo iskalama weynaadeen." Aragtidaasna waa in fiiro

loogu noqdaa, oo Al Qurdhubii wuxuu sheegay in la isku waafaqsanyahay inayan sujuudid cibaadeysi ahayn, taasoo mamnuuc ah (in Aadan cibaadeysi loogu sujuudo), oo isla weynaantiisa uu Ibliis sujuudidda ka kibray oo uu iskala weynaaday waxaa weeye inuusan isagu Qiblo ahayn, malayn uu u malaynayo inuu Aadan iyo ghayrkiisba uu wax dheer yahay oo ka sarreeyo." Al Shacbiyyuna wuxuu yiri: "Hadalka Ilaahay oo ku xusan Aayadda afar iyo soddonaad ee Suuratu Al Baqarah oo ah: **"Usjuduu li Aadama**(34)**"** oo macneheedu yahay: "u sujuuda Aadan(34)" macneheedu waxaa weeye sida loo yiraahdo "wuxuu u tukaday Qiblada" waxaa diidaya in la yiraahdo "Qiblada xaggeeda ayuu u tukaday", ee ayada lafteeda uma tukan, oo waa sallaa ilaa al Qiblati ee ma aha sallaa lahaa."

Waxaa laga wariyay Jacfar Al Saadiqu ahna ibnu Muxammad Al Baaqir bin Calii bin Al Xusayn bin Calii bin Abii Dhaalib, Allaha dhammaantood raalli ka noqdee, koofaartaasna loogu bixiyay runlownimadiisa, kana mid ahaa madaxda Ahlu Al Baytka ee waqtigiisa, dhashayna sanadka Hijriga ee sideetan ama saddex iyo sideetan, la oofsadayna sanadka boqol iyo sideed iyo afartan, una dhigay Ehelu Baytka kitaab harag lagu dhigay oo ay ku dhigan yihiin waxay cilmigiisa uga baahnaayeen iyo waxa ahaan doona ilaa yawmul qiyaamaha, inuu yiri: "Wuxuu ahaa kan ugu horreeya oo Aadan u sujuuday Jibriil, kaddibna Mikaa'iil, kaddibna Israafiil, waxaana ku xigay Cazraa'iil (oo ah Malakul Mawtka qabta arwaaxda oo idil kuwa jinniga iyo insiga iyo bahaa'inka xoolaha ah iyo makhluuqaatka oo idil)".

Qaybta kale ee Xadiithka Sujuudda

"Afartaas malag kaddibna waxaa sujuuday Al Malaa'ikatu Al Muqarrabuuna, oo ah malaa'igta Ilaahay soo dhoweeyey". Sidoo kale Wahab bin Munabbih wuxuu yiri: "Kan ugu horreeyey oo Aadan u sujuuda wuxuu ahaa Jibriil, markaasuu Ilaahay ku karaameeyey inuu Anbiyada Waxyiga usoo dejiyo, gaar ahaan Sayyidka Mursaliinta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Waxaa ku xigay oo Aadan u sujuuday Miikkaa'iil, kaddibna Israafiil, kaddibna Cazraa'iil, kaddibna malaa'igta intooda kale. Waxaa laga wariyay Abii Al Xasan Al Naqqaash inuu kan ugu horreeyey oo sujuuda uu ahaa Israafiil. Waxaa isaguna sidaas oo kale wariyay ibnu abii Xaatim, oo ka wariyay Damrah iyo Al Salafii oo ay wariyeen inuu Cumar bin Cabu Al Caziiz, Allaha raalli ka. noqdee, yiri: "taas daraadeed -oo ah inuu Israafiil ahaa midka ugu horreeya oo Aadan u sujuuda- wuxuu Ilaahay abaal marin uga dhigay inuu ka adeego xagga Al Lawxu Al Maxfuuthu", oo ah inuu akhristo oo uu daalacdo waxa ku dhigan, uuna, ku tasarrufo adeeggiisa, isagoo tusaale ahaan waxa ku dhigan kasoo guuriya oo malaa'igta u gudbiya." Waxaa kaloo la yiri: markuu wajigiisa sujuudda kasoo qaaday, ayaa waxaa u muuqday Quraanka oo idil oo wajigiisa ku dhigan, karaameyn lagu karaameynayo hormaridda uu fulinta amarka Ilaahay u hormaray. Al Azraqii wuxuu yiri: "Riwaayaddaan inuu Israafiil ahaa midka ugu horreeyey oo sujuuday waxay khilaafsan tahay midda laga wariyay Jacfar oo ah inuu Jibriil ahaa midka ugu hor sujuuday. Sheekheenna ayaana is waafajiyoo yiri: "ficil ahaan kan ugu

horreeyey oo sujuuday wuxuu ahaa Israafiil, kanse ugu horreeyey fulinta amarka Ilaahay wuxuu ahaa Jibriil", wuxuuna yiri: "Waxaa dhici karta in sababta ay mar u wada sujuudi waayeen inay tahay in kooda ugu hor sujuuda uu ishaarada u garatay inuu isaga marka hore toos loola hadlayo". Labadaas riwaayadoodna in la is waafajiyo hakad iyo fiiro ayaa ku jira.

Waxaa Ibnu Cabbaas laga wariyay inuu yiri: "Inta Aadan loo sujuudsanaa waxay ahayd maalinta jimce laga bilaabo markay qorraxdu beerka Samada ka iilatay ilaa casarka", waana inta mudadaas u dhigantah haddii maalmaha adduunka loo fiiriyo, oo waxaan shaki ku jirin in Aadan la abuuray saacadda ugu dambeysa ee maalinta jimcaha ah, oo la mid ah kun sano ee adduunkaan."

Abuuridda Xaawo

Cabdu Allaahi ibnu Cabbaas oo Xadiithkiisa sii wada wuxuu yiri: "Aadan kaddib wuxuu Ilaahay Tacaalaa Aadan u abuuray haweentiisa Xawwaa', uuna ka abuuray feer ka mid ah feerihiisa saabkiisa bidix." Taas macneheedu waxaa weeye: waxaa feertaas Xaawo looga soo dhex saaray sida ay lafta timirta marka la abuuro geed timireed uu uga soo baxo oo kale. Meesha ay feertaasi Aadan uga tiilayna waxaa la geliyay hilib." Al Qurdhubii wuxuu yiri: "Waxaa loo qaadan karaa inay taas macneheedu tahay in feer laga abuuray, oo feertuna way qalloocan tahay, sidaas ayay ayaduna u qalloocan tahay." Waxaa feertaas laga abuuray isagoo uu Adan hurdo, si uusan xanuun u dareemin; xanuunkuna wuxuu ninka u dumaa oo uu jeceyl u geliyaa haweenta, siduu Al Qurdhubii iyo ghayrkiisba ay yiraahdeen. Xaawo waxaa Xawwaa' loogu bixiyay ayadoo qof nool laga abuuray, oo Xawwaa' macneheedu waa tii nooleyd. Al Qurdhubii wuxuu sheegay inuu ahaa Aadan midka magacaas u bixiyay, oo markuu hurdada kasoo kacay oo uu arkay ayadoo madixiisa fadhida ayuu wuxuu weydiiyay: ”Yaad tahay?" Waxay tiri: "haweentaada." Wuxuu yiri: ”oo maxaa laguu abuuray?" Waxay tiri: "inaad igu xasishid, aniguna aan kugu xasilo". Markaasey malaa'igtu waxay dooneen inay Aadan cilmigiisa ku imtixaanaan, waxayna yiraahdeen: "middaanna waa tuma?" Wuxuu yiri: "waa imra'ah, oo ah waa haweeney". Waxay yiraahdeen: "magaceeduna waa maxay?" Wuxuu yiri: "Xawwaa"'. Waxay yiraahdeen: "oo maxaad imra’ah u tiri?" Wuxuu yiri: "maxaa yeelay waxaa laga soo qaatay oo abuuray imri'un, oo ah nin". Waxay yiraahdeen: "maxaad Xawwaa' ugu bixisay?" Wuxuu yiri: "maxaa yeelay waxaa laga abuuray qof nool. "

Kitaabka Fatxu Al Baarii bi sharxi Saxiixi Al Bukhaarii-na wuxuu sheegay in Xawwaa'a, oo uu mad saaranyahay, loogu bixiyay ayadoo hooyada shay' kulligiis ah.

"Markaasuu markuu hurdada kasoo kacay oo uu arkay ayuu xasilay, uuna degay, ayada xaggeeduuna u iishay, ayadoo uu Ilaahay Tacaalaa ku ilhaamiyay."

Meesha Xaawo lagu abuuray

Waxaa la isku khilaafay in Xaawo Jannada dhexdeeda lagu abuuray iyo in kale. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxaa la abuuray ka hor intuusan Aadan Jannada gelin, waxaana u daliil ah Aayadda shan iyo soddonaad ee Suuratu Al Baqarah, oo Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa ku yiri: **"Wa qulnaa yaa Aadamu askun anta wa zawjuka Al Jannata**(35)**",** oo macneheedu yahay: "Waxaanna niri: "Aadanow deg adiga iyo haweentaaduba Jannada(35)." Sidaas ayaana Ibnu Cabbaas looga wariyay, sidaas ayuuna Al Sayyuudhii ku sugay kitaabkiisa Al Tawshiix. Waxaa kaloo la yiri: bal waxaa lagu abuuray Jannada dhexdeeda, kaddib markuu Aadan Jannada galay, ayadoo marka Jannada la dejiyay uu dhexdeeda ku socday isagoo cidlooday oo wehel doon ah. Markaasaa markuu seexday ayada feertiisa gaaban laga abuuray ee saabkiisa bidixeed, si uu ugu xasilo, uuna u weheshado. Markaasuu markuu hurdada kasoo baraarugay arkay, uuna ku yiri: "Yaad tahay?" Waxay tiri: "Haweeney laga abuuray feertaada, si aad iigu xasishid, aniguna aan kugu xasilo." Sidaas waxaa yiri lbu Cabbaas iyo Ibnu Mascuud iyo ghayrkoodba. oo saxaabada ka mid ah, intaas ayayna kusoo koobeen Al Qurdhubii iyo Al Khaazin. Ibnu Cuqayl wuxuu yiri: "taas ayaa loo nisbeeyey mufassiriinta intooda badan, sidaas ayaana loo yiri: Ilaahay wuxuu ku yiri Aadan: **"Wa qulnaa yaa Aadamu askun anta wa zawjuka Al jannata**(35)**",** oo macneheedu yahay: "Waxaanna niri: Aadanow deg adiga iyo haweentaaduba Jannada(35)", kaddib markuu ayada abuuray, ayagoo ay labadooduba Jannada ku dhex jiraan." Waxaa kaloo la yiri: wuxuu Ilaahay sidaas yiri ka hor intuusan Xaawo abuurin, hadalkuna wuxuu u socdaa ayadoon jirin, Cilmiga Ilaahayse ku sugan.

Meherka Xaawo

"Markaasuu Aadan xaggeeda gacanta u taagay -isagoo doonaya inuu la gogol galo, amaba uu ku macaansado la gogolgelid la'aanba-, markaasey malaa'igtu waxay tiri: "mah yaa Aadamu", oo ah "ka joogso Aadanow". Wuxuu yiri: "maxaan uga joogsanayaa ayadooba uu ayada Ilaahay aniga ii abuuray?" taasoo uu Ilaahay u ilhaamiyay, ama cilmiga lagama maarmaanka ah ah, ama uu ayadaba ka ogaaday markay u sheegtay in isaga loo abuuray. Markaasey waxay yiraahdeen: "ka joogso, oo ha taaban, jeer aad meherkeeda bixisid." Wuxuu yiri: "meherkeeduna waa maxay?" Waxay yiraahdeen: "waa inaad Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku sallidaa saddex goor". Waxaana halkaas ka cad inay malaa'igtu arrinkaas ku ogaadeen ayadoo loo waxyooday.

Al Callaamah abuu Al Faraj Cabdu Al Raxmaan bin Cali, al xaafith, al Bakrii Al Siddiiqii oo ah dhasha Nabi Muxammad, Sallallaahu Calayhi Wasallam, saaxiibkiisa ghaarka Abuu Bakar Al Siddiiqu Allaha raalli ka noqde, al Baghdaadii, al xanbalii, loona yaqaanno Ibnu Al Jawzii, al waacith, oo dhigay kutubbo funuunta oo idil ku saabsan, waa qaybaha kala duwan ee cilmiga Diintee, oo uu al xaafith (ibnu Xajar Al Casqalaanii) kitaabkiisa taariikhda uga yiri: "ma ogi qof allafay oo dhigay wuxuu allafay oo kale, kana gaaray wacthinta waa waanintee makaankuu ka

gaaray, waxaana la yiri: majaalistiisa qaarkood waxaa kasoo qayb galay oo yimid boqol kun oo qof, waxaana gole joog ka ahaa boqorro iyo waiziirro iyo Khulafaa', wuxuuna isagoo minbarka saaran yiri: "waxaan farteyda ku dhigay kun mujallad", waxaana gacanteyda ku tawbad keenay boqol kun oo nin, waxaana gacanteyda ku islaamay labaatan kun oo qof", wuxuuna dhintay maalin jimce ah ee bisha Ramadaan ay saddex tahay ee sanadka shan boqol iyo toddoba iyo sagaashan. "Waxaa Ibnu Al Jawziyyi loogu bixiyay oo loogu koofaaray ayadoo uu gurigooda dhexdiisa geedka jawzku ku yiillay. Intaasuu warka Al Xaafith ibnu Xajar ku egyahay. Ibnu Al Jawziyyi-gaani ma aha midka boqol sano ka dambeeyey oo ahaa Shamsu Al Diin Abuu Cabdu Allaahi Muxammad bin Abii Bakar bin Ayyuub ibnu Sacad bin Xurayz Al Zarciyyu oo loogu bixiyay isagoo tuulada Zarc ee Xawraan ka tirsan ee dalka Suuriya loo nisbeeyey, looguna bixiyay Ibnu Al Jawziyyah isagoo loo nisbeeyey dugsiga Dimishiq ku yiillay oo uu aasaasay Muxii Al Diin Abuu Al Maxaasin Yuusuf bin Cabdu Al Raxmaan bin Cali Al Jawzii, loona yiqiinna Al Madarisatu Al Jawziyyah, taasoo uu Ibnu Al Qayyim aabihiis madax ama agaasime ka ahaa, eraygaasoo afka Carabiga Qayyim lagu yiraahdo: marka ibnu Al Qayyim macneheedu waxaa weeye wiilka uu agaasimuhu dhalay.

Ibnu Al Jawzii abuu al Faraj wuxuu kitaabkiisa Sulwatu al Axzaani -oo macneheedu yahay "Daawada xuzniga ama calool xumida, murugta iyo tiiraanyada qaadda", takhaatiirtuna waxay daawadaas u yaqaannaan -siduu Al Raazii Mukhtaaru Al Sixaax ku yiri: Al Mufarrixu oo ah kan faraxa geliya- ku yiri: "Markuu Aadan Xaawo doonay oo uu dalbay, ayay ayaduna meher weydiisatay oo ay ka dalbatay, ayadoo hadalka malaa'igta maqashay, ama lagu ilhaamiyay, ama cilmi aqoontiisu ay lagama maarmaan tahay u lahayd. Markaasuu Aadan wuxuu yiri: "maxaan siiyaa?" Markaasuu Ilaahay wuxuu ku yiri, isagoo u waxyooday ama toosba ugu yiri: **"Yaa Aadamu salli calaa Xabiibii Muxammad bin Cabdi Allaahi cishriina marratin"** oo macneheedu yahay: "Meher ahaan u sii oo ku salli xabiibkayga midkaan jeclahay Muxammad bin Cabdu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, labaatan goor." Waxaad mooddaa inuu Aadan Ilaahay Tacaalaa weydiistay caddayn dheeri ah, kaddib markay malaa'igtu ku tiri inuu saddex goor Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku salliyo, taasoo meherka Xaawo ah. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa weydiiyay wuxuu siiyo, tanoo aan diidayn waxay malaa’igtu ku tiri inuu siiyo. Ama isagaaba u gartay inay taasi malaa'igtu ijtihaadkooda ku gaareen oo uu markaas amarka Ilaahay doonay. Tiro yar oo la sheegayna ma diideyso tiro ka badan inay ahayd. Waxaaba kaloo dhici karta inuu hadalka malaa'igtu ayaga ka yimid, ujeedadiisuna ay tahay inuu Aadan iyo Xaawo sidaas jacayl ku dhexmaro isku xira, amarka llaahayna, oo ahaa labaatan salli uu ahaa markuu damcay inuu Xaawo u dhowaado, sida warkaba ka muuqata. Sidaas ayuu meherka Xaawo wuxuu ahaa saddex iyo labaatan salli ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Waxaa saxiix ah inuu salligu meher noqon karo, ayadoo

markuu Aadan (ama nin kastaba) salliga ku dhawaaqay isagoo meherkeeda ula dan leh, ajarka salligaas, waxaa iska leh Xaawo. Isla markaasna faaiidada salligaas isagana way u sugnaaneysaa, ujeedada meherkuna ayaduu u noqonayaa oo u sugnaanayaa.

Markaassuu Aadan amarka la faray yeelay oo uu fuliyay, isagoo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, saddex iyo labaatan goor ku salliyay. Riwaayad kalena waxay leedahay: "Markuu Aadan Xaawo gacanta u taagay isagoo doonaya, ayay malaa'igtu waxay tiri: "mah yaa Aadamu", oo ah "dib u joogso Aadanow, jeer aad nikaaxsatid". Markaasuu Ilaahay ku nikaaxay, khudbana uu jeediyay oo uu yiri: **"Al Xamdu Lillaahi, wa Al Cathamatu izaarii, wa al Kibriyaa'u ridaa'ii, wa al khalqu kulluhum cabiidii wa imaaii. Ash-haduu yaa malaaikatii wa Xamalata Carshii wa sukaanu Samaawaatii Annii zawwajtu Xawaa'a amatii cabdii Aadama, badiicu qudratii, wa saniicu yadii calaa sadaaqin Taqdiisii wa Tasbiixii wa Tahliilii. Yaa Aadamu askun anta wa zawjuka Al jannata wa kulaa minhaa raghadan xaythu shi'tumaa wa laa taqrabaa haathihi al shajarata fa takuunaa mina al th-thaalimiina",** oo macneheedu yahay: "Al Xamdu Lillaahi, waynaantuna waa go'ayga, kibirkuna waa garba saarteyda, khalqiguna kulligood waa addoommadeyda, rag iyo haweenba. Markhaati ka noqda malaa'igteydey, iyo malaa'igta ah kuwa Carshiga Xambaarsanow iyo kuwa Samaawaatkeyga degganow, inaan addoonteyda Xaawo u guuriyey addoonkeyga Aadan, meherkeeduna uu yahay Taqdiisii oo ah waynayntayda, iyo Tasbiixdeyda iyo inuu yiraahdo Laa ilaaha illaa Allaahu. Aadanow deg adiga iyo haweentaaduba jannada, kana cuna xaggeeda cunno shifo iyo waasac ah meeshaad doontaan, hana u dhowaanina geedkaan, oo aad markaas ka mid noqotaan thaalimiinta." Riwaayaddaanna waxaa wariyay kitaabka Taariikhu Al Khamiisi.

Geedka laga reebay

Kaddib Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aadan iyo Xaawo u banneeyey nicmooyinka jannada, wuxuuna ku yiri: "Aadanow adiga iyo haweentaadu jannada dega". Al Qurdhubii wuxuu yiri: "Hadalkaas, Ilaahay wuxuu kaloo tilmaamayaa inay jannada ka bixi doonaan, maxaa yeelay degiddu milkin ma aha, ee muddo ayay soconeysaa, kaddibna way go'aysaa, oo sidaas ayay geliddooda Jannadu waxay u ahayd gelid degideed ee ma ayan ahayn gelid thawaab iyo ajar siin oo aan go'ayn ee waareysa."

Ibnu Cadhiyyah wuxuu yiri: "digidda looga digayo inayan geedkaas u dhowaan oo lagu yiri: **"Laa taqrabaa haathihi al shajarata**(35)**"** oo ah: "geedkaan ha u dhowaannina(35)" waxay daliil u tahay inayan degidda jannada ku waareyn, ayadoo qofka ku waaraya aan waxba loo diidin, waxna lagu amrin, waxna laga reebin." Markaasuu Ilaahay ka reebay geedka la yiraahdo Al Xindhatu**,** ahna geedka mirihiisa burka laga sameeyo, siday yiraahdeen Ibnu Cabbaas iyo Al Xasan iyo Cadhiyyah iyo Qataadah iyo Al Qurathii iyo Muxaarib iyo Muqaatil. Wahab wuxuu yiri: waana geedka uu Ilaahay adduunkaan ka yeelay rizqiga dhashiisa (Aadan,

oo ay rootiga iyo cunnada ka dhigtaan). Xabbad kasta oo miraha geedkaasna waxay le'ekeyd kellida lo'da, malabkana way ka macaanayd, saliidana ka jilicsanayd. Waxaa kaloo la yiri: waxaa laga reebay geedka canabka, siday u yiraahdeen ibnu Mascuud iyo ibnu Jubayr iyo Al Suddiyyu iyo Jacdah bin Hubayrah, waxayna yiraahdeen: taas ayaa u sabab ah in ubadkiisa khamrada xaaraan looga dhigay. Waxaa kaloo la yiri: wuxuu ahaa geedka tiinka**,** siduu u yiri Qataadah iyo ibnu Jariij, ayna saxaabada qaarkood ka wariyeen. Al Suhaylii wuxuu yiri: "Taas ayaa u sabab ah in markuu qof ku riyoodo isagoo cunaya miraha geedka. tiinka lagu fasiro shallayti iyo qoomamo, siduu, Aadan uga shallaayey oo uu u qoomamooday kaddib markuu cunay". Waxaana Calii laga wariyay inuu ahaa geedka kaafuurka. Al Diinwarii wuxuu yiri: wuxuu ahaa geedka cilmiga, cilmiga khayrka iyo cilmiga sharka oo uu qofka cunaa uu wax walba ogaado. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: wuxuu ahaa geedka al xanthal. Abuu Maalik wuxuu yiri: wuxuu ahaa geed timireedka. Waxaa kaloo la yiri: wuxuu ahaa geed qofka ka cuna uu wax ahaysiinayo. Intaasoo idil in kaloo ka badan oo ka duwanna waa la yiri. Ibnu Cadhiyyah wuxuu yiri: "ma jiro Xadiith intaas midkoodna xoojinaya oo uu salka. ku hayo. Sida toosanna waxay tahay in la ictiqaado inuu Ilaahay Aadan ka reebay geed, markaasuu amarkaas khilaafay oo uu ka cunay." Abuu Nasr Al Qushayrii wuxuu yiri: "Aabahay wuxuu oran jiray: waxaan guud ahaan ognahay inuu ahaa geedka mixnada, waa imtixaankee." Ibnu Jariir wuxuu yiri: "waxaa habboon inaanba la tilmaamin geedkaas, ayadoo ogaantiisu ay tahay cilmi aan waxtar lahayn, in jaahil laga yahay oo aan la aqooninna tahay jahli aan dhibaato geysanayn. " Al Suyuudhii wuxuu yiri: "Waxaa la yiraahdaa in geedkaas waxtar ku sugan tahay haddaan niraahno inuu ahaa geedka canabka, maxaa yeelay waxaa ku sugan tilmaan inay khamradu tahay hooyada inta xun oo idil (sidduu Cabdu Allaahi ibnu Cumar u wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Al Khamru ummuu al khabaa'ithi"** oo ah "Khamradu waa hooyada waxa xun"). Marka ka fogee (waa khamradee) si ayan adduunkaan oo lagu cabo u reebin oo ayan hor istaagin in aakhirada lagu cabbo, haddaan dhimasho horteed laga tawbad keenin, sida Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, looga wariyay.

Xaasidnimada Ibiis

Markay intaasoo nicmo ah ay Aadan iyo Xaawo isugu darsantay, oo la siiyay, ayuu Ibliis xasday. Al Thaclabii wuxuu yiri: "Ibnu Cabbaas waxaa laga wariyay inuu Ibliis magaciisu afka Saryaaniga ku ahaa Cazaaziil, afka Carabigana Al Xaarithu ama al Xarthu, waxaana Ibliis loogu bixiyay quusashada uu raxmada Ilaahay ka quustay, oo erayga Ibliis wuxuu ka yimid al ya'su oo macnihiisu yahay quusasho. Xaasidnimo waxaa la yiraahdo inuu qofi doono in nicmooyinka uu Ilaahay qof kale siiyay uu waayo oo ay ka zuulaan, waana isugu mid midka wax xasdayaa inay nicmooyinkaas isaga u soo wareegaan iyo in kale, oo qasadkiisu waxaa weeye inuu kaas la siiyay uu waayaa. Waana u quuri waa. Marka xaasidku

wuxuu rabaa inuu isagu Ilaahay u taliyo oo uu maamulo, isagoo doonaya inuu isagana nicmooyinkaas siiyo inta kalena uu qadiyo. Waxay Abuu Daauud iyo ibnu Maajah ka kala wariyeen Abuu Hurayrah iyo Anas inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "**Al xasadu ya'kulu al xasanaata kamaa ta'kulu al nnaaru al xadhaba''** oo macnihiisu yahay: "Xaasidnimadu waxay qofka xaasidka ah xasanaadkiisa (waa ajarka salaaddiisa iyo zakadiisa iyo soonkiisa iyo xajkiisa iyo acmaashiisa kaloo idil) u cuntaa si la mid ah siduu dabku qoryaha u cuno oo kale."

Sidaas ayuu Ibliis wuxuu ku ahaa midka khalqiga ugu horreeyey oo wax xasda, kibrana oo xaqqa iskala weynaada. Al Qurdhubii wuxuu yiri: "sababta kibirkiisu waxay ahayd isagoo madax u ahaa malaa'igta Samaa'u al dunyaa, oo ah Samada noogu soo xigta oo toddobada Samo ugu hooseysa iyo suldaankeeda iyo suldaanka arligaba, wuxuuna ahaa malaa'igta kooda ugu ijtihaad badan, uguna cilmi badan, wuxuuna maamuli jiray inta Samada iyo arliga u dhexeysa. Markaasuu wuxuu isku arkay inuu madax yahay, uuna cathiim wayn yahay. Taas ayaana u geysey inuu kibro. Markaasuu Ilaahy caasiyay oo uu amarkiisa diiday. Markaasuu Ilaahay masakhay oo uu dhalan rogay oo uu shaydaan ka dhigay la fogeeyey. Sidaas daraadeed ayuu hadduu gafka iyo dambiga ninka ka dhaca uu kibir ka yimid, ninkaas ka rajo beel, haddayse caasinnimo iyo amar diido ka timidna ka rajo qab." Waxaa kaloo la yiri: Ibliis wuxuu Ilaahay caabuday sideetan kun oo sano, waxaana la siiyay madaxtinnimada iyo al khazaanatu oo ah ilaalinta Jannada, ayadoo loogu xarig dheereynayo, si la mid ah sida munaafiqiinta adduunkaanba Ashahaadada loo siiyey oo ay u ashahaataan sida muslimiinta oo kale, iyo si la mid ah sida loo siiyay Balcamu bin Baacuuraa'a, oo magaca wayn oo Ilaahay oo wixii lagu waydiisto uu bixiyo darafka carrabkiisa loo saaray oo kale, kaddibna uu gaaloobay oo uu shaydhaan u raacay.

Intuu ibliis Ilaahay caabudayey

Sidaas ayay Ibliis madaxtinnimada iyo kibirku naftiisa u galeen oo ay ugu sugnaadeen, kuna xasileen. Ibnu Cabbaas wuxuu yiri: "Ibliis wuxuu u arkay inuu isagu ka sarreeyey oo uu ka deeqtoonaa malaa'igta, oo, sidaasuu u yiri: "anigaa isaga (waa Aadane) ka khayr badan". Al Qurdhubii wuxuu sheegay inuu Ibliis Ilaahay sideetan kun oo sano caabudayey. Kitaabka Muntahaa al Nuquuli wuxuu wariyay inuu Ibliis sagaal kun oo sano Ilaahay caabudayey. Kitaabka Taariikhu Al Khamiisina inuu Ibliis Ilaahay lababoqo1 iyo afartan kun oo sano caabudayey, Samaawaatka toddobada ah iyo arliyada toddobada ahna ayan ku harin taako, la cabbiro ee waa illaa kii ku sujuuday.

Ibliis oo albaabka Jannada yimid

Markaasuu Ibliis wuxuu yimid albaabka jannada, isagoo isu soo yeelay muuqaalka oday saddex boqol oo sano, oo sanooyinka adduunkaan ah, wax caabudayey. Halkaas ayuu wuxuu ku dhawray qof jannada kasoo baxa oo uu Aadan ka wareysto. Markaasaa waxaa soo baxay shinbirka la yiraahdo Al Dhaawuusu, oo ah shinbir dhulka ku nool oo aan duulin diiqa

dooradana ka wayn, qurux badan oo ay baalashiisu midabyo kala duwan oo qurux badan leeyihiin, lehna sayn baalal ka samaysan oo dheer oo uu markuu cayaarayo ama uu faanayo uu sida babbiska oo kale u fidiyo oo uu sare u qaado. Markaasuu Ibliis wuxuu ku yiri: "xaggee baad ka timid?" Wuxuu shinbirkii yiri: “waxaan ka imid beerta iyo jannada Aadan". Ibliis wuxuu yiri: “warkiisa i sii". Wuxuu yiri: "wuxuu ku sugan yahay xaaladda ugu fiican iyo nolosha ugu fiican. Jannada dhexdceda ayuu daal la'aan iyo farax ku nool yahay, annaguna waxaan ka mid nahay kuwa u adeega". Ibliis wuxuu yiri: "intaad jannada i gelisid ma ii geyn kartaa?" Shinbirkii wuxuu yiri: "oo adigu kumaad tahay?" Wuxuu yiri: "waxaan ka mid ahay malaa’igta la yiraahdo Al Karuubiyyiina, waxaanna u sidaa naseexo iyo waano". Shinbirkii wuxuu yiri: "hadaba waxaad u tagtaa malagga Ridwaan oo jannada maamula, kaasoo aan qofna waano iyo naseexo ka reebeyn." Ibliis wuxuu yiri: "waxaan doonayaa inaan ayaga ka qariyo." Shinbirkii wuxuu yiri: "qarintu ma noqoto naseexo iyo waano." Ibliis wuxuu yiri: "annagu haddaan madaxda Al Karuubiyyiina nahay sirta. ma sheegno. Marka haddaad jannada i gelisid sidaan ku leeyahay waxaan ku barayaa duco aadan dabadeed duqoobeyn oo aadan cirroole noqonayn waligaana." Shinbirkii wuxuu yiri: "ma karo inaan jannada ku geliyo, waxaanse kuu tilmaamayaa abeesada". Markaasey abeesadu jannada uga soo baxday, waxayna Ibliis ku tiri markuu waydiistay inay jannada geliso: "sidee baan kuu geliyaa ayadoo uusan Ridwaan ii oggolaanaynin?" Wuxuu ku yiri: "anigu waxaan isu rogayaa oo aan noqonayaa riix oo ah dabayl, marka waxaad i gelisaa miciyahaaga dhexdooda". Markaasey abeesadii sidaas yeeshay, kaddibna ay afkeeda isku aaburtay oo xirtay. Markaasuu Ibliis wuxuu ku yiri, kaddib markay jannada sidaas ku gelisay: “waxaad u tagtaa " **Shajaratu al Birri** " geedka baarrinnimada. Markaasey yeeshay oo ay geedkaas agtiisa tagtay. Xeeladdaas ayuu Ibliis albaabka jannada uga galay. Markaassu Aadan iyo Xaawo u yimid, wuxuuna ag istaagay geedka Baarrinnimada, wuxuuna ku heesay cuudka la fuufo isagoo abeesada afkeeda ku dhex jira. Markaasey Aadan iyo Xaawo abeesada u yimaadeen oo ay heesta cuudka dhegeysteen (cuudku waa al mizmaaru), ayagoo u maleynaya inay abeesadu heeseyso. Markaasuu Ibliis wuxuu labadooda ku yiri: "Soo dhowaada", ayaguna waxay yiraahdeen: "waa nalaga reebay u dhowaanshaha geedkaan". Markaasuu Ibliis booyay, uuna baroortay baroorasho labadoodaba calool xumeysey. Sidaas ayuu Ibliis wuxuu ku ahaa kan ugu horrecya oo baroorta (waa baroortana waxaa afka carabiga lagu yiraa naaxa). Markaasey labadooduba waxay ku yiraabdeen, amaba uu Aadan keligiis ku yiri: "maxaa kaa boohinaya?" Ibliis wuxuu yiri: “Waxaan la booyayaa anigoo labadiinna daraadeed u barooranaya, sababtuna waxay tahay inaad dhimaneysaan, oo aad nicmooyinkaan seegeysaan, aadna waayeysaan." Markaasey waxay labadoodu ku yiraahdeen: "oo dhimasho maxay tahay?" Wuxuu yiri: "waxaa idinka tegeya ruuxa iyo itaalka, xubnuhuna dhaqdhaqaaq ma yeelanayaan, ishana arag u hari mayo, dhegtana wax maqal ahi u hari mayo." Markaasuu

hadalkaas naftooda wax geliyay, oo ay markaas kurboodeen. Markaasuu Ibliis, lacnadda Ilaahay korkiisa ha ahaatee, wuxuu yiri, siday noo sheegtay Aayadda boqol iyo labaatanaad ee Suuratu Dhaahaa: **"Yaa Aadamu hal adulluka calaa shajarati al khuldi wa mulkin laa yablaa**?(120)**"** oo macneheedu yahay: "Aadanow, ma ku tusiyaa geedka waaridda iyo xukun aan gaboobeyn?(120)" Haddaad taas dooneysid, ayuu yiri, "geedkaan ka cun". Markaasey waxay labadoodu yiraahdeen: "Cunidda, geedkaan waa nalaga reebay". Markaasuu Ibliis wuxuu yiri, siday noo sheegtay Aayadda labaatanaad ee Suuratu Al Acraaf. **"Maa nahaakumaa Rabbukumaa can haathihi al shajarati illaa an takuunaa malakayni aw takuunaa mina al khaalidiina**(20)**",** oo macneheedu yahay: "idiinkama reebin Rabbigiin geedkaan waxaan ahayn inaydnaan noqon laba malag ama aad ahaataan kuwa waara(20)." Ibliis wuxuuna labadoodaba ugu dhaartay inuu naseex u yahay waaninaya. Waxaa kaloo la yiri inay labadoodu Ilaahay ku dhaariyeen inuu yahay mid u naseexeynaya, markaasuu u dhaartay. Sidaas ayuu Ibliis wuxuu ku yahay kan ugu horreeya oo been ku dhaartay, iyo midka ugu horreeya oo wax khayaanay. Markuu Ilaahay ugu dhaartay ayuu wuxuu ku yiri: "Kiinneebaa cunidda geedka ku hormaraya oo kan kale gacanta sare ka yeelanaya?" Markaasey Xaawo xabbad miraha geedka ka cuntay, kaddibna ay Aadan u qurxisay oo ay u faanisay ilaa uu isaguna ka cuno, waxayna u keentay saddex xabbo,waxayna tiri: "anigu xabbad ayaan ka cunay wayna dhadhan macaanayd, wax dhibaato ahna, igama ayan soo gaarin". Markaasuu Aadan dib uga joogsaday cuniddeedda, uuna sugay boqol sano, oo uusan cunin. Markaas kaddib ayuu ayadu xabbadahay haysay ka qaatay oo uu xabbad afka gashaday. Intuusan xabbaddaas uu afka gashaday dhadhankeedu dhuuntiisaba gaarin, xabbadda jirmigeeduna uusan uurkiisaba gaarin ayaa waxaa madaxiisa ka duulay taajkiisa u saarnaa oo ay ku dheehnaayeen luul iyo yaaquut iyo jawharado, waxaana loogu dhawaaqay oo lagu yiri: "Aadanow, khasaaradaada iyo murugtaadu way dheeraanayaan". Isla markaasba waxaa hoostooda ka siibtay sariirtay saaraayeen, oo sariirtu waxay labadooda ku tiri: “Waxaan ka xishoonayaa Ilaahay inaan kuwa amarkiisa diiday sariir u noqdo". Waxaa kaloo Aadan iyo Xaawo isla markaasba ka siibmay dugaagada ama jijimaha dhudhummada u surnaa iyo kuwa lugaha u surnaaba, kuwaanoo afka carabiga khalkhaal lagu yiraahdo, waxaana ka duulay suumankay xirnaayeen oo jawharaduhu ku dheehnaayeen. Waxaa kaloo labadoodaba laga siibay dharkay ximaayeen. Aadan wuxuu labbisnaa toddoba boqol oo go', amarkooduna wuxuu noqday sida la ogyahay.

Aadan iyo Xaawo waxay geedka uga cuneen ayagoo malaynayey inuusan axadna ku dhiirranayn inuu Ilaahay been ugu dhaarto, siduu Subxaanahu wa Tacaalaa quluubtooda ugu waynaa daraadeed. Waxaaba intaas dheer inaan beenba la aqoon waxay tahay. Waxaa intaas oo idil ka muuqata iyo siday noo sheegtay Aayadda kow iyo labaatanaad ee Suuratu Al Acraafi, inuu Ibliis Aadan iyo Xaawo afka iyo si toos ah ugala hadlay. Waxaa kaloo la yiri: "bal wuu waswaasiyay, wuxuuna ku baadiyeeyey awoodda uu

Ilaahay siiyay, siduu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yiri: **"Inna al sh-shaydhaana yajrii min ibni Aadama majrii al ddammi",** oo macneheedu yahay: "Shaydaanku wuxuu uga socdaa dhasha Aadan meeshuu dhiiggu uga socda, (waa xididdadee)". Waxaase la isku khilaafay siduu Ibliis Aadan iyo Xaawo ku gaaray, kaddib markii isaga Samada laga soo eryay, siday noo sheegtay Aayadda afar iyo soddonaad ee Suuratu Al Xijri: **"Qaala fa akhruj minhaa fa innaka rajiimun**(34)**",** oo macneheedu yahay: "Wuxuu yiri: "Ka bax xaggeeda adigu waxaad tahay mid la rajmiyaye (oo sida zaaniyiinta muxsinka ah dhagax lagu rajmiyo oo loola dhaco ayaa Ibliis waxaa lagu rajmiyaa markuu Samada u dhowaado oo loola dhacaa shiilo dab ah oo ololaya, taasoo aan habeenkii cirka ku aragno) Waxaa la yiri: waxa laga reebay Ibliis waa gelidda jannada ee waswaasidda lagama reebin, ayadoo ibtilo iyo imtixaan ah. Waxaa kaloo la wariyay inuu isku deyey inuu jannada galo oo ay markaas malaa'igta ilaalineysa ka reebtay, kaddibna uu galay isagoo abeesada afkeeda ku dhex jira. Waxaa kaloo la yiri: jannada ma uusan gelin kaddib inta laga soo saaray. Ak Xasan wuxuu yiri: "Ibliis wuxuu arkay Aadan iyo Xaawo oo jannada albaabkeeda taagan oo kasoo baxaya". Waxaa kaloo la yiri: Ibliis isagoo adduunkaan jooga ayuu inta Samada u dhowaado ayuu labadooda la hadli jiray. Waxaa kaloo la yiri: wuxuu istaagay jannada albaabkeeda markaasuu u yeeray. Waxaa kaloo la yiri: arliga isagoo jooga ayuu u dhawaaqay, markaasey maqleen ayagoo jannada ku jira. Al Sayuudhii wuxuu yiri: "Midda laga wariyay Cabdu Allaahi ibnu Mascuud iyo Cabdu Allaahi ibnu Cabbaas iyo Abii Al Caaliyah iyo Wahab iyo Munabbih iyo Muxammad bin Qays waxaa weeye inuu jannada ku galay isagoo abeesada afkeeda ku dhex jira, uuna sidaas si toos ah labadooda kula hadlay, siduu raggaas uga wariyay Ibnu Jariir, isagoo aan ragga wariyay midna ka xusin iyo silsiladda lagu wariyay midna, in kastoo silsiladda warisay la'aanteedu ayan inuu warku jiro diidayn(34).."

Wada hadalka Ilaahay Tacaala iyo Aadan

Markuu Aadan geedkii laga reebay u dhowaanshihiisaba ka cunay, ayuu Ilaahay Tacaalaa la hadlay, wuxuuna ku yiri isagoo canaananaya, imtixaanayana: "**Yaa Aadamu alam yakun fii maa abaxtu laka mina al jannati manduuxatan can haathihi al shajarati?"** oo macneheedu yahay: "Aadanow, soo ma ayan ahayn waxaan kaaga banneeyey jannada dhexdeeda kuwo waasic ah oo kaa kaafiya geedkaan?" Aadan wuxuu yiri: "haa Rabbiyow, waxaanna ku dhaartay Cizzadaadee, laakiin waxaan u maleeyey inuusan axadna Adiga been ugu dhaaraneyn, oo taasaa igu xambaartay inaan ka cuno". Ilaahay wuxuu yiri: **"Wa Cizzatii wa Jalaalii la ahbidhannaka ilaa al ardi, laa tanaalu al caysha illaa kaddan",** oo macneheedu yahay: "waxaan ku dhaartay Cizzadeyda iyo Jaliilnimadeyda oo ah Waynaanteyda, waxaan kuu dejinayaa arliga, halkaasoo aadan cayshka ku kasbanayn si dhib badan oo daal miiran ah mooyee". Markaasuu Adan is jejebiyay oo uu is dulleeyey oo uu cudurdaartay. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: **"Laa yujaawirunii man**

casaanii. Ukhruj ", oo macneheedu yahay: "daris ila noqon mayo mid i caasiyay oo amarkeyga diiday ee ka bax." Markaasuu Aadan wuxuu xaqqa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ilaahay ku waydiistay inuu u dambi dhaafo. Markaasuu Ilaahy Tacaalaa wuxuu yiri: **"Qad ghafartu laka bi xaqqihi, wa laakin laa yujaawirunii man casaanii",** oo macneheedu yahay: "Xaqqiisa ayaan kuugu dambi dhaafay, laakin ilama darsayo qof amarkayga diiday."

Soo degashada Aadan

Markaasuu Aadan booyay, kaddibna u sagootiyay kulli inta jannada ku jirta oo idil, ilaa heer ay geedeheedu la booyeen intaan geedka cuudka la shito ahayn. Markaasaa geedka cuudka waxaa la weydiiyay: "adigu booyi meysid miyaa?" Wuxuu yiri: "ma caasi ayaan u oyaa?" Markaasaa loo dhawaaqay geedkaas oo lagu yiri: **"kamaa cathamta amranaa cathamnaaka, wa laakin hayya'naaka lil ixraaqi",** oo macneheedu yahay: "sidaad amarkeenna u weyneysey ayaan kuu weyneynnay, laakiin waxaan kuu habeynnay gubidda." Geedka cuudku wuxuu yiri: "Tanna waa maxay?" Waxaa lagu yiri: " **Anta cath-thamtanaa fa kathaalika yucath-thimuunaka, laakin lam yaxtariq qalbuka li muxibbiinaa, fa li thaalika yaxriquunaka",** oo macneheedu yahay: "adigu waad na weyneysay, sidaas oo kale ayay ayaguna kuu weyneynayaan. Laakiin qalbigaagu uma uusan guban midkaan jecleyn (Aadan). Sidaas daraadeed ayay kuu gubayaan". Aadan markuu albaabka jannada yimid ayuu mid labadiisa lugood ka mid ah albaabka kasoo saaray oo uu dhigay, wuxuuna yiri: "Bismillaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi". Markaasuu Jibriil wuxuu ku yiri: “waxaad ku hadashay eray wayn, marka cabbaar taagnow, ayadoo ay dhici karto inuu Midkaan loo jeedini kuu turee". Markaasaa Jibriil loo dhawaaqay oo la yiri: **"Dachu yakhruju",** oo ah "iska daa ha bexee". Markaasuu Jibriil wuxuu yiri: "llaahayow, wuxuu kuugu yeeray Al Raxmaanu - oo ah Midka naxariista badan- ee marka u naxariiso". Markaasuu Ilaahay wuxuu yiri: **"In arxamhu la yanqusu min raxmatii shay'an, wa in yath-hab laa yucaabo calayhi shay'un. Fa khalli canhu yath-hab thumma yarjic fii mi'ati uluufin min awlaadihi cusaatin xattaa yushaahida fadlanaa calaa awlaadihi wa yaclama sacata raxmatinaa"**, oo macneheedu yahay: "haddaan u naxariisto, taasi naxariisteyda waxba ka dhimi mayso, hadduu tagana waxba lagu ceebeyn mayo. Marka iska daa ha tagee, kaddibna soo laabtee isagoo ay la socdaan boqol kumanyaal ah, waana malaayiin, oo dhashiisa ah oo caasiyiin ah, si uu u arko deeqdeenna aan ubadkiisa siinaynno, uuna u ogaado waasicnimada raxmadeenna". Taasi waa khulaaso lasoo koobay waxa ay wariyeen ragga qisaska wariya. Markaasuu Aadan wuxuu ku soo degay buur la yiraahdo Buuth oo dalka Hindiya ku taalla. Aadan wuxuu la soo degay carafta jannada, caraftaasoo ku dhegtay Hindiya geedeheeda, waadiyadeeda iyo banankeedaba, kuwaasoo intii ku tiillayba ay carafi ka buuxsantay. Xaawo waxay kusoo degatay Jiddah. Waxaa kaloo la yiri waxay kusoo degatay Carafo. Waxaa kaloo la yiri waxay kusoo degatay Al

Muzdalifah. Ibliis wuxuu kusoo degay beledka la yiraahdo Al Ubullah, ahna beled u dhow magaalada Al Basrah ee dalka Ciraaq. Waxaa kaloo la yiri waxaa lagu dejiyay Jiddah. Abeesadiina waxaa lagu soo dejiyay meesha la yiraahdo Baysaan, waxaana kaloo la yiri degmada Sajistaan. Waxaana kaloo la yiri degmada Isfahaan oo labadaan danbeba ay Iiraan ku yaalliin. Intaasoo idil meelo ka duwanna waa la sheegay.

Dhiigga caadada ee haweenka

Cabdu Allaahi ibnu Cabbaas waxaa laga wariyay inuu yiri: "Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: **"Yaa Aadamu maa xamalaka calaa maa sanacta?"** oo ah: "Aadanow maxaa kugu xambaaray waxaad fashay?" Aadan wuxuu yiri: "waxaa ii qurxisay Xaawo". Markaasuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: **"Fa Innii ucqibuhaa an laa taxmala illaa karhan, wa la admiyannahaa fii al shahri marratayni",** oo, macneheedu yahay: "marka Anigu waxaan uga abaalmarinayaa inayan uur yeelan oo ayan xaamilo noqon cunug siddah ayadoo ku dhibtoota mooyee, ayanna dhalin ayadoo ku dhibtoota mooyee, waxaanna dhiig ka keenayaa bishiiba laba goor". Imaamka Xadiithka sharxay wuxuu yiri: "waxaa dhici karta inuu macnuha labada goor ee dhiiggu yahay inuu dhiig ka keeno, taasna ay ku dhabowdo ayadoo uu mar keli ah ka yimaado, ama ayba sidaas ahaato oo ay istaahisho inay laba goor dhiigto, yuusanba ka imaane, si la mid ah siduu Ilaahay u cafiyo macaasida ciqaabo lagu mutaysto oo kale. Waxaa kaloo la yiri: waxaa dhiigga loogu riday ciqaab looga abaalmarinayo inay geedka dhiig ka keentay. Waxaa kaloo la yiri: waa ciqaab inay abeesada lugaha ka jebisay. Waxaana dhici karta inay intaasoo idilba sabab u yihiin." Al Xaakim iyo Ibnu Al Munthir waxay isnaad saxiix ah uga wariyeen Ibnu Cabbaas inuu yiri: "Bilawga dhiigga caadada ihi wuxuu Xaawo ku dhacay kaddib markay jannada kasoo degatay oo ay dhulka timid". Cabdu Al Razzaaq wuxuu sanad saxiix ah Ibnu Mascuud uga wariyay inuu yiri: "Ragga iyo haweenka reer Banii Israa'iil way wada tukan jireen, markaasey haweenku ragga jirkooda u muujin jireen. Markaasuu Ilaahay dhigga xaydka korkooda yeelay, uuna masaajidyada ka mamnuucay oo ka reebay." Cadu Al Razzaaq wuxuu Xadiithkaas mid la mid ah ka wariyay Caa'ishah, Allaha raalli ka noqdee. Xaadiithkaas muuqaalkiisa kore waxaad mooddaa inuu tilmaamayo inuu dhiigga caadada ihi marka ugu horreyseyba uu haweenka reer Banii Israa'iil ku dhacay, Al Bukhaarina wuxuu yiri: "Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Inna haathaa amrun katabahu Allaabu calaa banaati Aadama",** oo macneheedu yahay: "kani -waa dhiigga caadada ee haweenkee- waa amar uu Ilaahay u dhigay gabdhaha Aadan korkooda." Waxaa labadaas Xadiith kulmiyey Al Xaafith Ibnu Xajar oo yiri: "Dhiigga lagu riday gabdhaha reer Banii Israaiil wuxuu hayey muddo dheer, taasoo abaalmarin ama ciqaab looga dhigay, ee ma aha inay ayagu ugu horreeyeen gabdho uu dhiig ku dhaco." Al Dhabraanii iyo ghayrkiisba waxay Ibnu Cabbaas iyo ghayrkiisba ka wariyeen inuu hadalka Ilaahay Tacaalaa ee ku sugan qisada Ibraahiim oo ah: **"Wa imra'atuhu qaa'imatun fa**

daxikat(71)**",** oo macneheedu yahay: "Haweentiisuna waa taagnayd markaasey qososhay(71)", ahna Aayadda kow ito toddobaanaad ee Suuratu Huud, macneheedu waxaa weeye, ayay yiraahdeen, "waxaa ka yimid dhiigga caadada ah, oo al daxku waa magac kale oo xaydka ama dhiigga caadada haweenka. Qisaduna way ka horreysey reer Banii Israaiil, oo waaba Nabi Ibraahiim, Calayssalaamu." Caddayn kalena waxaa weeye in marka la yiraahdo gabdhaha Aadan, ayan Xaawo ka baxsanayn, ayadoo ayada laga abuuray feertiisa, oo ay markaas la mid noqotay gabdhihiisa oo kale, in kastoo ayan run ahaantii gabadhiisa ahayn oo uusan dhalin.

Boohinta Aadan

Wahab bin Munabbih, oo ah ibnu Kaamil al xaafith abuu Cabdu Allaahi al Sancaanii, al callaamah, al akhbaarii, runlowga kutubbada badan sannifay, kana wariyay Ibnu Cabbaas iyo Ibnu Cumar, isagana ay qoyskiisu ka wariyeen iyo Samaak bin al Fadl, dhintayna sanadka Hijriga ee boqol iyo afar iyo toban, wuxuu yiri: "Aadan marka arliga loo soo dejiyay wuxuu ahaaday mid booyaya saddex boqol oo sano, ayadoo ayan ilmadu ka joogsanayn, ayanna ka qallaleyn waxa ku dhacay daraadeed." Al Mascuudii, oo ah Cabdu Al Raxmaan bin Cabdu Allaahi bin Cutbah bin Mascuud al Kuufii, al xaafith, dhintayna sanadka boqol iyo lixdan ama shan iyo lixdan Hijriga, uuna ibnu Numayr ka yiri: "wuxuu ahaa nin thiqqah ah oo lagu kalsoon yahay, markii dambena isku qasmay, ibnu Muscar uu yiri: "Ma ogi qof isaga uga cilmi badan cilmiga Cabdullaahi ibnu Mascuud", Allaha raalli ka noqdee, wuxuuna yiri: "Haddii ilmada dadka arliga deggan oo, idil la isku keeno oo la barbar dhigo ilmaduu Aadan ooyay oo uu daadiyay, waxaa badan ilmaduu Aadan ooyay markuu Ilaahay jannada kasoo saaray", tiiraanyo uu ka calool xun yahay kasoo tegidda jannada uu kasoo tegey, iyo inuu geedkii laga reebay ka cunay, in kastoo loo dembi dhaafay intuusanba kasoo bixin, siduu u gooyey Al Qurdhubiii iyo ghayrkiisba. Sababtu waxay tahay cabsi uu cabsaday iyo xishood uu xishooday, iyo kaamilnimada ay qalbigiisa ku sugantahay waynaanta Ilaahay. Sheekheennu wuxuu yiri: "Waxaa dhici karta inuu muraadku yahay marka la leeyahay "Haa waqtiga tawbad keenidda" inaan laga aqbalin tawbaddiisa muddo kaddib markii uu jannada kasoo baxay mooyee".

Mujaahid bin Jabyar al Makhzuumii mawlaahum al Makkii, al thiqqah, al xaafith oo Tafsiirka Imaam ku ah iyo cilmigaba, imaamnimadiisana la isku waafaqay, in kastoo uu ibnu Xibbaan kitaabkiisa Al ducafaa'u ku yiri: "waa marduud", kuna dhintay Makkah isagoo sujuudsan sanadka Hijriga. ee boqol iyo saddex, sanad kalena waa la sheegay, axaadiithtu wariyayna ay soo wariyeen kutubbada lixda ah, wuxuuna yiri: "Aadan wuxuu booyayey boqol sano isagoo aan madaxiisa marna Samada kor ugu qaadin" xishood uu Rabbigiis ka xishoonayo daraadeed. Boqolkaan sano waxay ka mid yihiin saddexda boqol oo uu Wahab xusay. Ilaahayna wuxuu ilmadiisa ku dhaliyay cuudka la yiraahdo al cuudu al radbo"**,** oo ay dhici karto inuu yahay midka la shito oo la bukhuursado, waxaana la wariyay, siduu

sheekheennu u yiri, inuu Aadan jannada kasoo degay isagoo cuudkaas sita oo uu jannada dhexdeeda kasoo qaatay. Hadday sidaas tahayna, waxaa loo qaadanayaa inuu cuudkaasi kaddib ilmadiisa dhulka uga soo dhashay oo uu sidaas kusoo baxay. Waxaa kaloo ilmadiisa kusoo baxay zanjabiisha oo dednaanta madaxa faydda araggana xoojisa oo mugdiga ka qaadda; iyo geedka la yiraabdo al sandalu oo loox qaali ah laga sameeyo, midabkiisuna guduud ama caddaan yahay, bararkana u daawo ah oo qaada, cudurrada wadnaha iyo madax xanuunka iyo qandhadaba u daawo ah. Waxaa kaloo ilmadiisa ku soo dhashay anwaacda kala duwan ee dhirta cadarka laga sameeyo. Xaawana waxay ooyeysey ilaa uu Ilaahay ilmadeeda kusoo dhaliyay qurunfulka iyo dhirta cadarka laga sameeyo oo la yiraahdo al aqaawii**,** iyo dhirta cuntada lagu darsadaba. Marka, ubadka Aadanow Bal arka siduu aabihiin uu hal ficil ama fal oo keli ah, oo uu falay isagoo halmaansan amarka Ilaahay ugu ooyayey saddex boqol oo sano. Marka maxaad faleysaan kuwiinna dambiyada waaweyn kas iyo ula kac u sameeyey? Marka, ku cibro qaata, oo ka qiyaas qaata in aabihiin jannada looga soo saaray ciqaab lagu ciqaabayo hal dambi oo uu galay, kuwiinna, absaarta iyo aragga u saaxiibka ahow. Aadan wuxuu ahaa mid markuu arkaba malaa'igta Samada kor usii tafeysa iyo kuwa kasoo deganayaba uu hilowga uu waddankiisii u qabo uu kordho, waddankaasoo ahaa beelaha kala duwan ee jannada, kuwaasoo isaga loo banneeyey intuu dhexdeeda ku jiray, ayadoo aan barna laga reebin. Aadan wuxuu indhihiisa ku arki jiray malaa'igta, in kastoo ayan caddayn inuu suuraddooda asliga ah ku arki jiray iyo in kale. Waxaana la sheegay inay tahay arrin Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gooni loo siiyay oo isaga khaaska ay u tahay inuu Malag Jibriil suuraddiisa asliga ah laba goor ku arkay. Wuxuu kaloo Aadan xusuustay cahdiga iyo ammaanka uu ku sugnaa ka hor intuusan arliga usoo degan iyo ballankii Ilaahay oo uu isagu halmaamay, oo ahaa inuusan geedka u dhowaanin. Wuxuu kaloo xusuustay deriskiisii jannada oo ahaa malaa'igta iyo wixii xoolo ahaa oo jannada dhexdeeda kula noolaa, oo sidaas deriskiisa ku noqday. Marka, kuwiinna dambiyada waawayn gala, iska ilaaliya simbiriiriqasho uu midka wax jeceli uu midkuu jecel yahay ku yiri: " **Haathaa firaaqu baynii wa baynika**(78)**",** oo ah Aayadda sideed iyo toddobaatanaad ee Suuratu Al Kahfi oo macneheedu yahay: "Kani waa kala tagga dhexdeenna(78)", ahna qisada Nabi Muuse, Calayhissalaamu, iyo Al Khidr, Allaha raalli ka noqdee, ayadoo uu Aadan markuu geedka ka cunay ay ka fogaadeen kuwuu jeclaa, markuu arligaan usoo degayna ayan cidna hoy siin. Marka, wa sida ayagoo, sida uu Al Khidr Muuse ku yiri oo kale, ayaguna Aadan ku yiri: **"Haathaa firaaqu baynii wa baynika**(78)**",** oo ah Aayadda sideed iyo toddobaatanaad ee Suuratu Al Kahfi oo macneheedu yahay: "Kani waa kala tagga dhexdeenna(78)". Marka midkaaga caqliga fiyow lahow, u fiirso siduu aabahaa Aadan ugu fariistay sariirta boqortooyada, oo sida nasoo martay ka sameysan dahab iyo yaaquut guduudan oo toddoba boqol oo lugood leh, oo Aadan karaameyn loogu fariisiyay, oo uu markaas gacanta u taagay

luqmad laga reebay, oo markaas jannada looga soo saaray. Marka, ubadkiisow, iska jira cirib xumida macaasida, maxaa yeelay qofkay haleesho hoos ayay u dhigtaa, martabada uu lahaana way ka dejisaa.

koofaaridda Aadan Abaa Muxammad

Ibnu Dhughrubak, oo ah caalinka Xadiithka ku xeel dheer, magaciisuna yahay Sayfu Al Diini Abii Jacfar Cumar bin Ayyuub bin Cumar Al Ximyarii Al Turkumaanii Al Dimishqiyyi Al Xanafii, wuxuu kitaabkiisa Al Durru al Nathiimi fii Mawlidi Al Nabiyyi Al Kariirni ku yiri: "Waxaa la wariyay in markuu Ilaahay Tacaalaa Aadan abuuray uu ku ilhaamiyay, kana hor intaan axad malaa'igta ka mid ahi uusan koofaartaas ugu yeerin, inuu yiraahdo: "Rabbigayow, maxaad iigu koofaartay Abaa Muxammad? (oo ab Muxammad aabihiis)?" Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: **"Yaa Aadamu irfac ra'saka!",** oo ah "Aadanow, madaxaaga kor usoo qaad!" Markaasuu Aadan madaxiisa kor u qaaday. Markaasuu wuxuu ku arkay nuurka Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo suuraddiisa leh Carshiga. Markaasuu Aadan wuxuu yiri: "Rabbiyow, muxuu yahay nuurkaani?" Wuxuu Ilaahay Tacaalaa yiri: **"Haathaa nuuru Nabiyyin min thurriyyatika ismuhu fii Al Ssamaa'i Axmadu wa fii al arli Muxammadun, lawlaahu maa khalaqtuka, wa laa khalaqtu Samaa'an wa laa ardan",** oo macnihiisu yahay: "kani waa nuurka Nabi dhashaada ka mid ah, magaca malaa'igta Samadu u taaqannana uu Axmadu yahay, dadka arliga degganna ay Muxammadun, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yaqaannaan. Hadduusan isga ahaan lahaynna, kumaba aanan abuureen, mana aanan abuureen Samo iyo arli midna." Waxaana inay sida uu Xadiithkaan lagu wariyay tahay u marag Xadiithka uu Al Xaakim kitaabkiisa Saxiixa ah ee Al Mustadrik Abuu Xafs Amiirul Mu'rniniina Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee, uga wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Anna Aadama Calayhissalaamu ra'aa isma Muxammadun maktuuban calaa Al Carshi, wa anna Allaaha Tacaalaa qaala li Aadama: "law laa Muxammadun maa khalaqtuka"."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "inuu Aadan, Calayhissalaarnu, arkay Magaca Muxammadun, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo Carshiga ku dhigan iyo inuu markaas Ilaahay Tacaalaa Aadan ku yiri: "haddayan Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ahaan lahayn kumaba abuureen. "

Abuu Al Shaykh wuxuu kitaabka Dhabaqaatu Al Asfahaaniyyina ku wariyay, Al Xaakimna inuu Ibnu Cabbaas yiri: "Ilaahay wuxuu. Nabi Ciise, Calayhissalaamu, u waxyooday: **"Aamin bi Muxammadin, wa mur ummattaka an yu'minuu bihi, fa law laa Muxammadan maa khalaqtu Aadama wa laa al jannata wa laa al nnaara, wa la qad khalaqtu Al Carsha calaa al maa'i, fa idraba, fa katabtu calayhi Laa ilaaha illaa Allaahu Muxammadun Rasuulu Allaahi, fa sakana",** oo macnihiisu yahay: "Ilaahay wuxuu Ciise u waxyooday oo uu ku yiri: "aamin Muxammad, ummaddaadana waxaad amartaa inay ayaguna rumeeyaan, oo haddayan Muxammad ahaan lahayn Aadanba ma aanan

abuureen iyo jannada iyo naarta midna. Markaan Carshiga biyo korkooda ku abuuray ayuu nuuxnuuxsaday, markaasaan waxaan korkiisa ku dhigay **Laa ilaaha illaa Allaahu Muxammadun Rasuulu Allaahi,** markaasuu xasilay oo degay." Xadiithkaan waxaa saxiix ka dhigay Al Xaakim, waxaana hubiyay oo sugay Al Subkii, kuna sugay kitaabkiisa "Shifaa'u Al Siqaami" oo macnihiisu yahay "Bogsiinta kuwa buka", Al Balqiinina wuxuu ku sugay oo uu saxiixnimadiisa isaguna ku qiray fatwooyinkiisa. Xadiithkaas oo kalena ninna ra'yigiisa kama yiraahdo ee xukunkiisu waa al rafco, oo ah in Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kor loogu qaado oo lala xiriiriyo, oo la yiraahdo waa Xadiithka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Al Daylamii wuxuu Ibnu Cabbaas, Allaha isaga iyo aabihiisba raalli ka noqdee, ka wariyay inuu yiri inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: " **Ataanii Jibriilu fa qaala: "Inna Allaaha yaquulu: "Law laaka maa khalaqtu al jannata wa law laaka maa khalaqtu al nnaara".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "waxaa ii yimid Jibriil, wuxuuna yiri: "Ilaahay wuxuu leeyahay: "haddayan adiga ahaan lahayn ma abuureen jannada, haddayan adiga ahaan lahaynna ma abuureen naarta". Ibnu Sabc iyo Al Cazafii waxay Cali bin Anii Dhaalib, Allaha raalli ka noqdee, ka wariyeen inuu yiri: "Ilaahay wuxuu Nabigiisa ku yiri: **"Min ajlika asdhaxu al Badhaxaa'a, wa amuuju al mawja, wa arfaco Al Samaa'a, wa ajcalu al thawaaba wa al ciqaaba."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "adiga daraaddaa ayaan waadiyada u fidiyay (ama waaba waadiga Makkah Al Mukarramah oo ay magacddeeda ka mid tahay Al Badhaxaa'a), oo aan hirarka baddana u kiciyaa, aan Samadana kor uga yeelay, aanna abaalmarin iyo ciqaabna u yeelay." Waxaa la yiri: taasna Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ghayrkiis uma sugnaan, ha ahaado Nabi ama malag hadduu doonee. Wa Lillaahi darru (oo la yiraabdo marka qof la weyneynayo, oo uu macneheedu weyneyn yahay, macneheeduna yahay: caanaha markuu dhashay lagu rabbeeyey Axad aan Ilaahay ahayn loo nisbeyn mayo, ayadoo uu qofkaasi kaamilnimadiisa lagu ammaanay ay caadada ka saartay oo ka kor marisay) midka isagoo Xadiithkaan aasaas ka dhiganaya iyo tawasulka Aadan uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu Ilaahay ugu tawasulay, oo sidaas tawbadiisa lagu aqbalay, waana gabayaaga, Saalix bin Xusayn oo yiri:

1. Wa kaana laday Al Firdaws fii zamani al sabaa
   Wa athwaabu shamli al unsi muxkamatu al sadaa
2. Yushaahidu fii Cadan diyaa'an mushacshacaa
   Yaziidu calaa al anwaari fii al daw'i wa al hudaa
3. Fa qaala Ilaahii ma al diyaa'u allathii araa
   Junuudu Al Samaa'i tacshuu ilayhi taradudaa.
4. Fa qaala Nabiyyun khayra man wadhi'a al tharaa
   Wa afdalu man fii al khayri raaxa aw ightadaa
5. Takhayyartuhu min qabli khalqika Sayyidan
   Wa albastuhu qabla al Nabiyyiina su'dudaa

6. Wa acdadtuhu Yawma Al Qiyaamati Shaafican
Mudhaacan ithaa maa al ghayru xaada waxiidaa
7. Fa yashfacu fii inqaathi kulli muwaxidin
Wa yudkhiluhu Jannati Cadnin mukhalladaa
8. Wa inna lahu asmaa'un sammaytahu bihaa
Wa laakinnanii axbabtu minhaa Muxammadaa
9. Fa qaala Ilaahii amnun calayya bi tawbatin
Takuunu calaa ghasli al khadhii'ati musaccadaa
10. Bi xurmati haathaa al isma wa al zulfata allatii
Khasasta bihaa duuna al khaliqata Axmadaa
11. Aqilnii cathaarii yaa Ilaahii fa inna lii
Caduwwan laciinan jaara fii al qasdi wa ictadaa
12. Fa taaba calayhi Rabbuhu wa xamaahu min
janaayata maa akhdhaahu laa mutacammidaa.

Gabaygaas macnihiisu waxaa weeye:

1. Bilowga amarkiisa, marka jirkiisa ruuxa la geliyay, iyo intaan arligaan loo soo dejin ka hor, Aadan wuxuu ahaa Jannada Firdaws agteeda,/ iyo dhar kulmiyey wehel oo idil oo duntooduna si isku dhowdhow oo adag loo tolay: waana sarbeeb uuna ka wada oo uu ku tilmaamayo siduu Aadan Ilaahay ugu dhowaa.
2. Wuxuuna Jannada Cadan (waa midda lagu waaro) dhexdeeda ku arkay nuur faafsan oo kaahaya/Kana nuur badan nuurarka la yaqaanno xagga iftiinka iyo hanuunkaba.
3. Markaasuu Aadan yiri: Ilaahayow, muxuu yahay nuurkaan aan u jeedo oo nuurarka kale ka xoog badan/Oo ay ciidanka Samadu soo aadeyso oo ay usoo, qasdeyso si ay ugu iftiinsato, ayna kusoo noqnoqonayaan inay wax ugu nuursadaan.
4. Markaasuu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuu yiri: "Waa nuurka Nabi ah kan ugu khayr badan qof arliga ku kor socday oo dul maray (oo al tharaa waxaa la yiraahdaa, ciidda qoyan)/Waana midka ugu fadli badan oo ugu deeqtoon mid dariiqa khayrka qaada, habeen iyo maalinba.
5. Waxaanna doortay intaanan adiga ku abuuray ka hor Aadanow iyo inuu noqdo Sayyid hoggaamiye ah/Waxaanna u labbisay Sayyidnimo Nabiyada hortood.
6. Waxaanna u diyaariyay maalinta qiyaarne inuu shafeeco qaado/ isagoo ah mid la adeeco (oo shafeecadiisa uu Ilaahay yeelo)/Isagoo ay ghayrkiis marayaan ayagoo keligood ah.
7. Markaasuu u shafeeco qaadayaa badbaadinta kulli mid muwaxxid ah oo kelinnimada Ilaahay qiray/Oo markaasuu gelinayaa, jannooyinka dhexdooda lagu waaro isagoo hadana dhexdeeda ku waaraya.
8. Isagu wuxuu leeyahay magac aan u bixiyay oo aan ugu yeeray/Laakiin waxaan magacdaas ka jeclaaday Muxammad.

9. Markaasuu Aadan wuxuu yiri: Ilaahayow, igu manneyso tawbad aqbal/Oo noqota, mid dhaqidda dambigaan galay ka qayb qaadata oo saacidda.
10. Sidaas iiga yeel xurmada magacaan iyo deeqda iyo siduu kuugu dhowyahay/Oo aad isaga ku gooni yeeshay khalqiga sokadiisa Axmad.
11. Ilaahayow, iga rid dambiyadeyda maxaa yeelay waxaan leeyahay/Cadaw laciin ah oo naxariista Ilaahay laga fogeeyey (waana Ibliis) ujeedadiisu ay dulmi tahay oo ay xuntahay, colaadna geystey.
12. Markaasuu Rabbigiisu tawbadiisa aqbalay, kana ilaaliyay oo ka reebay/Dambiga uu gaf ahaan u galay uusanna ula kac u gelin.

Ka cunidda geedku ma dambi wayn baa mase mid yar?

Marka hadduu qof yiraahdo: "Ka cunidda iyo soo dejinta ma dambi wayn baa ama mid yar? Ficilkaas Aadan Jannada looga soo dejiyay ma kabiirah baa oo waa dambi wayn, mase maya?" Hadday kabiirah tahay, dambiyada waaweyn Anbiyada kama dhacaan, intaan Nabi laga dhigin ka hor iyo kaddibba, oo way ka ilaalsan yihiin oo waa "macsuumiin". Hadday ficlad yar ahaydna, waxaa la yiri inay Anbiyada ka dhacaan, waana la dhaafaa dambiyada ka dhasha, waxaana looga dhaafaa ka fogaanshaha kuwa waaweyn laga fogaado, siduu Ilaahay, Cazza wa Jalla, ku yiri Aayadda kow iyo soddonaad ee Suuratu Al Nisaa': **"In tajtanibuu kabaa'ira maa tunhawna canhu nukaffir cankum sayyi'aatikum wa nudkhilkum mudkhalan kariiman**(31)**",** oo macneheedu yahay: "Haddaad ka fogaataan dambiyada waaweyn ee waxa la idinka reebayo, waxaan ka asturi (dhaafi) xaggiinna dambiyadiinna (yaryar), waxaanna idin gelineynnaa meel la galo oo sharaf leh (Jannada)(31)". Marka haddii muslimiintii caadiga ahaa sidaas dambiyada yaryar looga dhaafayo, maxaad marka mooddaa Nabi Aadan oo Anbiyadoo idil dhalay? Marka, hadduu qofkaasu yiraahdo: "Hadaba maxaa yeelay ee ficilkaas daraadiis Aadan iyo Xaawo labbiskay xirnaayeen looga siibay, siday Aayadda toddoba iyo labaatanaad ee Suuratu Al Acraafi noo sheegtay, oo tiri: **"Yaa banii Aadama laa yaftinannakumu al sh-shaydhaanu kamaa akhraja abawaykum mina al jannati yanzicu canhumaa libaasahumaa li yuriyahumaa saw'aatihimaa**(27)**"**, oo macneheedu yahay: "Dhasha Aadanow, yuusan idin fitnayn shaydaan, siduu uga soo bixiyay oo kale labadii idin dhashay jannada, isagoo ka siibay dharkoodii, si uu u tuso cawradooda(27)". Dharkana waxaa looga siibay doonidda uu doonay inuu xabbad geedkaas, mirihiisa ka mid ah uu cuno, oo uu afka gashaday, uusanse wali leqin, oo ay markaas ka duuleen taajka madaxa u saarnaa, dharkuu xirnaa iyo intaas ghayrkoodba, sida canaanta la canaantay oo kale, sida markuu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda labo iyo labaatanaad ee Suuratu Al Acraafi ku yiri oo kale: **"Wa naadaahumaa Rabbuhumaa alam anhakumaa can tilkumaa al shajarati**(22)**",** oo macneheedu yahay: "Markaasuu Ilaahay u yeeray oo uu ku yiri: "Miyaanan idinka reebin geedkaan?(22)". Su'aashaas waxaa ka jawaabay Abuu Al

Qaasim Muxammad Al Zamakhsharii, al callaamah, jaaru Allaahi, al muctazilii, inuu muctazilii yahayna sheegi jiray, siday u wariyeen ibnu Kullikaan iyo ghayrkiisba: hadduu albaab garaaco uuna ithan qaadanayo inuu gurigaas galo wuxuu oran jiray: "waxaa albaabka taagan oo ithan qaadanaya inuu soo galo Abuu Al Qaasim Al Muctazilii". Waxa ugu horreyey oo uu sannifayna waa kitaabkiisa tafsiirka Quraanka ah ee la yiraahdo Al Kash-shaaf. Al Zamakhsharii wuxuu dhintay habeenka Carafo ee sanadka shan boqol iyo saddex iyo soddon Hijriga. Al Zamakhsharii wuxuu yiri: "Ma ayan ahayn waxaan "saghiirah' ahayn oo ah mid yar, waa dambi yaree, oo ku duugan kuna dhex qarsoon acmaasha qalbigiisa ee khaaliska Ilaahay u ahaa iyo athkaar saalix ah oo wanwanaagsan, kuwaasoo ah u hoggaansanaanta Ilaahay iyo adeeciddiisa kuwa ugu waaweyn iyo acmaasha ugu waaweyn -dambiyada yaryarna hadday ka bataan dhaacaadku oo ay daacaadku bataan, la isuma qabto oo waa la dhaafaa. Waxaana dambigaas yar uu ugu socday waxa ku socday waynayn dambigaas la wayneynayo iyo muujin foolxumadiisa la muujinayo oo lasoo bandhigayo, iyo cabsiin lagu cabsiinayo midka dambigaas galay, si ay taasi u turid iyo naxariis ugu noqoto isaga Aadan ah iyo dhashiisaba, si ay dambi falidda uga fogaadaan oo ay iska ilaaliyaan. Waxayna taasi sabab u noqotay inuu Aadan adduunkaan ku helay kaamilnimo u faaiideysey kana dhalatay badnida ajarka uu ku muteystay iyo waynaanta makaankiisa aakhiro. Jamhuurka culummada, oo ah intooda badan, ee raacsan Imaam Maalik iyo Imaam Abuu Xaniifah iyo Imaam Al Shaaficii waxay qabaan inay Anbiyadu macsuumiin ka yihiin xattaa dambiyada yaryar dhammaantood, oo uu Ilaahay, Cazza wa Jalla, ka ilaaliyay. Cusmadaasu waxay ahaaneysaa intaan falidda dambiyadaas yaryar dhicin horteed, oo ay ka hortegeysaa inayba ahaadaan, hadduusan amar iyo sharci Ilaahay kusoo degin iyo wax la mid ah, oo sidaas ayay mid sidaas u yari Aadan uga dhacday, taas dhiciddeedoo ay ka ratibmeen oo ay uga dhasheen manaafic iyo wax waxtar u leh Aadan iyo ubadkiisaba. Haddayan sidaas oo kale ahaynna, Anbiyada sina dambiyo yarna kama dhacaan si ula kac ah iyo si sahwi iyo halmaamid ahba."

Xikamada iyo naxariista kasoo dejinta Aadan ee jannada

Marka, bal arag naxariista iyo xikmada faraha badan ee ku sugan in Aadan jannada laga soo dejiyay oo arligaan loo so dejiyay, ahna faaiidooyinka soo dejintiisa ka dhashay, oo hadduusan arligaan usoo degi lahayn lama arkeen jihaadka kuwa mujtahidiinta ah oo cilmiga baara oo barta oo bara, iyo jihaadka caabidiinta Ilaahay si dhab ah u caabuda, ayadoo ay xikmadu ahayd hubinta iyo helidda cilmiga, kaddibna camalka lagu dabbaqo, oo uu sidaas ku noqdo camal sugan oo sidii ay ahayd inuu ahaado ah. Hadduusan Adan soo degi lahay, Samada kor uma tafeen codadka iyo neefdhawga kuwa tawbad keenaya, hoosna uma ayan qubteen dhibcaha ilmada kuwa dambiyada galay. Imaam Al Qurdhubii wuxuu tafsiirkiisa ku yiri: ""Kasoo saaridda Ilaahay ee uu Aadan jannada kasoo saaray, ma ayan ahayn ciqaab isaga lagu ciqaabayo, maxaa yeelay waxaaba jannada laga soo saaray oo

dhulka loo soo dejiyay kaddib markuu isaguna ka tawbad keenay wuxuu sameeyey, Ilaahayna uu tawbaddiisa aqbalay. Waxaase loo soo dejiyay edbin la edbinayo iyo adkayn la adkaynayo mixnada iyo dhibaatada ku habsatay. Runtuna waxay tahay inay soo dejintiisa arliga loo soo dejiyay ay ka mid tahay xikmada Ilaahay oo azaliga ah oo waligeed jirtay ee arrinkaas ku saabsan, ahna inuu ubadkiisa arliga ku faafiyo, uuna takliif iyo waajibaad korka ka saaro, kuna imtixaano oo ay halkaas ka rattibmaan abaalmarin iyo ajar siin ama ciqaab markay aakhiro tagaan, ayagoo ayan jannada iyo naartu ahayn laba daarood oo uu takliif jiro. Marka, cunidda xabbaddaas miraha geedka laga reebay uu ka cunay waxay sabab u noqotay in arliga loo soo dejiyo. Ilaahayna waa Midka wuxuu doono fala, wuxuuna hore uba yiri: **"Innii jaacilun fii al ardi khaliifatan**(30)**",** oo ah Aayadda soddonaad ee Suuratu Al Baqarah, macneheeduna yahay: "Anigu waxaa arliga dhexdiisa yeeli mid sharcigeyga ku oofiya oo ay facba fac isaga dambeeyaan(30)". Culummada tafsiirka Quraanka iyo macnihiisa ku xeel dheerna waxay ka yiraahdeen hadalka Ilaahay ee ku xusan Aayadda shan iyo soddonaad ee Suuratu Al Baqarah iyo Aayadda sagaal iyo tobnaad ee Suuratu Al Acraafi ee ah: **"Wa laa taqrabaa haathi-hi al shajarata**(35)**"** oo macneheedu yahay: "Hana u dhowaanina geedkaan(35)": "Waxaaba ku sugan dareen in dambigaas lagu dhici doono, jannadana looga soo saari doono, oo degidda uu Aadan jannadaas degay uusan ku waareyn, maxaa yeelay qofka jannada ku waaraya wax dhexdeeda ku jira lagama reebo, waxna lama amro inuu la yimaado, waxna lagama. reebo inuu ka haro, waxaana u daliil ah **"Innii jaacilun fii al ardi khaliifatan**(30)**",** oo ah Aayadda soddonaad ee Suuratu Al Baqarah, macneheeduna yahay: "Anigu waxaa arliga dhexdiisa yeeli mid sharcigeyga ku oofiya oo ay facba fac isaga dambeeyaan(30)". Intaasuu ku egyahay hadalka Imaam Al Qurdhubii. Al Axwathii wuxuu yiri: "Inuu Aadan kasoo baxay jannada waxay sabab u noqotay jiritaanka ubadkiisa iyo dhashaas badan, iyo jiritaanka Anbiyada iyo Rususha iyo saalixiinta, kamana uusan soo bixin jannada isagoo laga soo eryay, bal wuxuu usoo baxay inuu arligaan joogo inta loo xukumay inuu joogo kaddibna uu ku noqdo. "

Ilaahay oo Aadan qalbiga u qaboojiyay

Ilaahay, Tabaaraka wa Tacaalaa, markuu towbadda Aadan aqbalay, wuxuu u waxyooday oo uu u caddeeyey, kuna ilhaamiyay, wax ay naftiisu ku xasishay, cabsidii haysay iyo kurbadana ka qaaday, sida Isagoo Ilaahay ku yiri oo kale: **"Yaa Aadamu in kunta ahbadhta min daari al qurbi, fa Innii qariibun, mujiibun, ujiibu dacwata al ddaacii. In kaana xasala laka mina al ikhraaji kasrun, fa Anaa cinda al munkasirati quluubihim min Ajlii. Wa in kaana faataka fii Al Ssamaa'i zajalu al musabbixiina, fa qad tacawwadtu fii al ardi aniina al muthnibiina, fa aniinu al muthnibiina axabbu Ilaynaa min tasbiixihim: rubbamaa yashuubuhu al iftikhaaru, wa aniinu al muthnibiina yuzayyinuhu al inkisaaru.** " Hadalkaas oo aan Xadiith ahayn, macnihiisu waxaa weeye:

"Aadanow, haddaad kasoo degatay daarta dhowaanshaha -oo Ilaahay u dhow, waana jannadee-ha tiiraanyoon, maxaa yeelay Anigu waan dhowahay, waxa la iga baryana qofka iga barya waan siiyaa, oo sidaas dhowaanshaha aan jannada kuugu dhowaa wuxuu la mid yahay dhowaanshahayga aan arliga kuugu dhowahay. Waana maqlaa oon siiyaa kuwa i barya waxay iga baryaan. Hadday bixidda jannada lagaa bixiyay uu qalbigaagu ku jabay -sida dhacdayba- Anigu waxaan ahaan agta iyo Midka u dhow oo aan kabaa kuwa ay quluubtoodu Aniga daraadey u jabeen." Oo waxaa qalbiga laga dhigay sida quraarad khafiif ah oo taag daran oo hadday jabto kala daadaneysa, oo sidaas oo kale ayuu qalbigu u taag daranyahay. Xadiithka uu Imaam Al Ghazaalii ku wariyay kitaabkiisa Al Bidaayah wuxuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyay inuu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa leeyahay: " **Anaa cinda al munkasirati quluubuhum min ajlii",** oo macnihiisu yahay: "Anigu waxaan ahay agta -oo aan kabaa- kuwa quluubtoodu u jaban tahay Aniga daraadey". Haddaan hadalkii Ilaahay inuu Aadan ku yiri loo nisbeeyey tarjumiddiisa dib ugu laabanno wuxuu yiri: "Hadduu Samada kugu seegay -marka arliga laguu soo dejiyay- codadka kuwa tasbiixsanaya, oo Subxaana Allaahi oranaya, waxaan cawil celin ahaan kuu siiyay arliga dhexdiisa iniinka -oo ah boohintaan lala qaylin oo uu ku taaho qofka xanuun hayaa ay iniinaan markay xanuunsadaan oo ay Ilaahay u booyaan inuu dambigooda dhaafo oo uu xanuunkaas ka qaado- kuwa dambaaba. Iniinka kuwa dambaaba ayaanna ka jeclahay tasbiixda kuwa tasbiixsada. Hadday sidaas tahayna, oo aan iniinka dambiilayaasha ka jecelnahay codadka kuwa tasbiixsanaya, markaas adiguna waxaad jeceshahay waxaan jecelnahay. Codka kuwa arliga dhexdiisa ku tasbiixsanaya, ayagoo aan ahayn kuwa Samada ku tasbiixsanaya oo kale, waxaaba dhici karta inuu dhex galo faan oo uu markaas fasaadiyo. Iniinka kuwa dambiga galayse waxaa qurxiya qalbi jabka, oo sidaasuu inta kale oo cod ahba uga sarreeyaa. Waaba ayada uu Muslim Abuu Hurayrah, Allaha raalli ka noqdee, uga wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Wa Allathii nafsii bi yadihi law lam tathnibuu la thahaba Allaahu bikum wa la jaa'a bi qawmin yathnibuuna, thumma yastaghfiruuna",** oo macnihiisu yahay: "Waxaan ku dhaartay Midka ay nafteydu Gacantiisa ku jirto, haddaydnaan dambaabi lahayn, Ilaahay waa idin qaadi lahaa, markay ajashiinnu soo gasho, wuxuuna keeni lahaa qawm dambaaba kaddibna dambi dhaafid weydiista, oo uu markaas Ilaahay u dambi dhaafo, si ay u muujiyaan oo looga arko dambi dhaafidda, Isagoo Ilaahay Ghaffaar dhambi Dhaafe isku tilmaamay", siduu noogu sheegay Aayadda kow iyo tobnaad ee Suuratu Al Namli oo kale: **"Fa Innii Ghafuurun Raxiimun**(11)**"** oo macneheedu yahay: "Oo Anigu waxaan ahay dambi Dhaafe Raxmad miiran ah(11)". Marka si loo helo Al Ghaffaaru waa in la helaa mid loo dambi dhaafo, si loo arko Al Raxiimuna oo ah Midka ugu naxariis badan waa in la arkaa kuwuu u naxariistay. Marka, yeeyan dambiyadiinnu idinka hor istaagin inaad tawbad keentaan,

oo aad Ilaahay u noqotaan, quusasho aad naxariista Ilaahay ka quusateen. Marka, hadalka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ma aha ruqso in la dambaabo la isu ruqseynayo, ama la iskuba boorrinayo, balse ujeedadu waa baraarujin la isku baraarujinayo weynaanta deeqda Ilaahay iyo waasicnimada dambi dhaafkiisa, iyo boorrin la isku boorrinayo in dambiyada laga tawbad keeno. Subxaana, oo waxaa ceeb iyo baahi iyo naaqusnimo oo idil ka fiyow oo ka fog oo ka hufan Midka markuu addoonkiisa uu balaayooyinka uu ku jiro uga naxariisto, balaayooyinkaas laftooda uga dhiga oo ugu beddela siin oo wax fiican siiya, ama beddelka balaayada wax fiican siiya, Ilaahay hadduu addoon dulleeyana ayan kaas dadaal badan oo uu la yimaado iyo ijtihaad badani ayan wax tarin, ijtihaadkaasna uuba ku noqdo korkiisa cirib xumo. Ilaahay wuu talqiiniyay oo uu baray Aadan wax xujjo u noqday, oo waaba isaga. yiri: "Uma aanan malayneyn inuu axadna been ku dhaaran karo". Ragna waxayba yiraahdeen: Aadan iyo Xaawo kamaba ayan cunin geedka laga reebay, waxayse ka cuneen geed kale oo ay isku jinsi yihiin oo la mid ah, ayagoo amarka u fasirtay oo u gartay waxa laga reebay uu geedkaas farta loogu fiiqay oo loo tilmaamay yahay, loolana jeedo, aanse loola jeedin jinsiga geedkaas oo idil, sida ayadoo la yiraahdo geedkaas bardaha ah ha ka cunin, oo kii farata loogu fiiqay inta ka fogaaday geed kale oo, isaguna barde ah ka cunay. Waxaana warkaan sheegay Al Qurdhubii. Ilaahayna wuxuu Aadan baray oo uu ku riday wax hadduu yiraahdo tawbaddiisa laga aqbalayo, ahna, siday u yiraahdeen Ibnu Cabbaas iyo Al Xasan iyo Ibnu Jubayr iyo al Daxxaak iyo Mujaahid: **"Rabbanaa thalamnaa anfusanaa wa in lam taghfir lanaa wa tarxamnaa la nakuunanna mina al khaasiriina"**, oo macneheedu yahay: "Rabbigeenow, waxaan gardarreysannay nafafkeenna, haddaadanna dambigeenna dhaafin, aadanna noo naxariisan, waxaan ka mid noqoneynnaa kuwa khasaaray." Waxaa kaloo mujaahid laga wariyay inay Aadan iyo Xaawo yiraahdeen: **"Allaahumma laa ilaaha illaa Anta, thalamtu nafsii, fa ighfir lii Innaka Anta Al Ghafuuru Al Rraxiimu"**, oo macneheedu yahay: "llaahayow, ilaahaan Adiga ahayni ma jiro. Nafteyda ayaan dulmiyay ee marka ii dambi dhaaf, Adigoo ah Midka dambi Dhaafka badan oo naxariistah." Waxaa kaloo, la yiri: Aadan wuxuu arkay inay ku dhigan tahay lugaha Carshiga **"Muxammadun Rasuulu Allaahi",** markaasuu ku shafeeco weydiistay. Al Qurdhubii wuxuu kaloo yiri: "muraadku waa boohinta iyo xishoodka iyo ducada iyo shalleytida iyo dambi dhaaf weydiisashada."

Eryidda Ibliis

Markaasaa Ibliisna Samada laga soo eryay, kaddib markuu muddo dheer adeegayey, oo siduu Al Qurdhubii yiri wuxuu Ilaahay caabudayey sideetan kun oo sano. Kitaabka Muntahaa Al Nuquuli-na wuxuu sheegay inuu Ibliis Ilaahay sagaal kun oo sano caabudayey. Kitaabka Taariikhu Al Khamiisina wuxuu wariyay laba boqol iyo afartan kun oo sano ayadoo ayan ku harin Samaawaadka iyo toddobada arliba in taako ah oo uusan ku sujuudin,

wuxuuna, waana Ibliis, yiri "llaahayo, miyay hartay bar aanan ku sujuudin?" Markaasuu Cazza wa Jalla ku yiri: " **Usjud li Aadama** " oo ah "U sujuud Aadan". Markaasuu Ibliis wuxuu yiri: "Ma anigaad iga fadli yeeleysaa -iga kor marineysaa-?" Ilaahay wuxuu yiri: **"Afcalu maa ashaa'u wa laa us'alo cammaa Afcalu"** oo macneheedu yahay: "waxaan doono ayaan falaa, la igamana waydiiyo waxaan falo, oo maxaad u fashay la ima yiraahdo". Markaasuu Ibliis diiday inuu sujuudo. Markaasaa la eryay oo la lacnaday. Kitaabka Al Mishkaatu wuxuu sheegay oo yiri "Al Xasan wuxuu yiri: "Ibliis wuxuu Ilaahay Samada ku caabudayey toddoba boqol iyo shan iyo toddobaatan kun oo sano, wuxuu arligana Ilaahay ku cabuday isagoo aan ka tegin in le'eg inta cag la dhigo ee waa illaa kan ku sujuuday." Marka la eryay ayuu camalkiisii oo idil wuxuu noqday sida Habaa'an Manthuuran, oo ah waxa habaaska la firdhiyey oo kale ah oo qolka dhexdiisa lagu arko markuu shabaakada qorraxda iftiinkeedu kasoo galo oo duulduula, waxaasoo aan waxba tarin. Sidaas oo kale ayuu camalkiisii noqday, oo wax waxtar ah u yeelan mayo, sababtuna ay tahay inuusan la imaan shardigii loo baahnaa oo ah inuu Ilaahay waxtar uga dhigo. Markaasuu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuu Ibliis ku yiri, waana Aayadaha afar iyo shan iyo soddon ee Suuratu Al Xijri: **"Qaala fa akhruj minhaa fa innaka rajiimun**(34)**Wa inna calayka al llacnata ilaa yawmi al Ddiini**(35)**",** oo macnohoodu yahay: "wuxuuna yiri: "ka bax xaggeeda adigu waxaad tahay mid la fogeeyeye(34)Korkaagana waxaa ah lacnad tan iyo maalinta xisaabtankee" (Qiyaame)(35)". Taas waxaa weeye: "jaanada ka bax -oo Samada lagama soo saarin oo waxaa laga reebay Bicthada oo ah marka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lasoo diray dabadeed-, adigoo lagaa fogeeyey oo lagaa eryay khayr iyo karaamoo idil, adigoo lagula dhacayo oo lagugu rajmayo shihaab, oo ah dab ololoya, waxaana korkaaga ah lacnad -oo ah eryid iyo fogayn naxariista Ilaahay laga fogeeyey- ilaa maalinta xisaabtanka, oo ah maalinta qiyaame." Ilaahay, hadduu addoonkiisa cadaaladdiisa dul dhigo oo uu ku xisaabiyo xasanadna u reebi mayo oo uma ay harayso, maxaa yeelay marna kama uusan marna afcaal keeneysa in lagu qabto oo dambi ah. Waaba tuu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda shan iyo afartanaad ee Suuratu Faadhir ku yiri: **"Wa law yu'aakhithu Allaahu al nnaasa bimaa kasabuu maa taraka calaa thahrihaa min daabatin(**45)**",** oo macneheedu yahay: "Hadduu Ilaahay u qaban lahaa dadka waxay kasbadeen oo xumaan ah, kagama tageen dhulka korkiisa wax socda(45)".

Taas waxaa weeye: "ugama tageen arliga korkiisa mid korkeeda xumaanta macaasida kula socda (daabad). Waxaa kaloo la yiri: daabadda waxaa laga wadaa dadka." Hadduuse Ilaahay deeqdiisa u fidiyo addoonkiisa oo uu si naxariis leh iyo dambi dhaafid kula dhaqmo, addoonkaas sayyi'aadna oo ah dambi uma haro, oo laguma qabto. Muraadka labadaas qodobna waa sidatan: xasanaadkiisii iyo sayyi'aadkiisii oo idil ayaa laga tirtirayaa xaashiyaha malaa'igta, markaasey kii xasanaadkiisa la wada tirtiray waxaa

qalbigiisa gelaya caloolxumo iyo tiiraanyo xoog leh, inuu xad gudbay ilaa heer ay xasanaadkiisii oo idil tageen. Kii sayyi'aadkiisa la tirtirayna waxaa aad loogu fogaaday daboolidda xumaantiisa iyo dambiyadiisii uu galay, siduuba Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yiri: **"Ithaa taaba al cabdu ansaa Allaahu Al Xafathata thunuubahu, wa ansaa thaalika jawaarixahu wa macaalimahu mina al ardi, xattaa yalqaa Allaaha wa laysa calayhi shaahidun min Allaahi bi thanbin",** oo macnihiisu yahay: "Hadduu ama markuu addoonku tawbad keeno, Ilaahay wuxuu malaa'igta afcaashiisa dhigta oo ilaalisa halmaansiiyaa dambiyadiisa. Wuxuu kaloo dambiyadiisa halmaansiiyaa xubnaha jirkiisa iyo baraha arliga ka midka ah oo uu dambiyadaas korkooda ku galay. Markaasuu addoonkaasu wuxuu Ilaahay la kulmaa isagoo uusan jirin cid Ilaahay hortiisa dambiyaduu galay ugu markhaati kacda". Waxaa Xadiithkaan wariyay Al Asbahaanii, kuna wariyay kitaabkiisa Al Targhiibu, iyo Al Xakiim iyo Al Tarmathii oo ku wariyay Al Nawaadir, iyo Ibnu Casaakir. Labadaas addoon kooda horena waa la xisaabiyay -llaahow ha na xisaabin- oo acmaashiisana la miizaamay, kan labaadna waa la cafiyay, lana asturay: Ilaahayow na cafi, nana astur.

Deeqaha Aadan la siiyay

Bal u fiirso, oo isha qalbigaaga ku arag oo ku fakar arrinkaan: markay deeqda uu Aadan, Calayssalaamu, uu khalqiga intiisa kale, sida malaa'igta iyo ghayrkoodba dheer yahay, ahna aqoonta iyo cilmiga, kuna tilmaaman Aayadda kow iyo soddonaad ee Suuratu Al Baqarah: **"Wa callama Aadama al asmaa'a kullahaa**(31)**"** oo macneheedu yahay: "wuxuuna baray Aadan magacda kulligood(31)", iyo ballaarnaanta. caqliga uu Ilaahay siiyay, uuna Abuu Umaamah ka yiri: "haddii turidda iyo dulqaadka Banii Aadanka oo idil tan iyo markuu Ilaahay khalqiga abuuray ilaa maalinta yawmul qiyaamaha inta la isku daro gacan miisaanka la saaro, dulqaadka iyo turidda Aadanna gacanka kale la saaro, tan Aadan ayaa culusaan lahayd," Al Qurdhubii wuxuu yiri: "taasi waxay ixtimaaleysaa in tiradaas guud laga saaro oo uusan ka mid ahayn Al Musdhafaa, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maxaa yeelay isagaa dadkoo idil ugu dul qaad badnaa iyo turidba. Waxaa kaloo uu warkaasi ixtimaalayaa in loola jeedo intaan Anbiyada ahayn." Intaasi waa warkii Al Qurdhubii. Cilmiguna kaamil ma noqdo jeer lagu dhaqrno, oo lagu camal falo waxa uu xambaarsan yahay. Jannaduna ma aha daar dhexdeeda lagu shaqeeyo oo lagu dadaalo, balse waa daar lagu nicmeysto, oo lagu raaxeysto iyo mushaahadah oo ah wax fiirsasho iyo arag. Sidaas daraadeed ayaa waxaa lagu yiri: "Aadanow, u dego arliga jihaadka oo ah jihaadka nafta, iyo shahawaatka nafta. Naftu waxay dooneysana waxaad uga adkaataa shaqo badan oo adag oo dhib ah oo aad kula jihaadid. Waana ku kanoo noloshaadii nicmada badnayd ee aad ku haysatay jannada aad kasoo baxday, ay kuu soo noqotay ayadoo ka kaamilsan siday hore u ahayd, oo aad jannada uga caado yeelatay, taasoo ku ahaatay kaddib markaad intaad adduunkaan ku noolaatay aad hadana jannada dib ugu noqotay". Waxaa

hadalkaas ka cad inayan adduunyadaani, intay doontaba ha dheeraatee, ayan waxba ka ahayn marka loo fiiriyo nicmooyinka aakhiro, tanoo waareysa, ayadoo uu adduunku dhammaanayo. Wax dhammaanayana waxba ma aha marka loo fiiriyo waxa waaraya.

Sawirnimada Ibliis

Markuu Ibliis, korkiisa lacnad ha ahaatee, xaasidnimada uu Aadan u qabo muujiyay, wuxuu ku dadaalay inuu dhibaateeyo, ilaa uu sabab uga noqday kasoo saaridda jannada ee Sayyidka Aadan. Caalinka magaciisu yahay Al Yaaficii wuxuu kitaabkiisa Nafaxaatu Al Azhaari uga wariyay Calii bin Abii Dhaalib, Calayhissalaatu Wassalaamu, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: " **Habadha calayya Jibriilu, fa qaala:** " **inna li kulli shay'in sayyidan, fa sayyidu al bashari Aadamu, wa sayyidu waladi Aadama anta",** oo macnihiisu yahay: "waxaa igu soo degay Jibriil wuxuuna yiri: "shay walba wuxuu leeyahay sayyid, oo ah hoggaarniye ama madax, basharkana, waa dadkee, sayyidkoodu waa Aadan, dhasha Aadan, oo ah bani Aadanka oo idil, sayyidkoodu waa adiga." Marka, hadduu sax yahay, waxaanna taageeraya Xadiithka Fatxu Al Baari bi Sharxi Saxiixi Al Bukhaarii, oo wariyay inayan sayyidnimadu isla markaas keeneyn afdaliyo ama ka sarreyn wax la dheer yahay kuwa sayyidka loo yahay, ayadoo uu Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee, yiri: "Abuu Bakar waa sayyidkeenna, wuxuuna xoreeyey sayyidkeenna (oo ahaa Bilaal oo intuu isagoo addoon ah gatay isagoo rabidda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo doonayey in inta la gato la xoreeyo meel marinaya, hadana xoreeyey)". Cumar wiilkiisa Cabdu Allaahi ibnu Curnar, Allaha raalli ka noqdee, caalinka iyo caabidka ummaddaan, wuxuu isaguna, isagoo ka faallonaya Mucaawiyah ibnu Abii Sufyaan, Allaha raalli ka wada noqdee, oo markaas boqorka Dawladda Islaamka noqday kaddib afarta Khulafaa'u al Raashidiina oo ah Abuu Bakar iyo Cumar iyo Cuthmaan iyo Cali iyo Al Xasan bin Faadhimah bintu Rasuuli Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "Ma aanan arag mid ka sayyidsan Mucaawiyah", in kastoo uu arkay sayyidnimada Al Cumarayni Abuu Bakar iyo Cumar, Allaha raalli ka wada noqdee. Sawirka Ibliis ahna ma uusan garan in Aadan haddii jannada laga soo saaro ay deeqihiisu kaamil noqonayaan, kaddibna uu Jannada ku noqonayo isagoo siduu hore u ahaa ka kaamilsan. Imaamku wuxuu Ibliis ku magacaabay al ablahu**,** ablahna waxaa la yiraahdaa midka doqonka ah oo aan wax aqoon ah lahayn oo waxa xun iyo waxa fiican aan kala garanayn oo aan kala soocayn. Wuxuuna ablah ku noqday ayadoo cilmiguu hore u lahaa laga siibay markuu gaaloobay. Al Qurdhubii wuxuu yiri: "La iskuma khilaafsana inuu Ibliis caalin ahaa, oo uu yiqiinnay Ilaahay, intuusan gaaloobin ka hor. Midka yiri: jaahilnimuu la gaaloobay, wuxuu ka yiri: cilmiga ayaa laga siibay markuu gaaloobay. Midka yirina cinaad iyo madax adayg ayuu la gaaloobayna wuxuu ka yiri: wuxuu gaaloobay isagoo cilmigiisii leh oo wata oo lagama siibin". Ibnu Cadhiyyah wuxuu yiri: "Gaalnimo uu cilmigiina u haro waa wax la fogeysto agteyda, taasi waa

suurtowdaa oo wax aan suurtoobin ma aha, ayadoo isla markaasna qofkuu doono Ilaahay dulleynayo." Al Qurdhubii wuxuu yiri: "Waxaa la isku khilaafay waa markaas ka hor Ibliis gaal miyuu ahaa? Waxaana la yiri maya, isagaana ahaa axadka ugu horreeya oo gaal noqda." Waxaa kaloo la yiri: bal hortiis waxaa jiray qawm gaalo ah, ahna jinnigii arliga degganaa. Ibliis ma jaahilnimo ayuu la gaaloobay ama cinaadnimo? Ehelu Sunnadu laba aragti ayay ka leeyihiin. Ibliis hadduu ogaan lahaa inuu Aadan jannada kusoo noqonayo isagoo ka fadli badan xaaladdiisii markii hore oo uu ku jiray intaan laga soo saarin, kuma uusan dadaaleen inuu kasoo saaro. Al Qurdhubii wuxuu yiri: "ujeedada Ibliis ma ayan ahayn inuu Aadan jannada kasoo saaro, wuxuuse doonayey inuu hoos uga soo rido martabada iyo darajada uu ku sugnaa, uuna u fogeeyo sida isaga loo fogeeyey oo kale, oo naxariista Ilaahay looga fogeeyey. Mase uusan gaarin muraadkiisii, oo ma uusan hanan, wuxuuse kororsaday naaqusnimo iyo caro uu naftiisa u caroodo iyo hungo, uu maladiisii uu u kacay ku hungoobo. Waaba ayada uu Ilaahay Tacaalaa Aayadda boqol iyo labo iyo labaatanaad ee Suuratu Dhaahaa ku yiri: **" Thumma ijtabaahu Rabbuhu**(122) **"** oo macneheedu yahay: "Kaddibna waxaa doortay Rabbigiis(122)". Kaddibna Ilaahay Aadan tawbadiisa ayuu aqbalay, wuuna hanuuniyay, wuxuuna noqday Khaliifka Ilaahay ee arligiisa kaddib markuu dariskiisa ku ahaa daartiisa." Intaas weeye hadalka Al Qurdhubii.

Ilmaha Aadan iyo Xaawo

Markuu Ilaahay Tacaalaa Xaawo abuuray inay Aadan ku degto, Aadanna uu ayada ku xasilo, boqol sano ama boqol iyo labaatan sano, siduu labadaas taariikhoodba uu u wariyay Taariikhu Al Khamiisi, kaddib markii arligaan loo soo dejiyay, barakooyinkii Aadan ayaa ku hooray Xaawo, waxayna, sanooyinkaas fiican -oo isagu wuxuu noolaa kun sano: marka ka goo intuu jannada dhexdeeda ku jiray iyo boqolkaan ama boqol iyo labaatankaan sano oo soo degiddisa ka dambeysey, markaasaa waxaa kuu soo baxaya sanooyinkaan fiican oo uu adduunkaan ku sugnaa-, waxayna u dhashay afartan cunug oo ay labaatan caloolood ku qaaday, ayagoo mataano ahaa. Al Bayhaqii wuxuu yiri: "Waxaa ugu horreeyey caruurtiisa Qaabiil iyo mataantiisa oo magaceedu ahaa Iqliimiyyaa. Ibnu lsxaaqna wuxuu ehelu kitaabka kasoo guuriyay inay Qaabiil iyo Iqliimiyyaa ay jannada dhexdeeda ku dhasheen iyo inay dhashooda ugu dambeeyeen Cabdu Al Mughiithu iyo mataantiisa Aamatu Al Ghaythu." Intaas waxaa ku eg warka Al Bayhaqii. Kitaabka Al Nafsii wuxuu yiri: "Waxaa ugu horreeyey dhashooda Al Xaarithu, wiilkooda Shayth-na wuxuu dhashay keligiis mataan la'aan", oo uu Al Mughlaadhay yiri waa Shaath oo macneheedu yabay Hibada ama Siinta Ilaahay. Al Suhaylii-na wuxuu yiri: "afka saryaaniga waa Shaath, afka cibrigana Shayth." Ibnu Kathiir iyo ghayrkiisba waxay yiraahdeen waa Hibbatu Allaahi, oo ah Hibada Ilaahay, ayagoo Aadan iyo Xaawo wiilkaas lagu rizqiyay oo la siiyay shan sano kaddib Haabiil, waxayna dhashay isagoo u eg oo leh ekaanshaha Haabiil oo uusan meelna uga duwaneyn. Waxaa kaloo la yiri: wuxuu dhashay

afartan sano Haabiil dhimashadiisa kaddib. Intaasoo idil wax ka duwanna waa la sheegay. Waxaa kaloo la yiri: keligiis ma dhalane balse wuxuu lahaa gabar mataantiisa ah, siduu Al Khamiisu u wariyay. Kitaabka Al Baxru Al Nasfii wuxuu dhigay inuu caruurtooda ugu horreeyey Al Xaarithu oo aan gabar mataan ah lahayn, waxaana ku xigay Qaabiil iyo mataantiisa, kaddibna Haabiil iyo mataantiisa, kaddibna Asawwatu iyo walaashiis, kaddibna Shiith keligiis, dabadiisna gabar keligeed calool ka dhalatay oo aan wiil mataan ah lahayn, taasoo uu Aadan Shiith u guuriyay. Sidaas ayayna u dhalanayeen ilaa ay labaatan uur afartan cunug ku dhashay, siduu Ibnu Isxaaq u wariyay. Wahab bin Munabbih wuxuu yiri: "waxay ahaayeen boqol iyo labaatan caloolood." Waxaa kaloo la yiri shan boqol oo caloolood oo ay kun cunug kaamil ku noqdeen. Intaasuu ku egyahay warka kitaabka Al Baxru al Nasfii. Shiith wuxuu keligiis u dhashay karaamayn uu Ilaahay ku karaameynayo midkuu Nabinnimada u doortay, oo ah Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo Shiith ku abtirsada. Wajiga Shiith waxaa ka iftiiimayey nuurka Nabigeenna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markaasey malaa'igtu Aadan u timid oo ay ugu bishaareysey.

Qaabiil iyo Haabiil

Imaam Al Baghawii wuxuu tafsiirkiisa ku yiri, iyo ghayrkiisba: "Labada mataano oo ugu horreeyey oo ay Aadan iyo Xaawo dhalaan waxay ahaayeen Qaabiil iyo mataantiisa Aqliimaa, waxaana ugu dambeeyey Cabdu Al Mughiith iyo mataantiisa Aamatu Al Mughiith. Ilaahay Cazza wa Jalla wuxuu u barakeeyey Aadan ilmihiisa. Cabdu Allaahi bin Cabbaas wuxuu yiri: "Aadan lama oofsan jeer ay caruurtiisa iyo caruurta caruurtiisu gaareen afartan kun oo qof." Waxaana la isku khilaafay meeshay ku dhasheen Qaabiil iyo Haabiil. Markaasay qaarkood waxay yiraahdeen: "Aadan wuxuu u tegey Xaawo boqol sano kaddib marka labadoodaba arligaan loo soo dejiyay, markaasay u dhashay Qaabiil iyo mataantiisa Aqliimaa, oo isku calool ka dhashay. Kaddibna waxay dhashay Haabiil iyo mataantiisa Labuudaa oo isku calool ahaa. Muxammad bin Isxaaq wuxuu culummo yaqaanna kitaabkii hore kasoo guuriyay inay yiraahdeen: "Aadan wuxuu jannada dhexdeeda kula gogol geli jiray Xaawo, ka hor intuusan dambiga gelin, markaasay halkaas ku qaaday uurka Qaabiil iyo mataantiisa Aqliimaa oo isku calool ah. Markaasay jannada dhexdeeda ku dhashay ayadoo aan wax dhib ah, ama jamasho ama dhiig bixid la kulmin. Markasaa marka arligaan loo soo dejiyay ayuu u tegey oo ay markaas qaaday uurka Haabiil iyo mataantiisa Labuudaa, oo ay dhib iyo jamasho iyo dhiig iyo waxa haweenta dhalaysaba isku aragtay. Aadan markay caruurtiisu qaan gaaraan wuxuu isu guurin jiray wiil iyo gabar aan isku calool ka dhalan. Wiilashiisuna waxay guursan jireen gabadhay doonaan intaan ka ahayn mataantiisa ay isku caloosha yihiin, ayadoo ayan jirin haween kaloo ay guursadaan. Markaasay markay dhasheen Qaabiil iyo mataantiisa Aqliimaa, iyo Haabiil iyo mataantiisa Labuudaa, waxaana u dhexeysay laba sano, siduu Al Kalbii u wariyay, ayna qaan gaareen, ayuu

Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aadan Calayhissalaamu amray inuu Qaabiil u guuriyo Labuudaa mataanta Haabiil, uuna Haabiil u guuriyo Aqliimaa mataanta Qaabiil. Mataanta Qaabiil ayaana ka quruxsamayd mataanta Haabiil. Markaasuu Aadan amarka Ilaahay caruurtiisa u sheegay. Markaasuu Haabiil amarkaas yeelay oo uu raalli ku noqday. Qaabiilna wuu diiday, kana carooday, wuxuuna yiri: "waa mataantayda anigaana isaga uga xaq badan. Annaguna waxaan ku dhalannay jannada, ayaguna waxay ku dhasheen arliga." Markaasuu aabihiis Aadan wuxuu ku yiri: "xalaal kuuma aha." Markaasuu diiday inuu ka yeelo, wuxuuna ku yiri inuusan Ilaahay taas amrin ee ay isaga ra'yigiisa tahay. Markaasuu Aadan Calayhissalaamu wuxuu labadooda ku yiri: "labadiinnuba qurbaan bixiya, o kiinna qurbaankiisa la aqbalo ayaa ku xaq leh oo guursanaya." Qurbaannaduna waagaas waxay ahayeen in hadduu Ilaahay aqbalo waxaa Samada kasoo degan jirtay dab cad oo loo jeedo oo qurbaankaas cuni jiray. Haddaan qurbaanka la aqbalinna dab sooma degan jirin ee waxaa cuni jiray shinbiraha iyo dugaagga. Markaasay Qaabiil iyo Haabiil soo bexeen oo ay qurbaannadooda soo bandhigeen. Qaabiil wuxuu ahaa beeraalay, markaasuu wuxuu qurbaan ahaan usoo bandhigay xirmo bal ah oo sabuulkeeda wadata oo ka mid ahaa badarka beertiisa ugu xun, wuxuuna uurka iska yiri: "dan kama lihi in la iga aqbalo iyo in kale, oo Haabiil weligiis walaashay guursan mayo." Haabiil wuxuu lahaa ari, markaasuu wanka ugu buuran arigiisa soo qabtay oo uu qurbaan ahaan usoo bandhigay, naftiisana uu u sheegay inuu xukunka Ilaahay raalli ku yahay. Markaasay labadooda qurbaan buur dusheed saareen, oo uu markaas Aadan Calayhissalaamu Alle baryay. Markaasaa waxaa Samada kasoo degay dab oo qurbaanka Haabiil cunay, kana tegey qurbaanka Qaabiil, siday noo sheegtay Aayadda toddoba iyo labaatanaad ee Suuratu Al Maa'idah: **"Wa atlu calayhim naba'a ibnay Aadama bi al xaqqi ith qarrabaa qurbaanan fa tuqubbila min axadihimaa wa lam yutaqabbal mina al aakhari qaala la aqtulannaka qaala innamaa yataqabbalu Allaahu mina al muttaqiina**(27)**".** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Ku akhri korkooda, Nabi Muxammadow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, warka labada wiil ee Aadan, markay soo dhoweeyeeen oo soo bandhigeen qurbaan, oo markaas midkoodna qurbaanka laga aqbalay, midka kalena aan laga aqbalin, oo uu midkaan dambe walaalkiisa qurbaankiisa la aqbalay ku yiri: "waan ku dilayaa", kanna uu ku yiri: "Ilaahay wuxuu ka aqbalaa kuwa muttaqiinta ah ee ka dhawrsada(27)." Qaabiil wuu ka carooday in qurbaankiisa la diiday, waxaana naftiisa gashay xaasidnimo. Markaasuu Adan Kacbada usoo xajjiyay. Markaasuu markuu aabihiis tegey ayuu Qaabiil wuxuu u yimid walaalkiis Haabiil oo arigiisa la jooga, uuna ku yiri: "waan ku dilayaa, maxaa yeelay Ilaahay Tacaalaa qurbaankaaga ayuu aqbalay, kaygana wuu diiday, oo aad markaas mataantayda quruxsan guursanaysaa, aniguna aan mataantaada foosha xun guursanayaa, oo ay markaas dadku ku sheekaystaan inaad adigu iga fiican tahay, caruurtaaduna ay caruurtayda ka fiican yihiin!" Haabiil wuxuu yiri:

"aniga dambigayguna muxuu yahay? Ilaahay kuwa ka dhawrsada wuu ka aqbalaa." Ibnu Jariir Al Dhabarii wuxuu tafsiirkiisa ku wariyay inuu wankaasu ahaa midkuu Ilaahay u keenay Nabi Ibraahiim Calayhissalaamu oo uu wiilkiisa Ismaaciil ku furtay, oo uu tan iyo waagaas meel uu Isagu ogyahay ku hayay! Warinna waxay sheegtay inuu Qaabiil ina Aadan meesha Ghaaru Xiraa' laga tafo uu walaalkiis Haabiil ugu yimid, oo uu halkaas ku dilay. Al Thaclabii wuxuu yiri: "Haabiil maalinta la dilay wuxuu ahaa labaatan jir." Waana la isku khilaafay sida iyo meesha Haabiil lagu dilay. Qaar kalena waxay yiraahdeen: "waxaa lagu dilay caqabada, waana jiirta laga koro Ghaaru Xiraa' ee Jabalu Al Nnuur ee Makkah Al Mukarramah." Jacfar Al Saadiq wuxuu yiri: "Waxaa lagu dilay Basrah ee arliga Ciraaq, Masjidka wayn dhexdiisa barta ku beegan, ayadoo uusan waqagaas masjidkaasi jirin." Intaasuu warka Al Thaclabii ku egayahay. Ibnu Xajar wuxuu Fatxu Al Baarii ku yiri: "Taas weeye midda caanka ah."

Qaabiil

Qaabiil markuu walaalkiis Haabiil dilay aabihiis waa dayriyay oo la eryay. Markaasuu wuxuu noqday nin aan guri lahayn, oo cabsanaya, cidna aan aaminayn. Markaasuu mataantiisa Aqliimaa gacanta ku dhegay oo uu Cadan, dalka Yaman, ula cararay, halkaasoo uu degay. Cadan waxaa ugu yimid Ibliis oo ku yiri: "dabku wuxuu qurbaanka Haabiil u cunay ayadoo uu Haabiil dabka caabudi jiray. Marka adiguna meel dabka la caabudo lagu shido dhiso, oo adiga iyo caruurtaaduba caabuda." Markaasuu Qaabiil wuxuu dhistay guri dabka lagu shido oo lagu caabduo, oo sidaasuu ku noqday ninka ugu horreeya oo dab caabuda. Markaasuu qofkii Qaabiil soo ag maraba wax ku soo tuuraa, ama dhagax ama bir iyo waxa la midka ahba. Maalin ayaa waxaa soo ag maray wiil uu dhalay oo indho beelay, uuna hoggaaminayo wiil uu wiilkiisaasu dhalay oo ku yiri: "waa kanaa aabahaa Qaabiil." Markaasuu wiilkiisa indhoolaha ahi wuxuu aabihiis ku tuuray waran, ama wax u dhigma, oo uu sidaas ku dilay. Markaasuu wiilkiisa hoggaaminayay wuxuu ku yiri: "ma aabahaa ayaad dishay?" Markaasuu indhooluhu intuu gacantiisa kor u qaaday wiilkiisa ku dhuftay, oo uu sidaas ku dilay. Markaasuu indhooluhu wuxuu yiri: "hoogayeey! Aabahay ayaan waran ku ganay oo dilay, wiilkaygana dharbaaxaan ku dilay!" Runtana Rabbii ayaa og. Qaabiil wuxuu degay magaalada Cadan ee Yaman, oo Cadan macneheedu waa meesha lagu waaro, sidaan Quraanka meelo badan ugu aragnay jannaatu cadnin oo ah jannooyin lagu waaro.

S h i i t h

Aadan wuxuu dhashiisa kala dardaarmay Shiith, Calayhisssalaamu, ayaguna way adeeceen oo ay walaalkood u hoggansameen. Waxaa Ibnu Cabbaas laga wariyay inuu yiri: "Aadan ma uusan dhiman jeer ay caruurtiisa iyo kuwuu awoowaha uu u yahay afartan kun gaareen, afartankaas kunna ay ka mid yiliiin afartan uu isagu dhalay." Kitaabka Musnadu Al Firdawsa wuxuu Anas ka wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Inna Aadama Calayhi Al Ssalaatu wa Al Ssalaamu qaama khadhiiban fii arbaciina alfan min**

waladihi wa walada waladihi, wa qaala: "inna Rabbi cahida ilayya fa qaala: "Yaa Aadamu aqlil kalaamaka tarjicu ilaa jawaarii". Wa kaana Shiithu ajmala awlaadihi wa ashbahahum bihi, wa axabbahum ilayhi, wa afdalahum, wa callamahu Allaahu Al Ssaacaata wa Al Cibaadata fii kulli saacatin minhaa, wa anzala calayhi khamsiina saxiifatin, wa zawwajahu Allaahu ukhtahu allatii waladat bacdahu wa kaanat jamiilatan ka ummahaa Xawaa'a. Wa khadhaba Jibriilu wa shahidat Al Malaa'ikatu, wa kaana Aadamu waliyyahaa wa razaqahu Allaahu awlaadan fii xayaata abiihi, wa cammara tisca mi'atin wa ithnay casharata sanatin. " Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Aadan, Calayhi Al Ssalaatu wa Al Ssalaamu, ayaa wuxuu hor istaagay afartan kun oo ah caruurtiisa uu isagu dhalay iyo caruurtay caruurtiisu dhaleen, wuuna u khudhbeeyey, wuxuuna yiri: "Ilaahay waa ila dardaarmay wuxuuna yiri: "Aadanow hadalkaaga yaree markaasaad darisnimadeyda usoo noqoneysaaye". Shiith-na wuxuu ahaa kan dhashiisa ugu qurxoon, isagana ugu ekaansho badan, uuna ugu jecel yahay, uguna deeq badan. Ilaahay wuxuu Shiith baray saacadaha maalinta iyo habeenka iyo cibaadeysiga mid walba oo saacadahaas ka midka ah, wuxuuna kusoo dejiyay konton saxiifo, waa waraaqee. Ilaahay ayaa wuxuu u guuriyay walaashiisa isaga dabadiisa dhalatay, ahaydna gabar qurxoon, sida ay hooyadeed Xaawo u qurxooneyd oo kale. Waxaa gabadha u doonay Jibriil oo khudbadna jeediyay, markhaatina waxaa ka ahayd malaa'igta, waligeeduna wuxuu ahaa aabeheed Aadan. Ilaahay wuxuu Shiith gabadhaas ka siiyay ubad intuu isaga aabihiis wali nolol ku sugnaa. Shiith wuxuu noolaa oo uu cumrigiisu gaaray sagaal boqol iyo laba iyo toban sano". Waxaa kaloo la yiri Sagaal boqol iyo labaatan sano, wuxuuna dhintay markay soo degidda Aadan kasoo wareegatay kun iyo labo iyo afartan sano. Shiith Waxaa lagu duugay hogga ku yaalla buurta Abuu Qubays (oo Kacbada agteeda ku taalla, haddase la jebiyay oo guriga boqorka sucuudiga laga dhisay).

Y a a n i s h/A n u u s h

Kaddib markuu Ilaahay u waxyooday inuu wiilkiisa Anuush doorto oo uu u dardaarmo, wuxuu Shiith ogaaday in geeridiisa loo sheegay oo uu dhimanayo. Sidaas ayuu Shiith u dardaarmay wuxuuna khaliif ka dhigtay umuuraha maareeya isaga dabadiis, wiilkiisa Anuush. Waxaa kaloo la yiri wiilka magaciisu waa Yaanish. Waxaa kaloo la yiri waa Anash. Al Suhaylii wuxuu yiri: "Anuush waxaa weeye Al Saadiqu oo macnihiisu yahay kan runlowga ah, afka Carabigana waxaa lagu yiraahdaa Anash." Mughlaadhay wuxuu yiri: "Waa Yaanish oo macneheedu yahay Al Saadiqu, kan runlowga ah, siduu u xusay kitaabka Al Nuuru". Yaanish ayay madaxtinnimada khalqigu usoo wareegtay aabihiis dabadiis, hawshaasoo uu sidii aabihiis oo kale ugu qumay. Yaanish wuxuu lahaa dhererka iyo caddaanta iyo quruxda aabihiis, wuxuuna noolaa sagaal boqol iyo konton sano. Waxaa kaloo la yiri sagaal boqol iyo labaatan sano. Waxaa ayadana la yiri sagaal boqol iyo shan iyo lixdan sano. Shiith wuxuu wiilkiisa Yaanish kala dardaarmay inuusan nuurkaan, oo wajiga Aadan

sida qorraxda uga nuurayey, ku wareejin waxaan ahayn haween daahirad ah mooyee. Sidaas ayuu dardaarankaasi u taagnaa, oo uu facba faca ku xiga ugala dardaarmayey. Sidaas ayuu markaasi rag suuban iyo haween daahiraad ah isugu gudbiyeen ilaa uu uga soo gudbo Cabdu Al Mudhalib iyo wiilkiisa Cabdu Allaahi. Markaasuu Ilaahay ugu nicmeeyey inuu nuurkaas u wareego oo ay ku liibaanto Aaminah bintu Wahab, Allaha raalli ka noqdee, hooyada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Cadawnimada Ibliis

Ilaahay Tacaala wuxuu kitaabkiisa iyo carrabka Nabigiisa Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, noogu sheegay inuu Ibliis cadawgeen yahay, ujeedadiisuna ay tahay inaan adduunkaanna nolol xun ku noolaanno, aakhirana aan naarta galno. Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aayadaha boqol sideed iyo lixdan iyo sagaal iyo lixdan ee Suuratu Al Baqarah ku yiri: **"Wa laa tattabicuu khudhuwaati al sh-shaydhaani innahu lakum caduwwun mubiinun**(168)**Innamaa ya'murukum bi al suu'i wa al faxshaa'i wa an taquuluu calaa Allaahi maa laa taclamuuna**(169)**."** Aayadaha macnehoodu waxaa weeye: "hana raacina raadka iyo dariiqyada shaydaanka, maxaa yeelay shaydaanku wuxuu idiin yahay cadw cad(168)Wuxuuna idin amrayaa inaad dambi gashaan, aad adinku u qoollan tihiin oo aad kaddib ka xumaataan inaad fasheen, iyo inaad Ilaahay amarkiisa diidaan oo aad hadal iyo ficil foolxun ku kacdaan, iyo inaad Ilaahay ka tirahdaan wax aydnaan cilmi u lahayn oo aydnaan ogayn(169)." Wuxuu kaloo Ilaahay Tacaalaa Aayadaha lix iyo toban iyo toddoba iyo toban ee Suuratu Al Acraafi noogu sheegay inuu Ibliis yiri: "**La aqcudanna lahum siraadhaka al mustaqiima**(16)**Thumma la aatiyannahum mmin bayni aydiihim wa min khalfihim wa can aymaanihim wa can shamaa'ilihim wa laa tajidu aktharahum shaakiriina**(17)**."** Aayadaha macnohoodu wxaa weeye: "Waxaan banii aadanka u fariisanayaa dariiqaaga toosan, oo ah islaamka(16)Markaasaan waxaan uga imaanayaa xagga hortooda ah, oo ah aakhiro oo aan shaki ka gelinayaa, iyo xaggooda dambe, oo ah adduunka oo aan ku boorrinayaa, iyo xagga midigyadooda oo ah waxaan ka qasayaa Diintooda, iyo xagga bidixyadooda oo aan macaasida u qurxinayaa kuna boorrinayaa. Waxaadna heleysaa inayan badankoodu muslimiin ahayn(17)."

Dhimashada Aadan

Aadan wuxuu dhintay, Calayhissalaamu, isagoo kun sano jirsaday, sida kusoo aroortay Xadiithka Abuu Hurayrah iyo Ibnu Cabbaas ay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyeen. Waxaa kaloo la yiri kun sano oo toddobaatan dhimman. Waxaa kaloo la yiri kun sano oo lixdan dhimman. Waxa kaloo la yiri oo afartan dhimman. Wuxuuna ku dhintay, ayaa la yiri, Makkah Al Mukarramah maalin Jimce ah, waxaana ku tukaday Malag Jibriil oo Imaam u ah malaa'igta kale iyo dhasha Aadanba. Waxaa kaloo la yiri waxaa ku tukaday wiilkiisa Shiith, taasoo uu Jibriil ku amray, waxaana lagu duugay qabri ku yaalla god ku yaalla buurta Jabalu Qubays, oo ah buurta uu hadda ka dul dhisan yahay guriga boqorka

sucuuudiga oo Kacbada agteeda ka dhisan. Sidaas waxaa sheegay Al Thaclabii iyo ghayrkiisaba. Ibnu Cabbaasna waxaa laga wariyay inuu yiri: "Markuu Aadan Xajka dhammaystay oo uu ka firaaqoobay oo uu kasoo jeestay, wuxuu u laabtay Hindiya, halkasoo uu ku dhintay." Thaabit Al Banaanii waxaa laga wariyay inuu yiri: "Markuu Aadan dhintay waxay u qaadeen god ku dhex yaalla sarandiib -oo ah god- ku yaalla barta lagu soo dejiyay (waana buurta dalka Hindiya ku taalla oo la yiraahdo Jabalu Buuthaa, magac kalena waa lagu sheegay)". Warkaasna waxaa saxiix weeye yiri Al Xaafith Ibnu Kathiir. Waxaa kaloo la yiri; waxaa lagu duugay meel u dhexeysa Baytu Al Maqdis iyo Masjidka Ibraahiim (oo ku yaalla magaalada Al Khaliil ee daanta galbeed ee Wabiga Urdun ee arliga Falasdhiin), isagoo madixiisu xigo xagga dhagaxa Masjidu Al Aqsaa ku dhex yaalla, oo uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka kici timay habeenka Samaawaadtka kore loo dheelmiyay, uuna Ilaahay, Cazza wa Jalla, intuu hor istaagay uu indhiliiisa madixiisa ku yaalla kusoo arkay (siday Axaadiithti warisay), llaahayna uu turjubaan la'aan si toos ah ula hadlay, uuna shanta Salaadood oo waajibka ah isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, korkiisa iyo korka ummaddiisaba ku fardi yeelay. Aadan lugihiisuna waxay xigaan xagga Masjida Ibraahiim. Waxaa kaloo la yiri: waxaa lagu duugay Masjidu Al Khayfi oo Mina ku yaalla. Ibnu Isxaaq iyo ghayrkiisba waxay yiraahdeen: waxaa duugtay malaa'igta iyo Shiith iyo walaaliliiis, waxayna ku duugeen Mashaariqu Al Firdawsi tuulada ahayd magaalada ugu horreysey oo adduunkaan lagu dhisay. Maalintaas waxaa madoobaaday qorraxda iyo dayaxaba oo labadooduba madoobaa. Xaawo waxay Aadan dabadiis nooleyd hal sano. Waxaa kaloo la yiri waxay ka dambeysey saddex maalmood, waxaana lagu duugay dhiniciisa.

Cunnada jinniga

Al Qasdhalaanii wuxuu kitaabkiisa Al Mawaahibu ku yiri: "Markuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Nakhlah ku degay, wuxuu Ilaahay xaggiisa usoo duway toddoba nin oo jinniga Nasiibiin ah oo Carab ah (oo jinni walba dalkuu deggan yihay ayuu ka tirsan yahay, afkoodana uu ku hadlaa, oo jinniga, tusaale ahaan Soomaaliya deggan waa soomaali wuxuuna ku hadlaa afka soomaaliga), ayadoo uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam habeen barkii salaad u istaagay. Markaasay dhegeysteen isagoo, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Suuratu Al Jinni akhrinaya (waxaa kaloo la yiri Suuratu Al Rraxmaani, waxaana kaloo la yiri Iqra'). Al Bukhaarii wuxuu wariyay inuu ahaa geed -oo uu Al Zarqaanii yiri waa geedka noociisu yahay Samurah, kana mid ah geedaha Al Dhalxu- kan Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay joogitaanka jinniga. Markaasay waxay weydiisteen inay cunnadoodu tahay waxa banii aadanka kasoo hara, ama, siduu Al Zarqaanii u yiri waxay weydiisteen waxa u xalaasha ah iyo waxa xaaraanta ka ah. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri: **"kullu cathamin thukira Ismu Allaahi calayhi yaqacu fii yadi axadikum awfara maa kaana laxman. Wa kullu bacrin calafun li dawaabikum."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"cunnadiinnu waa laf kasta oo marka la cunayo bisinka Ilaahay loo qabtay. Markay laftaasu gacantiinna soo gasho waxaa kasoo buuxsamaya hilib ka fara badan midka hore ugu yiillay. Saalada xooluhuna waxay calaf, waa cunnee, u tahay xoolihiinna, oo waxay u noqonaysaa xoolihiinna dhir cagaaran." Xadiithkaanna wuxuu daliil u yahay inuu jinnigu wax cuno waxna cabbo, wuxuuna beeninayaa kuwa yiraahda inayan jinnigu wax cunin waxna cabbin, oo laftu waxay hilib u noqonaysaa waa in run ahaantii la cuno hilibkaas. Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri**: "inna al sh-shaydhaana ya'kulu bi shimaalihi wa yashrabu bi shimaalihi"**, oo macnihiisu yahay: "shaydaanku wuxuu wax ku cunaa gacantiisa bidix, wuxuuna wax ku cabbaa gacantiisa bidix."

Jinnigu caruur ayuu dhalaa

Jinnigu waa sida dadkoo kale oo waxay u qaybsan yihiin rag iyo haween, waana is guursadaan, caruurna ay dhalaan. Kitaabka Aakaamu al murjaani fii axkaami al jaanni wuxuu bogga lix iyo konton ku wariyay: "Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: **"lam yadhmith-hunna insun qablahum wa laa jaannun**(65)**."** Waana Aayadda shan iyo lixdanaad ee Suuratu Al Rraxmaani oo macneheedu yahay: "uusanna ayaga hortood la gogol gelin insi iyo jinni toona. (65)." Ilaahay wuxuu Aayadda kontonaad ee Suuratu Al Kahfi ku yiri: **"Wa ith qulnaa lilmalaa'ikati usjuduu li Aadama fa sajaduu illaa ibliisa kaana mina al jinni fa fasaqa can amri RabbiHi a fa thattakhithuunahu wa thurriyatahu awliyaa'a min duunii wa hum lakum caduwwu bi'sa lilth-thaalimiina badalan**(50)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Xus markaan malaa'igta ku niri: "u sujuuda Aadan", oo ay sujuudaan intaan ibliis ka ahayn, isagoo ka mid ah jinniga, oo diiday amarka Rabbigiis. Marka, ma isagaasaad iyo dhashiisaad ka dhiganaysaan gargaarayaal, Aniga sokadayada, ayagoona adinka cadaw idiin ah? Waxaa xumaatay dhaafsiga ay daallimiintu daacada Ilaahay ku beddesheen daacadda Ibliis!(50)." Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aayadda toddoba iyo labaatanaad ee Suuratu Al Acraafi ku yiri: **"Innahu yaraakum huwa wa qabiiluhu mi xaythu laa tarawnahum**(27)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Shaydaanku wuu idiin jeedaa, isaga iyo qabiilkiisuba oo uu Cabdu Allaahi bin Cabbaas yiri: "waa caruurtiisa", adinkuna uma jeedaan oo ma arki kartaan. Maalik bin Diinaar wuxuu yiri: "cadaw kuu jeeda, adiguna aadana u jeedin waa culays badan yahay oo dhib badan yahay qofkuu Ilaahay ka ilaaliyo mooyee(27)."

Anwaacda jinniga

Al Zarqaanii wuxuu yiri: "ibnu Xibbaan iyo Al Xaakim waxay ka wariyeen Abii Thaclabah Al Khushanii inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Al jinnu thalaathatu asnaafin. Sinfun lahum ajnixatun yadhiiruuna fii al hawaa'i. Wa sinfun xayyaatun wa caqaariba. Wa sinfun yaxilluuna wa yathcanuuna wa yarxaluuna."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeyey: "jinnigu waa saddex nooc, oo kala ah: (Kow) nooc baalal leh oo hawada ku duula. (Laba) Nooc labaad oo ah abeesooyin iyo hangaralle. (Saddex) iyo nooc dadka ku dega oo gala, oo dura oo dhiba,

oo socdaala." Waaba ayaduu Ilaahay Tacaalaa Aayadda afar iyo lixdan ee Suuratu Al Israa'i ku yiri: **"Wa istafziz mani istadhacta minhum bi sawtika wa ajlib calayhim bi khaylika wa rajilika wa shaarikhum fii al amwaali wa al awlaadi wa cidhum wa maa yaciduhumu al sh-shaydhaanu illaa ghuruuran**(64)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "ugana nixi oo ku cabsii codkaaga kuwa ayaga banii aadanka ka midka ah oo aad awoodid oo uu ibnu Cabbaas yiri: "ugu yeer caasiyidda Ilaahay, oo axad kasta oo dadka ugu yeeray in Ilaahay la caasiyo oo amarkiisa la diido wuxuu ka mid yahay askarta Ibliis." Imaam Caashuur wuxuu yiri: "waa dadka nafafkooda waswaasi." Korkoodana isugu keen oo adeegso fardooleydaada iyo ciidankaaga lugtaba, kulana qayli baadiyentooda. Kulana shirkow oo la wadaag maalalkooda, ayagoo si xaaraan ah ku kasbanaya ayna ribadu ka mid tahay oo ah faa'iidada bangiyada, si xaaraan ah ku bixinaya. Caruurtoodana la wadaag oo shirko kula noqo, oo uu ibnu Cabbaas yiri: "waa gabdhaha ayagoo nool la duugi jiray islaamka hortiis." Mujaahid iyo Al Ddaxxaak waxay yiraahdeen: "waa caruurta zinada ka dhasha." Al Xasan iyo Qataadah wacxay yiraahdeen: "waa ayagoo caruurtooda ka dhiga yuhuud, ama krishtaan ama majuus." Waxaa kaloo la yiri waa caruurtooda oo ay ku magacaabaan inay asnaamta addoon u yihiin, sida Cabdu Al Cuzzaa, Cabdu Manaat, iyo wixii la midka ah. Waxaa kaloo Jacfar bin Muxammad laga wariyay inuu shaydaanku uu ninka thakarkiisa ku fariisto oo hadduusan Bismi Allaahi oran markuu haweentiisa u tegayo uu isaguna haweentiisa la wadaagayo, uuna farjigeeda ku biyo keenayo siduu ninku ugu biyo keeno oo kale." Una yabooh inay waxay doonayaan helayaan, oo ay adiga ku adeecaan. Shaydaanna u yaboohi mayo waxaan dagmo ahayn, ahna inuu waxa xun u qurxiyo oo uu wax fiican uga dhigo(64)."

Jinnigu waa dhintaa

Jinnigu markuu cimrigiisu dhammaado wuu dhintaa, oo waaba ayada uu Ibliis ka baryayo Ilaahay inuusan dilin ilaa maalinta qiyaame, siduu Ilaahay noogu sheegay Aayadda lix iyo soddon ee Suuratu Al Xijri: **"Qaala Rabbi fa anthirnii ilaa yawmi yubcathuuna**(36)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Rabbiyow ii kaadi, oo ha i dilin ilaa maalinta qiyaame, oo midkaan xuni wuxuu doonayaa inuusan dhimanba oo ilaa maalinta qiyaame uu noolaado, kaddib marka malagga dadka naftaba ka qabta laftiisaba la dilay intaas ka hor, oo inta suuradda wan loo soo yeelay la gawracay. Doqonku wuxuuba damcay inuu Ilaahay Tacaalaa siro(36)." Ilaahay Tacaala wuxuu Aayadda sideed iyo tobnaad ee Suuratu Al Axqaafi ku yiri: **"Uulaa'ika allathiina xaqqa calayhimu al qawlu fii umamin qad khalat min qablihim mmina al jinni wa al insi innahum kaanuu khaasiriina**(18)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "kuwaasu waa kuway korkooda cadaabi ku dhabawday kana mid ah ummado adinka hortiin gudubtay oo ka mid ah jinniga iyo insiga, waxayna ahaayeen kuwa khasaaray(18)." Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aayadda boqol shan iyo sideetan ee Suuartu Al Ancaami ku yiri: **"Kullu nafsin thaa'iqatu al mawti**(185)**"**,

oo macneheedu yahay: "Kulli naf walaba waa midda geerida dhedhemisa o dhimata(185)."

Al Imaamu Axmad wuxuu Cabdu Allaahi bin Cumar ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"A ra'aytum laylatikum haathihi? Fa inna calaa ra'asi mi'ati sanatin la yabqii mimman huwa al yawma calaa thahri al ardi axadun."** Xadiithka macnihiisu waxaa aweeyey: "Ma aragtaan habeenkiinnaan caawa ah? Boqol sano oo gaw ah markay kasoo wareegato axadna ka hari mayo oo way wada dhimanayaa inta arliga dushiisa maanta saaran." Al Imaamu Axmad wuxuu kaloo Jaabir bin Cabdu Allaahi ka wariyay inuu yiri inuu maqlay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo leh: **"Aqsimu bi Allaahi maa calaa al ardi nafsun manfuusatun al yawma ya'tii calayhaa mi'atu sanatin."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "waxaan ku dhaartay Ilaahay inayan arliga korkiisa ku sugnayn naf nafi ku jiro oo neefsanaysa maanta oo boqol sanoo kale noolaanaysa." Jinniguna waa naflay nafi ku jirto. Labada Xadiithna waxaan kasoo qaatay Al Nihaayah ee ibnu Kathiir. Kitaabka axkaamu al jaanni wuxuu bogga laba boqol sideed iyo soddon ku yiri: "nin ayaa ibnu Cabbaas wuxuu ku yiri: "jinnigu ma dhintaa?" wuxuu yiri: "haa, intaan ibliis ahayn."

Malakul Mawtku waa Malagga qabta, arwaaxda oo idil kuwa jinniga iyo insiga iyo bahaa'inka xoolaha ah iyo makhluuqaatka oo idil. Nin baa wuxuu Imaam Maalik weydiiyay: "Xasharaadtka ruuxooda ma waxaa qabtah Malakul Mawtka?" Markaasuu Imaam Maalik cabbaar aamusnaa oo uu fakarayey, kaddibna wuxuu yiri: "Naf ma leeyihiin?" Wuxuu ninkii yiri: "Haa". Imaam Maalik wuxuu markaas yiri: "Hadaba Malaku al Mawti ayaa ruuxooda qabanaya, oo nafta ka qaadaya. Ilaahay ayaana oofsada nafta markay dhimaneyso". Imaam Maalik wuxuu daliil ka dhigtay Aayadda labo iyo afartanaad ee Suuratu Al Zumar oo oraneysa: **"Allaahu yatawaffaa al anfusa xiina mawtihaa**(42)**",** oo, macneheedu yahay: "Ilaahay ayaa oofsada nafta markay dhimaneyso(42)". Waxaa wariyay Al Khadhiibu, waxaana ayyida Xadiithka kale oo ay wariyeen Al Dhabraanii iyo Ibnu Mandah iyo abuu Nucaym, oo oranaya inuu Malag Cazraa'iii Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: ”Wallaahi haddaan doonayo inaan qabto ruuxa kaneeco, ma karo jeer uu Ilaahay ithmo qabashadeeda."

Degmada jinniga

Jinnigu wuxuu degaa musqulaha, iyo inta u dhexeysa buuraha iyo badda, oo qaalli Badru Al Ddiini wuxuu bogga laba iyo afartanaad ee axkaamta jinniga ku wariyay inu Bilaal bin Al Xaarith yiri: "Annagoo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, safar ula soconna ayaan meel ku degnay, oo uu markaas musqal aaday, markuu musqul aadana wuu fogaan jiray. Markaasaan waxaan u keenay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, weel biyo ku jiraan. Markaasuu dhaqaaqay, markaasaan agtiisa ka maqlay muranka rag murmaya iyo codad caraysan oo xoog leh, aanan codad ka dhawaaq badan hore u maqal. Markaasuu Rasuulka Ilaahay,

Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"ikhtasama al jinnu al muslimuuna wa al jinnu al mushrikuuna, fa sa'aluunii an uskinahum, fa askantu al muslimiina al jalasa wa askantu al mushrikiina al ghawra."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "waxaa dacwooday oo murmay jinniga muslimiinta ah iyo jinniga gaalada ah, markaasay waxay i weydiisteen inaan kala dejiyo. Markaasaan muslimiinta waxaan dejiyay tuulooyinka iyo buuraha, gaaladana aan dejiyay dhulka u dhexeeya buuraha iyo badda." Kathiir, oo wariya yaalka Xadiithkaan ka mid ah, wuxuu yiri: "qof kastoo ay tuulooyinka iyo buuraha wax ku gaaraan wuu badbaadaa, midkayse buuraha iyo badda dhexdooda wax ku gaaraan wuxuu u badan yahay inuusan badbaadin." Anas wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, musqusha ka yiri: **"haathihi muxdaratun fa ithaa dakhala axadukum al khalaa'a fal yaqul: "Bismi Allaahi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "meeshaan waa la deggan yahay, ee markuu midkiin musqasha galo ha yiraahdo **Bismi Allaahi**." Riwaayad kalena wuxuu ku daray: " Al Bukhaarii iyo Muslim waxay wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, intuusan musqusha gelin oran jiray: **"Allaahumma innii acuuthu bika mina al khubthi wa al khabaa'ithi"**, oo macnihiisu yahay: "Ilaahayow, Adigaan kaa magan galay shayaadhiinta ragga ah iyo shayaadhiinta dheddigga ahba", ayadoo ay musqusha deggan yihiin shayaadhiin, sidaan annagu guryeheenna u deggannahay oo kale. (waana xadiithka Al Bukhaarii ee boqol laba iyo afartan iyo Muslim xadiithka saddex boqol shan iyo toddobaatan). Axaadiith kalena waxay noo sheegeen inuusan jinnigu albaabka musqusha iska furin karin oo uu sidaas guryeheenna noogu soo geli karin, ee adigu ha ka furin oo yuusan sidaas gurigaga kuula joogin! Albaabbada musqulaha mar walba ha xirnaadaan! Al Bukhaarii iyo Muslim waxay kaloo wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Fa inna al sh-shaydhaana laa yaftaxu ghalqan."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "oo shaydaanku albaab xiran ma furi karo." Hana u oggolaan jinniga inuu cawradaada arku markaad musqusha gashid ee iska xijaab, oo Al Tirmithii wuxuu Calii bin Abii Dhaalib ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"sitru maa bayna acyuni al jinni wa cawraati ummatii ithaa dakhala axadukum al khalaa'a an yaquula Bismi Allaahi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Asturka u dhexeeya oo kala qarinaya indhaha jinniga iyo cawraadka ummaddayda markay musqusha galaan waa inay yiraahdaan Bismi Allaahi."

Shayadiintu markay Qurraxdu dhacdo ayuu hawl usoo baxaan

Maalin walba markay qorraxdu dhacdo oo habeenku dumo, ayay ibliis iyo ubadkiisu usoo yaacaan inay dadka badiyeeyaan, oo fitneeyaan oo waxa xun u qurxiyaan.

Al Bukhaarii iyo Muslim waxay Jaabir bin Cabdu Allaahi ka wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"ithaa kaana janaxa al laylu wa amsaytum fa kaffuu sibyaanakum, fa inna al**

sh-shaydhaana yantashiru xiina'ithin. Fa ithaa thahaba saacatan mina al layli fa khalluuhum wa aghlaquu al abwaaba, wa uthkuruu Isma Allaahi Tacaalaa, wa khammiruu aaniyatukum wa uthkuruu Isma Allaahi Cazza wa Jalla, wa law an tucriduu calayhaa shay'an, wa adhfi'uu masaabiixakum." Riwaayad kale ay warisay: **"Fa inna al sh-shaydhaana laa yaftaxu ghalqan."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Markuu habeenku soo galo oo ay habeen noqoto shantaan waxyaalood yeela: **(Kow)** Caruurtiinna celiya oo guryahihiinna ku haya oo yeeyan dibadda u bixin, ayadoo uu markaas shaydaanku soo faafayo oo soo hawl galayo, kuwa jinniga iyo kuwa insigaba, oo ay markaas caruurta, oo caqligoodu yaryahay, oo aragga aabe iyo hooyo ka fog, dhibaato u geysan karaa, ayna ka mid tahay cay, dharbaaxid, garaacid, dafid, iyo wixii la midka ahba. Marka, markay habeenka in yar ka gudubto, guryaha ku haya. **(Laba)** Albaabbadana hoos ka soo xirta, waana si ayan idiinku soo gelin dugaag, xoolo iyo tuugaba, iyo shaydaanba iyo cirfiidyada muruxsan oo madaxa adag. Waxaadna xustaan Ilaahay Tacaalaa magaciisa. **(Saddex)** Weelashiinna biyaha iyo waxa la cabbo ku jiraan daboola. Waxaana laga daboolayaa shaydaanka. Magaca Ilaahay Cazza wa Jallana xusa, oo Bismi Allaahi dhaha. **(Afar)** Weelasha cunnadu idiinku jirtana daboola oo aabur saara. **(Shan)** Faynuusyadiinnana damiya markaad seexanaysiin. Sababtana riwaayad kale ayaa sheegtay, waana cabsi laga qabo inay doolli iyo mukulaal intay gaddiyaan uu dabkeedu guriga iyo dadka ku jiraba gubo." Riwaayad kalena waxay warisay: "oo shaydaanku albaab xiran ma furi karo."

Kuhaanta Carabta

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "culummada yuhuudda iyo ruhbaanta krishtaanka iyo kuhaanta Carabtu waxay ka warrameen soo diridda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Bicthada horteed iyo intaan la soo dirin ka hor, waqtigiisuna uu soo dhowaaday. Culummada yuhuudda iyo kuwa krishtaanku waxay warkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka heleen kutubbadooda, oo tilmaamay isaga sifooyinkiisa iyo sifooyinka zamankiisa iyo siday Anbiyadoodu cahdi iyo ballan uga qaadeen in marka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la soo diro ay rumeeyaan oo ay raacaan, ayna u gargaaraan. Kuhaanta Carabtuse waxay ka ogaadeen shayaadhiinta ay xiriirka la lahaayeen. Shayaadhiintaasi waxay kuhaanta u keeni jireen waxay kasoo maqlaan Samada, ayagoo aan waagaas Samada looga reebin xiddigo ololaya oo lagu soo gano. Sidaas ayay kuhaanta ragga ah iyo kuhaanta haweenka ahba waxay ku maqli jireen waxa socda. Warkaas Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku saabsan oo ay shayaadhiinta ka maqlaanna, Carabtu dan kama yeelan jirin, ilaa uu Ilaahay kasoo diray, oo ay rnarkaas dhaageen waxay u sheegi jireen. Markaasey aqoonsadeen." Al Suhaylii wuxuu yiri: "Waxaa akhbaarta lagu wariyay inuu Ibliis Ciise hortiis Samaawaadka dhex gooshi jiray. Markaasaa marka Ciise lasoo diray, ama markuu dhashay saddex Samo laga xijaabay oo laga reebay. Markuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,

dhashayna Samaawaadka oo idil ayaa laga xijaabay oo laga reebay, shayaadhiintuna markay u dhowaadaan xiddigo ololaya ayaa lagu soo ganaa. Markaasaa markay bateen xiddigaha lagu ganayo ayay Qurayshi waxay tiri: "Saacaddi ayaa kacday." Markaasuu Cutbah bin Rabiicah wuxuu yiri: "Waxaad fiirisaan xiddigga la yiraahdo Al Cayuuqu – oo ah xiddig wayn oo guduudan- oo haddii xiddiggaas la ganay, markaas kicidda Saacadda ayaa soo dhowaatay. Haddaan isaga la ganinna sooma ayan dhowaan." Kuwa khabarkaan xusayna waxaa ka mid ah Al Zubayr bin Abii Bakr." Waa intaas warka Al Suhaylii. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasaa, markuu amarka Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, soo dhowaaday, soo diriddiisana la gaaray, ayaa shayaadhiinta dhegeysiga laga reebay oo laga xijaabay, lana kala dhex galay ayaga iyo barahay Samada ka fariisan jireen si ay waxay malaa'igtu ku wada hadleyso maqalka wax uga soo dafaan. Markaasaa waxaa lagu rajmiyay oo lagu ganay xiddigo. Markaasey jinniyadu waxay ogaadeen inay taasi sidaas ku ahaatay arrin uu Ilaahay addoommadiisa la doonayo daraadeed. Ilaahay Tabaaraka wa Tacaalaa wuxuu Nabigiisa Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegayaa markuu soo diray, Isagoo uga warramaya marka jinniga laga xijaabay inay wax dhegeystaan, ayna ogaadeen waxay ogaadeen, ayanna waxaas oo idil midna ka inkirin oo diidin markay arkeen waxay arkeen: **"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Qul uuxiya ilayya annahu istamaca nafarun mina al jinni fa qaaluu innaa samicnaa Qur'aanan cajaban**(l)**Yahdii ilaa al rrushdi fa aamannaa bihi wa lan nushrika bi Rabbinaa axadan**(2)**Wa Annahu Tacaalaa Jaddu Rabbinaa maa ittakhatha saaxibatan wa laa waladan**(3)**Wa annahu kaana yaquulu safiihunaa calaa Allaahi shadhadhan**(4)**Wa annaa thanannaa an llan taquula al insu wa al jinnu calaa Allaahi kathiban**(5)**Wa annahu kaana rijaalun mina al insi yacuuthuuna bi rijaalin mina al jinni fazaaduuhum rahaqan**(6) **... Wa annaa kunnaa naqcudu minhaa maqaacida lilssamci faman yastamic al aana yajid lahu shihaaban rrasadan**(9)**Wa annaa laa nadrii asharrun uriida biman fii al ardi am araada bihim Rabbuhum rashadan**(10)**."** Aayadaha, oo ah Aayadaha kow ilaa lix, sagaal iyo toban ee Suuratu Al Jinni macnohoodu waxaa weeye: "Waxaad tiraahdaa, Nabiyow: "waxaa la ii waxyooday inay koox jinni ah dhegeysteen Quraanka, oo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, akhrinayo. Markaasey markay arligooda ku laabteen, waxay dadkooda ku yiraahdeen: "waxaan maqalnay Quraan balaaghadiisa iyo aftahannimadiisa lala yaabo, oo cajiib ah(1)Quraankaasoo dadka ugu yeeraya sawaabta oo ah tawxiidka iyo midaynta Ilaahay iyo iimaanka, markaasaan rumaynnay, cibaadadana Rabbigeen axadna la wadaajin maynno(2)Rabbigeenna Wayn oo Cathiimka ahna ma yeelan oo waa ka weynyahay inuu yeesho haweeney iyo ilmo midna(3)Keennii xumaana, oo ah ibliis, wuxuu ahaa kan Ilaahay been ka sheega, isagoo ku tilmaamay inuu shariik iyo ilmo leeyahay(4)Annaguna waxaan u maleyneynay inuusan insiga iyo jinniguba Ilaahay been ka sheegayn, oo

waxay noo sheegeen oo aan malayneyney waxay ahayd inuu Ilaahay haweeney iyo ilmo leeyahay, ilaa aan Quraanka ka maqalno(S)Waxayna ahaayeen, islaamka hortiis, rag Carab ahi markuu safar ku jiro oo uu waadi ku hoydo, wuxuu sharta waadigaas ka magan geli jiray jinniga meeshaas deggan, ilaa uu ka waabariisto, taasoo jinniga kibir iyo xadgudub iyo dambi u siyaadisay, oo rahaqan waa dambiga iyo xadgudubka(6) ... "Waxaanna ahayn kuwa Samada ka fariistah fariisimo si aan wax uga dhegeysanno. Haddase kii wax dhegeysta waxaa haleelaya danabyo lagu soo ganayo(9)Annaguna ma ogin inuu Rabbigood xumaan la doonayo kuwa arliga dhexdiisa ku sugan oo ku nool ama uu hanuun la doonayo iyo khayr(10)." Markaasey jinnigu markay Qur' aanka maqleen waxay ogaadeen in dhegeysiga looga reebay si aan Waxyiga shayna ugu qasmin, Waxyigoo ah khabarka Samada ka yimaada, oo uu markaas dadka arliga deggan uu isaga qasmo waxa Ilaahay xaggiisa uga yimid, si ay xujjadu ugu caddaato, wax isku qasanna meesha laga waayo, oo uu amarku u caddaado. Markaasey aamineen oo ay rumeeyeen, kaddibna ay ku yiraahdeen tolkood, siday noo warisay Aayadda soddonaad ee Suuratu Al Axqaaf: **"Qaaluu yaa qawmanaa innaa samicnaa Kitaaban unzila min bacdi Muusaa musaddiqan limaa bayna yadayhi yahdii ilaa al xaqqi wa ilaa dhariiqin mustaqiimin**(30)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Jinniga Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Quraanka ka maqlayna markay tolkooda oo deggan degmada Nasiibiin ee waqooyiga dalka Ciraq ku taalla dib ugu laabteen waxay ku yiraahdeen: "Tolkeenow! Waxaan maqalnay Kitaab, waa Quraankee, la soo dejiyay Muuse dabadiis, oo waxay ku taagnaayeen diinta yuhuudda, oo rumaynaya kutubbadii ka horreeyey, dadkana ku hanuuninaya runta iyo wadada toosan(30)." Oraahda jinniga oo ah "**Wa annahu kaana rijaalun mina al insi yacuuthuuna bi rijaalin mina al jinni fazaaduuhum rahaqan**(6)" waxaa weeye inay rag Carab ihi, Quraysh iyo ghayrkoodba, markuu socdaal ku jiro oo uu waadi ama dooxo dhexdeeda oo arliga ka mid ah ku dego si uu ugu hoydo, waadina waa dooxada ama banka intuu doono ha le'ekaadee buuro dhexdooda ku yaalla, oo ay buurahaasi biyaha roobka kusoo rogaan, ayuu wuxuu yiraahdaa: "Anigu waxaan caziizka -waa lagama adkaadehee- waadigaan ee jinniga ka mid ah ka magan galay caawa waxa shar ah ee waadigaan dhexdiisa ku jira." Al Baghawii wuxuu tafsiirkiisa Aayadda lixaad ee Suuratu Al Jinni uga wariyay Kardamu bin Abii Al Saa'ib Al Ansaarii inuu yiri: "waxaan u raacay aabahay Al Madiinah oo uu xaajo ka lahaa, markaasoo ahayd marka ugu horreysey oo Rasuulka Ilaahay, Saallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Makkah lagu xusay. Markaasaan waxaan la hoyannay nin ari raacanaya. Markaasey markuu habeenku kala barmay, ayaa waxaa yimid dhurwaa, markaasu wuxuu qaatay oo uu la tegey wan ariga ka mid ah. Markaasuu ninkii ariga la joogay booday, uuna yiri: "Kan waadiga degganow, magan gelyadaadaan ku jiraa!". Markaasaa waxaa dhawaaqay mid dhawaaqa oo aanan annagu u jeedin oo yiri: "Sarxaanow, sii daa." Markaasaa waxaa yimid wankii oo

ordaya, oo ariga dhex galay ayadoo ayan xagtini gaarin." Markaasuu Ilaahay, Cazza wa Jalla, Rasuulkiisa, Saallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo Makkah jooga Aayaddaan **"Wa annahu kaana rijaalun mina al insi yacuuthuuna bi rijaalin mina al jinni fazaaduuhum rahaqan**(6) kusoo dejiyay." Waa intaas tafsiirka Al Baghawi markaan.

Siday Carabtu u haysatay xiddigaha la ganayo jaahiliyada

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Carabta waxaa ugu horreeyey cid xiddigaha la ganayo ka naxda qolo ka mid ah qabiilka Thaqiif, oo Al Dhaa'if degta. Markaasey waxay u yimaadeen nin ayaga u dhashay, lana yiraahdo Camr bin Umayyah, kana sii ah reer Banii Cilaaj. Wuxuu yiri: wuxuuna ahaa ninka Carab ugu daahiyasan, waa caqli badnidee, uguna talo fiican. Markaasey waxay ku yiraahdeen: "Camrow, soo ma aadana arag waxa Samada dhexdeeda ka dhacay oo ah xiddigaha la ganayo?" Wuxuu yiri: "Haa, waan arkay ee marka adinkuna u fiirsada oo u kuur gala: hadday yihiin waxa la ganayo xiddigaha waaweyn oo lagu hanuuno marka barriga iyo badahaba la marayo, laguna kala yaqaanno xilliyada jiilaalka iyo gu' ga, ahna xiddigaha nolosha dadka u danta ah, hadday kuwaasi yihiin kuwa la ganayo, hadaba Wa Allaahi waa duubidda adduunka iyo dhammaadkiisa iyo halaagga khalqiga dhexdiisa ku suganba. Haddayse xiddigaha la ganayo xiddigo kale yihiin, ayaguna ay xaaladdooda lagu yaqaanno ku sugan yihiin, marka kaasi waa amar uu Ilaahay la doonay khalqigaan. Amarkaas-se muxuu yahay?" Ibnu Isxaaq wuxuu wariyay inay rag Ansaar ah sheegeen inuu Rasuulka Ilaahay, Saalla Allaahu Calayhi Wasallam, ayaga ku yiri: **"Maathaa kuntum taquuluuna fii haathaa al najmi allathii yurmaa bihi?"** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Maxaad ka oran jirteen xiddigahaan la ganayo?" Waxay yiraahdeen: "Nabiga Ilaahayow! Waxaan oran jimay markaan aragno ayadoo la ganayo: "waxaa dhintay boqor!", "Boqor ayaa la caleemo saaray", "wiil ayaa dhashay", "wiil ayaa dhintay". Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Saalla Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Laysa thaalika kathaalika, wa laakinna Allaaha Tabaaraka wa Tacaalaa kaana ithaa qadaa fii khalqihi amran samicahu Xamalatu Al Carshi, fa sabbaxuu. Fa sabbaxa man taxtahum. Fa sabbaxa li tasbiixihim man taxta thaalika. Falaa yazaalu al tasbiixu yahbidhu xattaa yantahii ilaa Al Ssamaa'a al ddunyaa, fa yusabbixuu. Thumma yaquulu bacduhum li bacdin: "Mimmaa sabbaxtum?" Fa yaquuluuna: "Sabbaxa man fawqanaa, fa sabbaxnaa li tasbiixihim." Fa yaquuluuna: "Alaa tas'aluuna man fawqakum mimma sabbaxuu?" Fa yaquuluuna mithla thaalika, xattaa yantahuu ilaa Xamalati Al Carshi. Fa yuqaalu lahum: "Mimma sabbaxtum?" Fa yaquuluuna: "Qadaa Allaahu fii khalqihi kathaa wa kathaa" li amri allathii kaana. Fa yahbidhu bihi al khabaru min Samaa'in ilaa Samaa'in, xattaa yantahii ilaa al Ssamaa'i al ddunyaa. Fa yataxaddathuu bihi. Fa tastariquhu al shayaadhiinu bi al ssamci calaa tawahhumin wa ikhtilaafin. Thumma ya'tuu bihi al kuhaana min ahli al ardi. Fa**

yuxaddithuuhum bihi. Fa yakhdha'uuna wa yusiibuuna. Fa yataxaddathu bihi al kuhaanu. Fa yusiibuuna bacdan wa yakhdha'uuna bacdan. Thumma inna Allaaha Cazza wa Jalla xajaba al sh-shayaadhiina bi haathihi al nujuumi allatii yuqthafuuna bihaa. Fa inqadhacat al kuhaanatu al yawma. Falaa kuhaanata." Waxaa isaguna Xadiithka wariyay Muslim, kuna wariyey Kitaabu Al Ssalaamu, tirada boqol iyo afar iyo labaatan, waxaana laga wariyay ibnu Cabbaas, Ilaahay isaga iyo aabihiisba raalli ha noqdee. Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Arrinku sidaas aad u sheegteen ma aha, ee laakiin waa sidatan: Markuu Ilaahay Cazza wa Jalla khalqigiisa amar xukunkiisa ah ku rido, waxaa maqasha Malaa'igta Carshiga Xambaarsan, oo la yiraahdo Xamalatu Al Carshi. Markaas ay maqlaan ayay tasbiixsadaan (oo waxay yiraahdaan Subxaana Allaahi). Markaasey malaa'igta hoostooda ahi ayaguna tasbiixsadaan. Markaasey markay malaa'igta ka hooseysa tasbiixdaas maqlaan ayay ayaguna la tasbiixsadaan. Sidaas ayay tasbiixsashadu hoos ugu soo degataa ilaa ay ka timaaddo Samada dhow ee adduunka soo xigta. Markaasey malaa'igta ayada ku sugani tasbiixsadaan, oo markaasey waxay qaarkood qaarka kale ku leeyihiin: "Maxaad ka tasbiixsateen?" Markaasey waxay leeyihiin: "Waxaa tasbiixsaday kuwa naga korreeya, markaasaan annaguna tasbiixdooda la tasbiixsannay". Markaasey waxay leeyihiin: "Maad kuwa idinka korreeya weydiisaan: "Maxaad ka tasbixsateen?" Markaasey sidaas oo kale leeyihiin. Markaasey qolaba kuwa ka korreeya sidaas oo kale u weydiinayaan ilaa ay gaaraan Xamalatu Al Carshiga. Markaasaa waxaa ayagana lagu leeyahay: "Maxaad ka tasbiixsateen?" Markaasey waxay leeyihiin: "Ilaahay ayaa khalqigiisa sidaas iyo sidaas ku xukumay" ayagoo amarkii ahaa sheegaya. Markaasuu khabarku soo deganayaa oo uu Samaba Samada ka hooseysa uga soo deganayaa ilaa uu ka yimaado Samada dhow oo adduunka soo xigta. Markaasey malaa'igtu amarkaas isaga ah ku sheekeysanayaan. Markaasey shayaadhiintu maqalkooda kusoo xadayaan oo ku dafayaan, si malo ku dhisan iyo ikhtilaafba. Markaasey waxay u imaanayan kuhaanta, waa faaliyayaashee, arliga jooga, markaasey uga warramayaan. Markaasey gafayaan, ayna haleelayaan (waxay malaa'igtu ku sheekeysanayeen). Markaasey faaliyayaalku ayaguna ka warramayaan oo ay dadka u sheegayaan. Markaasey qaarkiis haleelayaan, qaarkiisna ay gafayaan. Markaasuu Ilaahay Cazza wa Jalla shayaadhiinta ku xijaabay oo uu ku reebay xiddigahaan lagu ganayo (oo markay Samada u dhowaadaanba si ay malaa'igta warkooda wax uga soo maqlaan, ayaa xiddig ololaya lagu ganaa oo lagu eryaa. Dabkaasi markuu shaydhaanku ku dhaco wuu gubayaa dilise mayo, siduu Al Suhaylii u wariyay inuu ibnu Al Salaamu tafsiirkiisa ibnu Cabbaas uga wariyay). Sidaas ayay kuhaanadu, waa faalintee, ku go'day maanta, oo kuhaanana ma jirto."

Ganidda Shayaadhiinta

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Ibnu Isxaaq wuxuu baabkaan ku xusay sida shayaadhiinta xiddigo loogu ganay, si uusan Waxyiga wax ugu darsamin

oo uusan ugu qaldamin, uuna sidaas ku ahaado xujjo cad iyo goynta shakigaba, waxa uu yirina waa run. Laakiin shayaadhiinta oo xiddigaha lagu gano markaas ka horna way jirtay, oo hore ayaa loogu gani jiray, sida ay ugu sugantahay gabayada gabayaalkii hore ee jaahiliyada, ayna ka mid yihiin Cawf bin Ajrac iyo Aws bin Xajar iyo Bishr bin abii Khaazin, oo dhammaantood zamanka jaahiliyada noolaa, waxayna wada sifeeyeen oo ay gabayadooda ku tilmaameen ganidda xiddigaha. Tixaha ay arrinkaas ka yiraahdeenna waxay ku xusan yihiin kitaabka Mushkili ee ibnu Qutaybah marka la fasirayo Suuratu Al Jinni. Cabdu Al Razaaqna wuxuu Tafsiirkiisa uga wariyay Macmar in ibnu Shihaab la weydiiyey ganiddaan xiddigaha oo la yiri: "Jaahiliyadana ma jiray?" Wuxuu yiri: "Haa, laakiin markuu islaamku yimid waa lasii adkeeyey, waana la xoojiyay." Hadalka Ilaahay ee ku xusan Aayadda sideedaad ee Suuratu Al Jinni oo ah: **"Wa annaa lamasnaa Al Ssamaa'a fawajadnaahaa muli'at xarasan shadiidan wa shuhuban**(8)**",** oo macneheedu yahay: "Waxaan doonnay Samada, waxaanna helnay ayadoo ay ka buuxdo ilaalin daran iyo danabyo(8)." Oo inuusan oran waxaa loo ratibay ilaalo waxay daliil u tahay inay hore wax uga jireen. Markaasaa marka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lasoo diray, Samada laga buuxiyay ilaalo xoog badan iyo dab ololaya, si amarka shaydhaanka loo gooyo iyo wax ku darkooda, oo Aayadduna ahaato mid cad, xujjaduna mid goysa oo af leh. Hadday ayaamahaan faaliyayaal ama kuhaani jirto, taasi reebi meyso khabarkuu Ilaahay noo sheegay, oo ah eryidda shayaadhiinta inay maqalkooda iyo dhegohooda wax kusoo xadaan, maxaa yeelay xoojinta iyo adkeynta Samada waxay ahayd zamanka Nabinnimada. Sidaas ayay dhegeysigaas wax yar uga hareen, ayna u daliil tahay inay kaahinnada zamannada qaarkood iyo dalalka qaarkood wax ka jiraan, naadirba ha ahaadaane. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa waxaa wax laga wareystay kuhaanta, markaasuu wuxuu yiri: **"Laysuu bi sha'in",** oo macneheedu yahay: "Waxba ma ayan aha." Markaasaa waxaa la yiri: "Ayagu waxbay sheegaan, markaasey siday u yiraahdeen u noqotaa." Markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Tilka al kalimatu mina al jinni yaxfathuhaa al jinniyyu, fa yuqirruhaa fii uthuni waliyyihi qarra al zzujaajati, fa yakhludhu fiihaa akthara min mi'ati kathibatin."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Taasi waa eray jinniga ka timid oo uu jinnigu soo xafithay, oo uu markaas ku shubayaa oo uu ku foorarinayaa dhegta waligiisa, oo ah faaliyaha isaga raacsan oo uu saaxiibka la yahay, sida quraaradda wax laga shubayoo oo kale (loo foorariyo). Markaasuu wuxuu ku darayaa oo uu kalimaddaas ku qasayaa in ka badan boqol beenood." Waxaa kaloo Xadiithka wariyay Al Bukhaarii mujalladka sideedaad, bogga sideed iyo konton, iyo Muslim Xadiithka boqol iyo saddex iyo labaatan ee kitaabu Al Ssalaami. Ibnu Salaam wuxuu tafsiirkiisa ibnu Cabbaas uga wariyay inuu yiri: "Marka dabka ololaya jinniga lagu soo gano, ma seegayo, wuxuuna ka gubayaa intuu ka haleelay, mase dilayo." Al Xasan-na waxaa laga wariyay inuu yiri: "Wuxuu

haleelayaa si ilbiriqsi iyo dhakhsiiyo badan." Ibnu Salaam wuxuu kaloo tafsiirkiisa uga wariyay Qataadah in isagoo rag kale la jooga xiddig la ganay, oo uu markaas yiri: "Aaraggiinna ha raacinnina". Wuxuu kaloo tafsiirkiisaas uga wariyay Xafs inuu Al Xasan weydiiyey: "Xiddigaha aragga ma raacinnaa, waana intuu jinniga kusii socdo?" Markaasuu wuxuu yiri: "Subxaanahu wuxuu yiri: **"Wa jacalnaahaa rujuuman lilsh--shayaadhiini**(5)**",** waana Aayadda shanaad ee Suuratu Al Mulki oo macneheedu uu yahay: "Wuxuuna ka dhigay xiddigahaas kuwa lagu gano shayaadhiinta(5)." Wuxuu kaloo Cazza wa Jalla yiri: **"Awalam yanthuruu fii malakuuti al Ssamaawaati wa al ardi**(185)**",** oo ah Aayadda boqol iyo shan iyo sideetan ee Suuratu Al Acraafi oo macneheedu yahay: "Miyeeyan fiirin xukunka Samooyinka iyo dhulka?(185)". Al Xasan wuxuu yiri, kaddib markuu labadaas Aayadood akhriyay: "Sidee baan ku ogaaneynaa hadaanan dhugan? Sidaas ayaan araggeyga u raacinayaa!" Waxaa wariyay Tafaasiirta Al Dhabarii, Ibnu Kathiir iyo Al Qurdhubii.

Jinniga Quraanka dhegeystay

Waxaa xuduudka Xaramka Makkah ka mid ah **Nakhlata** oo Kacbada saddex iyo toban kiiloomitir u jirta, una dhexeysa Makkah iyo Dhaa'if, ahna barta uu degay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Dhaa'if kasoo noqday sanadka tobanaad ee Nabinnimada, oo isagoo halkaas ku tukanaya ay maqleen koox Jinni ah isagoo Quraan akhrinaya, ayna kusoo degtay Suuradda Qul Uuxiya ama Suuratu Al Jinni, siduu Al Bukhaarii u wariyay (fiiri Fatxu Al Baarii mujalladka sideedaad bogga lix boqol iyo afar iyo toddobaatan) iyo Xadiithka afar kun iyo sagaal boqol iyo kow iyo labaatanba. Jinnigaas Nakhlah Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu yimid waxay ahaayeen jiiniga Nasiibiin (waa saad). Nasiibiin waa magaalo ilaa maantadaan Waqooyiga dalka Ciraaq ku taalla, galbeedna ka xigta magaalada Niinawaa oo ah magaalada Nabi Yuunus loo diray, iyo magaalada Al Muusal oo labadooduba ay saaran yihiin wabiga Dijlah. Nasiibiin waxay saaran tahay wabiga la yiraahdo Al Khaabuur oo ah laan ka mid ah wabiga Furaat, siduu ugu masawiray Dr. Shawqii abuu Khaliil kitaabkiisa Adhlasu Al Siirati Al Nabawiyyati. Jinnigaasu waxay u socdeen Yaman, markaasey ayagoo safarkoodaas ku jirah waxay soo mareen barta la yiraahdo Nakhlah, waxayna ahaayeen toddoba nin, oo yuhuud ahaa, ayagoo ku taagan shareecadii Muuse, magacdooduna waxay ahaayeen (1) **Shaasir** (waa saad), iyo (2) **Maasir** (waa saad), iyo (3) **Manshaa,** iyo (4) **Laashaa,** iyo (5) **Al Axqaab,** iyo (6) **Surraq,** iyo (7) **Camr bin Jaabir.** Cumar bin Cabdul Caziiz, Allaha raalli ka noqdee, ayaa la wariyay in isagoo meel lama degaan ah maraya uu arkay abeeso mayd ah. Markaasuu go'iisa qaar ka gooyey oo uu intuu ku kafnay duugay. Markaasuu wuxuu maqlay mid oranaya: "Surraqow marag ka ahow! Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo kugu leh: **"Sa tamuutu bi ardi falaatin, wa yadfinuka rajalun saalixun."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaad ku dhimanaysaa arli lama degaan ah, waxaana ku duugaya nin suuban."

Markaasuu Cumar bin Cabdul Caziiz wuxuu yiri: "Kumaad adigu tahay, Allaha kuu naxariistee?" Markaasuu kii wuxuu yiri: "Waxaan ahay nin ka mid ah Jinnigii Quraanka ka maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kuwaasoo uusan ka harin cid aan aniga ahayn iyo Surraq. Surraqna waa kan oo dhintay." Cabdullaahi bin Mascuud, Allaha raalli ka noqdee, oo la socda rag asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka mid ah ayaa dabayli ku kacday, kaddibna dabayl tii hore ka xoog badan oo ka wayn. Kaddibna dabayshii way ka qaaday. Markaasey waxay arkeen abeeso mayd ah. Ibnu Mascuud wuxuu yiri: "Markaasuu nin naga mid ihi xaggeeda aaday oo uu intuu go'iisa dillaaciyay uu qaar abeesada kafan uga dhigay, uuna duugay. Markuu habeenkii dumay, oo ay gudcur noqotay, mase waa laba haween ah oo weydiinaya: "Kiinneebaa Camr bin Jaabir duugay?" Markaasaan waxaan niri: "Ma naqaanno Camr bin Jaabir qofkuu yahay." Markaasey waxay yiraahdeen: "Haddaad ajar ku dooneyseen, waad hesheen, waxaana dhacday inay kuwa faasiqiinta ah ee jinnigu la dagaallameen mu'miniintooda, markaasaa Camr la dilay, waana abeesada aad aragteen, wuxuuna ka mid yahay kuwa Quraanka ka maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kaddibna qawmkooda u digay." Nakhlata waa meesha lagu dilay gaalka ugu horreeyey Islaamka, magaciisuna ahaa Camr Al Xadramii, laguna qafaalay labadaii nin oo ugu horreysey oo Islaamka lagu qafaalo, kalana ahaa Cuthmaan bin Cabdullaahi iyo Al Xakamu bin Kaysaan, laguna ghaniimeystay ghaniimada islaamka ugu horreysey. Asxaabta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo duullaankaas ku jirayna waxay ahaayeen sideed nin oo Muhaajiriin ah uuna amiir u yahay Cabdullaahi bin Jaxsh, Allaha dhammaantood raalli ka noqdee. Nakhlah waxaa kaloo ku yiillay sanamka wayn oo ay caabudi jireen oo magaciisu ahaa Al Cuzzaa, oo uu Ilaahay, Cazza wa Jalla, Ayadda sagaal iyo tobnaad ee Suuratu Al Najmi noogu sheegay, uuna furashada Makkah kaddib Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u diray Khaalid bin Al Waliid, Allaha raalli ka noqdee, inuu dumiyo, uuna dumiyay.

Cumar bin Cabdu Al Caziiz

Amiiru Al Mu'miniina Cumar bin Cabdu Al Caziiz waa Taabici, Allaha raalli ka noqdee, waxaana dhashay Xafsah bintu Caasim bin Cumar bin Khadh-dhaab, Allaha raalli ka wada noqdee, wuxuuna Boqorka Dawladda Islaamka ahaa laba sano iyo shan bilood, inta u dhexeysey sanadka sagaal iyo sagaashan iyo boqol iyo kow ee Hijrada. Awoowihiisa xagga hooyo waa Abuu Xafs Amiiru Al Mu'miniina Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee. Awoowihiisa xagga aabena waa Amiiru Al Mu'miniina Marwaan bin Al Xakam oo boqor ahaa hal sano iyo qiyaas toban bilood inta u dhexeysey sanadka afar iyo todobaatan iyo shan iyo toddobaatan ee Hijrada, sanadkaan damboo uuba dhintay. Cumar bin Cabdu Al Caziiz waxaa lagu magacaabaa "Kan shanaad ee Khulafaa'u Al Raashidiina" oo waxaa la raaciyay Abu Bakr Al Siddiiqu iyo Cumar bin Al Khadh-dhaab

iyo Cuthmaan bin Caffaan iyo Calii bin Abii Dhaalib Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Al Thahabii wuxuu Siyaru Aclaamu Al Nubalaa'i siirada Cumar bin Cabdu Al Caziiz ku yiri: "Xarmalah wuxuu yiri: "Waxaan maqlay Al Shaaficii oo leh: "Khulafadu waa shan: Abuu Bakr, iyo Cumar, iyo Cuthmaan, iyo Calii, iyo Cumar bin Cabdu Al Caziiz. Riwaayad kalena wuxuu ku yiri: "Al Khulafaa'ud Al Raashiduuna wa shantaas."

Go'idda kuhaanada

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Ibnu Isxaaq wuxuu xusay Xadiithka ibnu Cabbaas, ayna ka mid tahay "waxaan oran jiranay markaan aragno "waxaa dhintay qof wayn" ama "waxaa dhashay qof wayn". Taasna waxaa ku sugan daliil in waxaan hore usoo sheegnay oo ah inay ganidda xiddiguhu wax fac wayn oo horreeyey uu yahay, markiise Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, lasoo diray -siduu Al Zuhriyyu u yiri- Samada ilaalinteeda lagu kordhiyay oo la adkeeyey, xiddigaha la gano. Hadalkiisana, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, ku sugan Xadiithka dhammaadkiisa oo macnihiisu yahay "maantana kuhaanadii way go'day, kuhaannimana ma jirto" wuxuu tilmaamayaa inay go'iddaas buuxda ay zamankaas ku gooni ahayd. Waxase maantadaas go'ay, go'naanayana ilaa maalinta qiyaame, waa inay shayaadhiintu gaarto waxay gaari jirtay zamanka jaahiliyada ee islaamka hortiis ahayd, oo ay awoodi jirtay inay warka Samada maqlaan. Warka maalmahaan la maqlo, oo hadalka jinniga ka mid ah, lagana maqlo carrabka dadka waalan, waa war wuxuu jinnigu ku arko arliga dhexdiisa oo aanan annagu u jeedin, sida tuug wax xaday, ama waxaas u xuday uu meel qarsoon ku qarsado, iyo wax la mid ah. Haddayse sheegaan wax mustaqbalka ahaan doona, waa malo ay iska maleynayaan oo ay markaasna in yar haleelayaan, in badanna gafayaan. Waxaas yar oo ay haleelayaan waa waxay ku wada hadlayaan malaa'igta ku jira daruuraha roobka sida, siday ugu sugnaatay Xadiithka Al Bukhaarii. Markaasaa xiddigo lagu ganaa oo lagu eryaa. Markaasey eraygay malaa'igta ka maqleen waxay ku darayaan in ka badan boqol beenood, siduu ugu yiri, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, Xadiithka nasoo maray."

Kaahinadda Al Ghaydhalatu

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "haweeney (Qurayshta) reer banii Sahm u dhalatay, lana yiraahdo Al Ghaydhalatu, ayaa waaga jaahiliyada faaliso ahaan jirtay. Markaasuu habeen habeennada ka mid ah markuu u yimid shaydhaanka saaxiibkeed ahaa, ayuu hoosteeda kusoo degay, kaddibna wuxuu yiri: "adri maa adri", oo macneheedu yahay: "maalin cirbogoyn iyo gawricid." Markuu warkaasu Quraysh gaaray waxay yiraahdeen: "muxuu leeyahay?" Markaasuu hadana habeen kale u yimid oo hoosteeda kusoo degay, kaddibna uu yiri: "shucuubun maa shucuubu? Waxaa lagu dilayaa Kacb oo dhinaca loo ridiyaa." Markuu warkaasuu Quraysh gaaray, waxay yiraahdeen: "muxuu u dan leeyahay? Amarkaanu wuu ahaanayaaye, ee bal fiiriya wuxuu yahay." Amarkaasu wuxuu yahay ma ayan ogaan jeer ay dhacdada, waa duullaankee, Badar ahaatay iyo midka dooxada Uxud.

Markaasay waxay ogaadeen wuxuu shaydaankaasi saaxiibbaddiis u keenay." Ibnu Hishaam iyo Al Suhaylii waxay yiraahdeen: "Al Ghaydhalatu waxay u dhalatay reer Banii Murrah bin Cabdu Manaat bin Kinaanah ee qabiilka Mudlij, waana Ummu Al Ghaydhalatu, midduu Abuu Dhaalib gabayadiisa ku xusay." Al Suhaylii wuxuu yiri: "shucuubun wa maa shucuubu waxaa lagu dilayaa Kacb oo dhinaca loo ridayaa waxaa weeye Kacb bin Lu'ayy, kuwa la dilay oo dhinacyadooda loo daadiyayna Maalinta Badar iyo Uxud waxay ahaayeen madaxda Quraysh oo badankoodu yihiin dhashay Kacb bin Lu'ayy. Shucuub-na waa jamaca shicb, oo ah dooxo buuro dhinocooda ah, oo lama garan waxay tiri ilaa looga dilo kuwa lagu dilay Badar iyo Uxud dooxooyinkooda." Wuxuu kaloo xusay hadal shaydhaanka raacsan oo yiri: "adri maa adri", waxaana Abii Calii laga wariyay riwaayad kale oo uu shaydaanku ku yiri: "wa maa Badr?" oo ah: "Badarna maxay tahay?", tanoo ka cad riwaayadda hore. Al Suhaylii wuxuu kaloo ibnu Isxaaq ka wariyay inuu yiri: "Faadhimah bintu Al Nnucmaanu Al Nnajaariyyah waxay lahayd shaydaan raacsan, o jinniga ka mid ah, caadadiisuna waxahy ahayd inuu markuu u yimaado uu gurigeeda xoog kusoo galo. Markaasay markay ahayd Bicthada bilowgeeda ayuu u yimid. Markaasuu wuxuu fariistay darbiga daarta korkiisa, umana uusan soo gelin. Markaasay waxay tiri: "maxaad usoo geli weyday?" Markaasuu wuxuu yiri: "waxaa lasoo diray Nabi oo xaaraantimaynta zinada lala soo diray." Taasay ahayd marka ugu horreysey oo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah lagu xuso."

Khadhar, kaahinka Banuu Lihib

Al Suhaylii wuxuu yiri: "waxa ay fashay Thaqiif wax la mid ahna waxaa ayaguna faleen Banuu Lihib, markay ka naxeen xiddigaha la ganayo. Markaasay waxay isugu yimaadeen faaliye ayaga ka dhashay oo la yiraahdo Khadhar agtiisa. Markaasuu arrinka u caddeeyey iyo waxa ka ahaaday amarka Nabinnimada. Abuu Jacfar Al Caqiilii wuxuu Kitaabka Saxaabada ku wariyay nin u dhashay reer Banii Lihb, oo la yirahdo Lihbun ama Luhaybun, oo yiri: "waxaan la joogay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markaasaan waxaan xusay kuhaanada ama faalinta, waxaanna iri: "aabahay iyo hooyaday ayaan kugu furanayaaye, annagaa ugu horreyney kuwa aqoonsada ilaalinta Samada iyo eryidda shayaadiinta iyo ka reebiddooda inay maqalka wax kusoo xadaan marka xiddigaha lagu ganay. Taasina waxay ku ahaatay inaan isugu nimid kaahin aan lahayn oo la yiraahdo Khadhar bin Maalik agtiisa, ahaana oday da' wayn, jirsadayna laba boqol iyo sideetan sano, isagaana kuhaanteenna ugu cilmi badnaa. Markaasaan waxaan niri: "Khadharow! Cilmi ma u leedahay xiddigahaan la ganayo, taasoo annaguna aan ka baqnay, aanna ka baqannay cirib xumideeda?" Markaasuu wuxuu gabay ku yiri:

1. Berrito waqtiga suxuurta ii kaalaya.
2. Markaasaan warka idiin sheegayaa.
3. Inuu khayr yahay ama dhibaato.
4. Uuna yahay amni ama khatar.

Wuxuu yiri: "markaasaan ka gaddoonnay maalinteennaas. Markay maalinta taas ku xigtay ahayd , aroortii waqtiga suxuurta ayaan u nimid. Mase waaba isagoo soo jeeda oo labadiisa cagood ku taagan, Samadana kor u fiirinaya. Markaasaan u yeernay oo niri: "arrinku ma khatarbaa Khadharow?" Markaasuu madaxa noogu tilmaamay: "aamusa." Markaasaa waxaa kasoo hoobtay xiddig weyn Samada, oo uu markaas kaahinku qayliyay, oo uu tiriyay gabay uu ku sheegayo inuu xiddiggu shaydaanka ku dhacay oo uu haleelay, wuxuuna yiri:

1. Yaa macshara Banii Qaxdhaani
   ukhbirukum bi al xaqqi wa al bayaani.
2. Aqsamtu bin Al Kacbati wa Al Arkaani
   wa Al Baladi Al Mu'tamini Al Ssuldaani.
3. Laqad munica al ssamca cutaatu al jaani
   bi thiqaabin bin kaffi Thii Suldhaani.
4. Min ajli Mabcuuthin Cathiimi Al Shaani
   yubcathu bin Al Tanziili wa Al Quraani.
5. Wa bi al hudaa waa faasili Al Quraani
   tabdhulu bihi cubaadatu al awthaani.

Gabayga macnihiisu waxaa weeye:

1. Ragga ah dhasha Qaxdhaanow
   waxaan idiin sheegayaa runta oo cad.
2. Waxaan ku dhaartay Kacbada iyo Arkaanteedee
   iyo Beledka Aaaminka ah oo loo adeego.
3. Waxaa dhegeysiga laga reebay jinniga kuwiisa xad gudbay
   laguna reebay dab ololaya oo Mid suldaan ah Gacantiisa ku jira.
4. Waxaana loo reebay sababta mid lala soo diri doono arrin wayn
   lalana soo dirayo mid lasoo dejiyay iyo Quraanka.
5. Iyo hanuun iyo Quraanka kala saariddiisa
   waxaa ku buraya caabudidda asnaamta.

Wuxuu yiri: "markaasaan waxaan iri: "War is ilaali, oo maxaad leedahay! Khadharow, waxaad sheegeysaa amar wayn. Marka, maxaad kula talineysaa tolkaa?" Markaasuu wuxuu yiri:

1. Araa li qawmii maa araa li nafsii
   an yatbacuu khayra Nabiyyi al insi.
2. Burhaanuhu mithlu shucaaci al shamsi
   yubcathu fii Makkata daari al Xumsi.
3. Bi muxkami Al Tanziili ghayra allabsi.

Tixaha macnohoosu waxaa weey:

1. Waxaan tolkey u arkaa waxaan nafteyda u arko
   oo ah inay raacaan midka ugu khayr badan Nabiyada insiga.
2. Burhaantiisu waxay la mid tahay kaaha shucaaca qorraxda oo kale
   waxaana laga soo dirayaa Makkah, dalka Xumusta.
3. Lalana soo dirayaa Quraanka oo aan shaki iyo isku qasid lahayn.

Markaasaan waxaan ku niri: "Yuuna isagu u dhashay?" Markaasuu wuxuu

yiri: "Waxaan ku dhaartay nolosha iyo cayshka, wuxuu u dhashay Quraysh, isagana turiddiisa iyo dulqaadkiisa kuma jirto leexasho, abuuristiisana kuma jirto wax xun, wuxuuna hoggaaminayaa ciidan, waana ciidan wayn, kana kooban ubadka Qaxdhaan (oo ah Ansaarta Al Madiinah Al Munawwarah oo Qaxdhaan ku abtirsada iyo Muhaajiriinta oo ayaguna Carab ah) iyo ubadka Aysh (oo ah qabiil jinniga mu'miniinta ah ka mid ah, oo ku abtirsada midka la yiraahdo Aysh)." Markaasaan waxaan ku iri: "Noo sii caddee, oo Qurayshteebuu ka dhashay?" Markaasuu wuxuu yiri: "Waxaan ku dhaartay Baytka Arkaanta (tiiirarka) leh iyo Xajaru Aswadka iyo biyaha Zamzam ee wuxuu ka mid yahay wiilasha Haashim, kuwaasoo tol kariimiin ah, waxaana lala soo dirayaa dagaallo waaweyn iyo dilidda mid kastoo daallin ah." Kaddibna wuxuu yiri: "Taas weeye caddeyntu, waxaana ii sheegay madaxweynaha jinniga." Kaddibna wuxuu yiri: "Allaahu Akbaru, Xaqqa ayaa yimid (waa runtee) oo soo bannaan baxay, jinnigana waxaa ka go'ay warkii." Kaddibna wuu aamusay, wuuna gam'ay sida isagoo suuxay oo kale. Soomana uusan kicin saddex habeen kaddib mooyee, markaasuu wuxuu yiri: **"Laa ilaaha illaa Allaahu."** Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri**: "La qad nadhaqa can mithli Nubuwwatin, wa innahu la yubcathu yawma al qiyaamati ummatun waxdahu"**, oo Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "wuxuu ku hadlay warka Nabinnimada oo kale, waxaana lasoo saarayaa maalinta qiyaame isagoo ummad ah keligiis." Waxaa wariyay ibnu Xajar, kuna wariyay Al Isaabah, mujalladka saddexaad bogga saddex boqol kow iyo toddobaatan.

Kaahinka qabiilka Janb

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Qabiilka la yiraahdo Janb oo reer Yaman ah ayaa zamanka jaahiliyada waxay lahaayeen kaahin. Markaasaa marka la sheegay warka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo uu warkiisu Carabta dhexddeeda ku faafay, ayay Janb waxay kaahinkooda ku tiri: "Nooga faalli arrinka ninkaan", waxayna isugu yimaadeen salka buurta uu dusheeda degganaa. Markaasuu wuxuu usoo degay markay qorraxdu soo baxday. Markaasuu la istaagay isagoo qaansadiisa ku tiirsan, oo uu madaxiisa Samada kor ugu qaaday oo uu in dheer kor u fiirinayey. Markaasuu booday, kaddibna uu yiri: "Dadow, Ilaahay Muxammad wuu karaameeyey, wuuna doortay, wuuna daahiriyay qalbigiisa iyo uurkutaashiisaba. Intuu dhexdiinna joogana, dadow, way yartahay." Markaasuu buurtiisa xoog dib ugu cararay, kuna noqday meeshuu ka yimid."

Cumar iyo Sawaad bin Qaarib Al Dawsiyyi

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Cumar bin Al Khadh-dhaab ayaa isagoo Masjidka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhex fadhiya, ayaa waxaa masjidka soo galay nin Carab ah oo Cumar bin Al Khadh-dhaab doonaya. Markaasuu Cumar, Allaha raalli ka noqdee, markuu ninkaas arkay, ayu wuxuu yiri: "Ninkaanu wuxuu ku taagan yahay gaalnimadiisii, oo weli kama uusan tegin, ama zamanka jaahiliyada wuxuu

ahaan jiray kaahin." Markaasuu ninku Cumar salaamay, kaddibna uu fariistay. Markaasuu Cumar, Allaha raalli ka noqdee, wuxuu ninka ku yiri: "Ma islaantay?" Markaasuu ninku wuxuu yiri: "Subxaana Allaahi Mu'miniinta Amiirkoodow! Xumaan ayaad igu tuhuntay, waxaadna iagala hortimid arrin aanan arag inaad axad raaciyadaada ka mid ah aadan ku oran tan iyo inta lagu saaray xilkaad qaadday." Markaasuu Cumar wuxuu yiri: "Allaahumma ghafran (oo ah Ilaahayow ii dambi dhaaf)! Zamanka jaahiliyada waxaan ku taagnayn wax middaan ka shar badan, oo asnaamtaan caabudi jimay, asnaamta ayaanna luqunta luqunta u gelin jimay, ilaa uu Ilaahay nagu karaameeyey Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Islaamka." Wuxuu yiri: "Haa, oo Wa Allaaahi, mu'miniinta Amiirkoodow, waxaa hubaal ah inaan kaahin faaliya ahaan jiray zamanka jaahiliyada." Markaasu Cumar wuxuu ku yiri: "iiga warran hadaba, wuxuu saaxiibkaagu (jinniga ah) kuu keenay." Ninku wuxuu yiri: "wuxuu ii yimid islaamka hortiis bil ama in bil wax yar ka yar, wuxuuna yiri: "so ma aadan arag jinniga iyo siday u wareersan yihiin, iyo siday diintooduna ay tahay quusasho iyo khayr laga samro, ayna ku dheggan yihiin reeryada awrtooda saaran?" Markaasuu Cumar bin Al Khadh-dhaab wuxuu yiri, isagoo dadka u warramaya: "WaAllaahi, anigoo ag jooga sanam asnaamtii jaahiliyada ka mid ah, ayna ila joogaan rag Quraysh ah, uuna nin Carab ahi sanamkaas dibi u gawracay, annaguna aan dhawraynno inuu hilbihiisa uu annagana qayb naga siiyo, ayaan uurka dibiga waxaan ka maqlay cod aanan hore u maqal cod ka dheer oo dhegaha ka geli og. Taasina waxay ahayd bil ama in bil xoogaa ka yar islaamka hortiis. Codkaasuna wuxuu leeyahay: "Thariixow, waa amar lagu libaano oo ahaaday, ahna nin la qaylinaya oo leh **"laa ilaaha illaa Allaahu**", siduu isaguna u wariyay Al Bukhaarii, Kitaabka Manaaqibta Ansaarta, Xadiithka saddex kun iyo sideed boqol iyo lix iyo lixdan. Ibnu Hishaamna wuxuu yiri: "waxaa la yiraahdaa inuu codkaasi lahaa "nin ku qaylinaya carrab iyo hadal faseex ah oo cad, lehna: **"Laa ilaaha illaa Allaahu."** Al Suhaylii wuxuu yiri: "codka uu Cumar dibiga ka maqlay oo ah "Yaa Jaliix", waxaan maqlay mid shuyuukhdeenna ka mid ah oo leh: "waa magaca shaydhaan". Siirada wuxuu ku yiri: "Yaariix", waxaadna mooddaa in loo dhawaaqayo dibiga la gawracay, ayadoo la yiraahdo axmarun thariixun, oo macneheedu yahay guduud badan, oo dhiigga la guduutay. Kan "Yaa Jaliixu" wariyayna wuxuu ula dan leeyahay isla dibiga la gawracay, ayadoo dibiga la gawracay, oo julixa macneheedu waxaa weeye "haragga ayaa laga siibay". Wa Allaahu aclamu." Ninkaan kaahinka ahaan jirayna magaciisu waa Sawaad bin Qaarib Al Dawsiyyi, siduu ibnu Al Kalbii u yiri. Ghayrkiisna waxay yiraahdeen wuxuu u dhashay qabiilka Saduus."

Riwaayada Al Suhaylii ee Xadiithka Cumar iyo Sawaad

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Xadiithkaan Cumar waxaa kaloo wariyay ibnu Isxaaq ghayrkiis, una wariy si sidaan ka duwan, oo ah inuu Cumar ninka la kaftamay, uuna ku yiri: "Sawaadow, maxay ku dambeysey kaahinnimadaadii?" Markaasuu Sawaad carooday, wuxuuna yiri: "aniga

iyo adigu waxaan ku sugnaan jirnay mid taas ka shar badan, oo ah caabudidda asnaamta iyo cunidda bakhtiqa xoolaha dhintay. Marka, ma waxaad igu ceebeyneysaa arrin aan ka tawbad keenay?" Markaasuu Cumar wuxuu yiri: "Allaahumma ghafran!", oo ah "Ilaahayow dambigayga dhaaf". Ibnu Isxaaq ghayrkiisna wuxuu Xadiithkaan u wariyay si qurxoon iyo ziyaado waxtar leh, wuxuuna xusay inuu Sawaad uu Cumar u sheegay inuu jinniga raacsani uu saddex habeen oo isku xigta u yimid, isagoo saddexdoodaba ku sugan xaalad uu u dhexeeyo mid hurda iyo mid soo jeeda, uuna ku yiri: "Sawaadow kac oo istaag, hadalkaygana dhegeyso, garana haddaad caqli leedahay. Waxaa lasoo diray Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, una dhashay Lu'ayy bin Ghaalib (oo ah awoowaha sideedaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam), dadkuuna ugu yeerayaa Ilaahay iyo inay Keligiis caabudaan." Markaasuu habeen walba oo saddexdaas habeen ka mid ah ku luqeeyey oo uu ku heesay tixo isku macne ah, qaafiyadeeduse ay is khilaafsan yihiin, ahna:

1. Cajibtu lil jinni wa tadhlaabihaa
   Wa shaddihaa al ciisa bi aqtaabihaa.
2. Tahwii ilaa Makkah tabghii al hudaa
   maa saadiqu al jinna ka kath-thaabihaa.
3. Fa arxal ilaa al safwata min Haashimi
   laysa quddaamahaa ka adbaarihaa.

Tixaha macnohoodu waxaa weeye:

1. Waxaan u yaabay jinniga iyo waxay dooneyso
   Siday awrta ugu adkehynayaan kooraha.
2. Ayna Makkah ugu soo aroorayaan ayagoo hanuun doon ah
   jinniga kiisa runlowga ahi la mid ma aha beenlowgooda.
3. Marka awr usoo fuul midka ilmo Haashim laga doortay
   horteeduna la mid ma aha saynteeda.

Habeenka labaadna wuxuu ku yiri:

1. Cajibtu liljinni wa iblaasihaa
   wa shaddihaa al ciisa bi axlaasihaa.
2. Tahwii ilaa Makkah tabghii al hudaa
   maa dhaahiru al jinni ka anjaasihaa.
3. Fa arxal ilaa Al Safwati min Haashimi
   laysa thunaabaa al dhayri min ra'sihaa.

Tixaha macnohoosu waxaa weeye:

1. Waxaan u yaabay jinniga iyo quusashadiisa
   iyo inay awrta xoog ugu soo fuulaan koorohooda.
2. Ayna Makkah kusoo degato ayagoo hanuun doon ah
   jinnigana kiisa daahirka ahi la mid ma aha kiisa najaasada ah.
3. Awr usoo fuul marka kan la doortay oo ina Haashim ah
   shimbiraha dabadoodu madaxooda ka mid ma aha.

Habeenka saddexaadna wuxuu ku yiri:

1. Cajibtu lil jinni wa tanfaarihaa
wa shaddihaa al ciisa bi akwaarihaa.
2. Tahwii ilaa Makkata tabghii al hudaa
maa mu'minu al jinni ka kuffaarihaa.
3. Fa arxal ilaa Al Atqiina min Haashimi
laysa qudaamuhaa ka adbaarihaa.

Tixaha macnohoodu waxaa weeye:

1. Waxaan u yaabay jinniga iyo gaddoonkiisa
iyo siday awrta xoog ugu soo fuulayaan iyo kooreheeda.
2. Kuna soo degeysa Makkah ayagoo hanuun doon ah
jinniga mu'minka ahna la mid ma aha kaafirkooda.
3. Awr usoo fuul ee u tag midka amarka sugay oo ina Haashim ah
horteedu la mid ma aha dabadeeda.

Intaas kaddib wuxuu wariyay inuu Sawaad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid, oo uu u tiriyey gabayguu jinniga saddexda habeen oo isku xigah u tiriyey. Sidaas ayayna tilmaameysaa gabayga uu ku leeyahay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hortiisa, oo ah:

1. Ataanii naajiyyii bacda had'in wa raqdatin
wa lam yaku fiimaa qad balawtu bi kaathibii.
2. Thalaatha liyaalin qawluhu kullu laylatin
ataaka Nabiyyun min Lu'ayyi bin Ghaalibi.
3. Fa rafactu athyaala al izaari wa shammarat
biyaal cirmisu al wajnaa hujuula al sabaasibi.
4. Fa ash-hadu anna Allaaha laa shay'a ghayruhu
wa annaka ma'muunun calaa kulli ghaa'ibi.
5. Wa annaka adnaa al Murasaliina wasiilatan
ilaa Allaahi yaa bini al karaamiina al adhaayibi.
6. Fa murnaa bimaa ya'tiika min Waxyi Rabbinaa
wa in kaana fiimaa ji'ta shaybu al thawaa'ibi.
7. Wa kun lii shafiican yawma laa thuu shafaacatin
bi mughnin fatiilan can Sawaadi bin Qaaribi.

Tixahaas macnohoodu waxaa weeye:

1. Waxaa ii yimid kan ila faqa xasilid iyo hurdo kaddib
mana uusan ahayn sidaan u tajaabiyay beenlow.
2. Saddex habeen hadalkiisu habeen kasta wuxuu ahaa:
waxaa kuu yimid Nabi ka dhashay reer Lu' ayy bin Ghaalib.
3. Markaasaan darafta hoose ee hoosguntiga kor usoo qaaday oo guntiga adkeeyey
ayna hasha xoogga badani igula socotay dhul lama degaan ah.
4. Waxaanna marag ka ahay inuusan shay kale (ilaah) jirin oo aan Ilaahay ahayn
iyo in adigana laguu aaminay inta ghayb ah(maqan) oo idil.
5. Iyo inaad adigu tahay kan Mursaliinta wasiilo ahaan ugu dhow

Ilaahay, midkaaga ah dhasha kuwa kariimiinta suuban ahow.

6. Na amar marka waxa kaaga imaanaya Waxyiga Rabbigeen

haba ka mid ahaado waxaad la timid wax cirroolaha waajib ku ah (maladayda).

7. Anigana shafiic ii ahow maalin uusan midaan shafeeco lahayni

uusan liifad wax le'eg u tari karin Sawaad bin Qaarib.

Sawaad iyo qabiilkiisa Daws

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Sawaad bin Qaarib-kaan wuxuu ku leeyahay qabiilkiisa Daws dhexdiisa makaan la mahdiyo, markuu gaaray (oo ayagu waxay degaan Yaman), oofsashada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam (markaasoo ay qabaa'il Carbeedna ay Diinta Islaamka ka noqdeen, ama bixinta zakada maalkooda diideen, Sawaadna uu tolkiis ku waaninayo inay Diintooda Islaamka ku dhegganaadaan oo ay ku sugnaadaan). Markaasuu Sawaad inta istaagay wuxuu yiri: "Ragga Azdow! (oo Azd waa magaca qabiilka wayn oo ay Daws laan ka mid ah tahay) liibaanka qawm waxaa ka mid ah inay ghayrkood ku waana qaataan (oo ay waxa ku dhacay oo kale iska ilaaliyaan inayan ayaga ku dhicin), khasaaradooduna waa inayan ku waantoobin waxaan naftooda ahayn (oo ay khasaaro iyo dhibaato ku dhacaan, oo ay sidaas oo keli ah ku baraarugaan, oo ay wax ku gartaan). Ciddayan tajribadu (waayo aragnimadu) anficinna, taasi dhibaatey u geysataa. Cidduusan xaqqu deeqinna, xumaantu ma deeqdo. Maantana waxaad isku dhiibeysaan oo aad u islaameysaan sidaad iyo waxaad shalay isku dhiibteen oo aad u islaanteen. Adinkuna waxaad ogaateen inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qabtay qawm adinka (degmo ahaan) idinka fog, uuna ka adkaaday, iyo inuu guulguulay qawm adinka idinka badan, uuna cabsiiyey, adinkana idinkama ayan celin xoog cududeed iyo tiro rageed midna. Balo kasta oo soo martana raadkeedu dadkuu ku haraa. Umana habboona dadka la ibtileeyey inay ahaadaan kuwa ugu xusuus badan kuwa caafiyada qaba mooyee waxay fiyoobidu iyo caafiyadu tahay. Nabiga Ilaahayse, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu isaga kiin daayey siduu isaga kiin daayey, oo sidaasaad waxaad uga sugnaateen dibadda waxay kuwa la ibtileeyey ku sugnaayeen, aadna ku dhex jirteen waxay ku sugan yihiin kuwa caafiyada iyo fiyoobida qaba, ilaa uu khadhiibkiinna (waa afhayeenka qabiilka u hadla) iyo naqiibkiinna (oo ah wakiilka qabiilka oo idil) ay u yimaadeen Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu afhayeenkiinnu inta goobjoogta ah taladooda jeediyey, wakiilkuna uu inta goobtaas ka maqan wakiil uga ahaa. Mana aanan ogsooni, oo waxaa dhici karta inay dadka wareegto (ama meerto) ku timaaddo. Haddayna ku timaaddo badbaado waxay ku jirtaa sabirka iyo dul qaadka, taasoo uu Ilaahay jecelyahay. Marka adinkuna jeclaada." Markaasuu tolkiisu dhegeysteen oo ay hadalkiisa yeeleen.

Sawdaa'a bintu Zuhrah: kaahinadda Quraysh

Haweeneyda la yiraahdo Sawdaa'a bintu Zuhrah bin Kilaab waxay ahayd kaahinadda Quraysh. Sawdaa' a markay dhalatay oo uu aabeheed arkay

inay indheheedu midabka bulugga ah yihiin, wajigana ay ku leedahay shaamah, oo ah meel yar oo dhabanka gudahiisa hoos ugu riixan, wajigana qurxisa, ayuu wuxuu amray in ayadoo nool la duugo, ayagoo gabdhaha tilmaamahaas leh nolol duugi jiray. Markaasuu wuxuu u diray qubuuraha Al Xujuun, si halkaas loogu duugo. Markaasuu ninkii godka qodayey markuu qabriga u qoday, uuna damcay inuu ku rido oo uu ku duugo, ayuu haatif maqlay oranaya: "gabadha nolol ha ku duugin, arligana u daa". Haatif waa wax warkiisa la maqlo, muuqaalkiisase aan loo jeedin, oo sidaasey Carabtu telefoonka haatif u tiraahdaa, adigoo qofka hadalkiisana maqlaya, muuqaalkiisase aan u jeedin. Markaasuu ninku dhanka warku uga yimid u jeestay, waxna wuu arki waayey. Markaasuu dib ugu laabtay inuu gabadha duugo. Markaasuu haatifkii hadana maqlay oo erayo kale ku hadlaya, isla macnahaas-se ah inuusan gabadha duugin. Markaasuu aabeheed usoo celiyey, uuna wuxuu maqlay u sheegay. Markaasuu aabeheed wuxuu yiri: "arrin iyo mustaqbal ayey leedahay", uuna nolosha u daayey, uusanna duugin. Markaasey gabadhaasi markay weynaatay kaahinadda Quraysh noqotay. Sawdaa'a waxay maalin maalamaha ka mid ah qabiilka Quraysheed ee reer Banuu Zuhrah ku tiri: "waxaa idinku jirta haweeney nathiirad ah (digaysa) ama mid nathiir ah dhaleysa. Marka gabdhihiinna ii soo bandhiga oo ii keena." Markaasaa gabdhaha reer Banuu Zuhra loo keenay, oo loo soo bandhigay. Marekaasey gabar walba oo gabdhahaas ka mid ah wax ku tiri, waxaasoo muddo gaaban kaddib la arkay oo soo ifbaxay. Markaasaa waxaa loo keenay, oo loo soo bandhigay Aaminah bintu Wahab. Markaasey waxay tiri: "middaan weeye nathiiraddu, ama nin nathiir ah ayay dhaleysaa.", waana war dheer oo uu Al Zubayru wax yar ka wariyay, dhammaantiisana uu wariyay Abuu Bakar Al Naqqaashu. Warkaasna waxaa ku jira xusidda Jahannama -Allaha Sarreeya ha naga magan geliyee- ayadoo uusan magaca Jahannama agtooda laga aqoon (waagaas). Markaasey waxay ku yiraahdeen: "Jahannama maxay tahay?" Markaasey waxay tiri: "waxaa warkeeda idiin sheegaya nathiirkeeda (midka ka digaya)."

Arrinka jinniga Nasiibiin

Markay Ummu Al Mu'miniina Khadiijah bintu Khuwaylid haweenta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo adeerkiis Abuu Dhaalib dhinteen, ayna oofsashadooda saddex maalmood u dhexeysay, ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu aaday magaalada Al Dh-dhaa'if. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaas kaddib ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Dhaa'if kasoo dhaqaaqay isagoo xagga Makkah usoo gaddoomay, kaddib markuu qabiilka Thaqiif ka quustay. Markaasuu Markuu marayo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam tuulada la yiraahdo **Nakhah** ayuu habeen barkii hurdada kasoo kacay oo uu salaad tukaday. Markaasaa waxaa soo maray kooxda jinniga ah oo ah kuwuu Ilaahay Tabaaraka wa Tacaalaa xusay, sida la ii wariyay, waxayna ahaayeen toddoba nin oo ka mid ah jinniga Nasiibiin. Markaasey Quraankuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

akhrinayo dhegeysteen. Markaasuu markuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam salaaddiisa kasoo jeestay ayay ayaguna xagga tolkooda u gaddoomeen ayagoo u digaya, rumaynayana waxay maqleen oo islaamay. Markaasuu Ilaahay warkooda Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay, wuxuuna Cazza wa Jalla ku yiri Suuratu Al Axqaafi: "**Wa ith sarafnaa ilayka nafaran mina al jinni yastamicuuna Al Qur'aana falammaa xadaruuhu qaaluu ansituu falammaa qudiya wallaw ilaa qawmihim mmunthiriina**(29)**Qaaluu yaa qawmanaa innaa samicnaa Kitaaban unzila min bacdi Muusaa musaddiqan limaa bayna yadayhi yahdii ilaa al xaqqi wa ilaa dhariiqin mmustaqiimin**(30)**Yaa qawmanaa ajiibuu daaciya Allaahi wa aaminuu bihi yaghfir lakum mmin thunuubikum wa yujirkum mmin cathaabin aliimin**(31)**."** Aayadaha oo ah kuwa sagaal iyo labaatanaad iyo sodoon iyo kow iyo soddon ee Suuratu Al Axqaafi macnohoodu waxaa weeye: "Bal xusuuso markaan xaggaaga usoo duwnay koox jinni ah oo ay Quraanka dhegeysteen. Markaasey markay yimaadeen meesha lagu akhrinayey waxay isku yiraahdeen: "Aamusa oo dhegeysta". Markii akhrinta Quraanka la dhammeeyeyna waxay u gaddoomeen xagga tolkooda ayagoo u digaya(29)Waxayna yiraahdeen markay tolkood u tageen: "Tolkeenow annagu waxaan maqalnay Kitaab lasoo dejiyay Muuse dabadiis, rumaynayana kutubbadii isaga ka horreeyey, runtana u hanuuninaya qofka rumeeya oo raaca iyo dariiqa toosan(30)Waxayna yiraahdeen markay u tageen: "Tolkeenow yeela wuxuu idiinku yeerayo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu idiinku yeerayana rumeeya. Markaasuu Ilaahay dambiyadiinna dhaafayaa, wuxuuna idinka korinayaa cathaab xanuun badan(30)." Wuxuu kaloo Ilaahay Tacaalaa Suuratu Al Jinni ku yiri**: "Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Qul uuxiya ilayya annahu istamaca nafarun mina al jinni fa qaaluu innaa samicnaa Qur'aanan cajaban**(1)**Yahdii ilaa al rrushdi fa aamannaa bihi wa lan nushrika bi Rabbinaa axadan**(2)**Wa annahu Tacaalaa Jadduu Rabbinaa maa ittakhatha saaxibatan wa laa waladan**(3)**Wa annahu kaana yaquulu safiihunaa calaa Allaahi shadhadhan**(4)**Wa annaa thanannaa an llan taquula al insu wa al jinnu calaa Allaahi kathiban**(5)**Wa annahu kaana rijaalun mina al insi yacuuthuuna bi rijaalin mina al jinni fazaaduuhum rahaqan**(6)**Wa annahum thannuu kama thanantum an llan yabcatha Allaahu axadan**(7)**Wa annaa lamasnaa Al Ssamaa'a fawajadnaahaa muli'at xarasan shadiidan wa shuhuban**(8)**Wa annaa kunna naqcudu minhaa maqaacida lilssamci faman yastamic al aana yajid lahu shihaaban rrasadan**(9)**Wa annaa laa nadrii asharrun uriida biman fii al ardi am araada bihim Rabbuhum rashadan**(10)**Wa annaa minnaa al ssalixuuna wa minnaa duuna thaalika kunnaa dharaa'iqa qidadan**(11)**Wa annaa thanannaa an llan nucjiza Allaaha fii al ardi wa lan nnucjizahu haraban**(12)**Wa annaa lammaa samicnaa al hudaa aamannaa bihi faman yu'min biRabbihi falaa yakhaafu bakhsan walaa rahaqan**(13)**Wa annaa**

minnaa al muslimuuna wa minnaa al qaasidhuuna faman aslama fa ulaa'ika taxarraw rashadan(14)**Wa ammaa al qaashidhuuna fakaanuu lijahannama xadhaban**(15)**."** Aayadahaas oo ah kow ilaa shan iyo toban ee Suuratu Al Jinni macnohoodu waxaa weeye: "Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxaad tiraahdaa Nabiyow: "Waxaa la ii waxyooday inay koox jinni ah dhegeysteen Quraanka, oo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, akhrinayo. Markaasey markay arligooda ku laabteen waxay dadkooda ku yiraahdeen: "Waxaan maqalnay Quraan balaaghadiisa iyo aftahannimadiisa lala yaabo oo cajiib ah(1)Quraankaasoo dadka ugu yeeraya sawaabta oo ah tawxiidka iyo Midnimada Ilaahay iyo iimaanka. Markaasaan rumaynnay, cibaadadana Rabbigeen axadna la wadaajin maynno(2)Rabbigeenna Wayn oo Cathiimka ahna ma yeelan oo waa ka wayn yahay inuu yeesho haweeney iyo ilmo midna(3)Keennii xumaana, oo ah Ibliis, wuxuu ahaa kan Ilaahay been ka sheega, isagoo ku tilmaamay inuu shariik iyo ilmo leeyahay(4)Annaguna waxaan u malayneynnay inuusan insiga iyo jinniguba Ilaahay been ka sheegayn, oo waxay noo sheegeen oo aan malaynennay waxay ahayd inuu Ilaahay haweeney iyo ilmo leeyahay, ilaa aan Quraanka ka maqalno(5)Waxayna ahaayeen, islaamka hortiis, rag Carab ahi markuu safar ku jiro oo uu waadi ku hoydo wuxuu sharta waadigas ka magan geli jiray jinniga meeshaas deggan ilaa uu ka waabariisto, taasoo jinniga kibir iyo xadgudub iyo dambi u siyaadisay, o rahaqan waa dambiga iyo xadgudubka(6)Waxayna jinnigu u maleeyeen, sidaad u malaysen oo kale oo ah inuusa Ilaahay geeri kadib axadna soo nooleyneyn oo uusan bacthi jirin(7)Annaguna waxaan aadnaa xagga Samada adduunkaan waxaanna aragnay inay ka buuxdo ilaalo xoog leh, oo ay malaa'ig ilaalineyso, ayna leedahay danabyo ololaya oo lagu ganayo keenna u dhowaada(8)Waxaanna ahayn kuwo Samada ka fariista fariisimo si aan wax uga dhegeysanno. Haddase kii wax dhegeysta waxaa haleelaya danabyo lagu soo ganayo(9)Annagu mana ogin inay danabyadaan la ganayo tahay shar lala doonayo dadka dhulka ku nool ama inuu Rabbigood hanuun la doonayo kay tahay(10)Annagana waxaa naga mid ah kuwo suuban oo muslimiin ah iyo kuwo aan suubanaynba oo gaalo ah, waxaanna nahay kooxo kala duwan, waana si dadkoo kale(11)Waxaanna hubsannay inaanan Ilaahay ka fakan karin arliga dhexdiisa hadduu wax nala doono, oradna ugama baxsan karno hadduu na doonayo(12)Markaan maqalnay Hanuunka, oo ah Quraanka iyo waxa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la siiyey waan rumaynay. Qofka Rabbigiis rumeeyana ka biqi mayo in camalkiisa iyo ajarkiisaba laga naaqusiyo, kana biqi mayo dulmi midna(13)Annagana waxaa naga mid ah qaar muslimiin ah , ahna kuwa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rumeeyey iyo kuwo xad gudbay oo Ilaahay shariik u yeelay. Ruuxiise islaama waa kuwa ku dadaala raadinta dariiqa xaqqa ah iyo hanuunka(14)Kuwase xadgudbay waxay ahaanayaan qoryaha jahannama lagu shido(15)."

Jinniga Quraanka dhegeystay oo islaamay

Isagoo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam bartaas ku tukanaya ayaa waxaa maqlay koox jinni ah isagoo Qur'aan akhrinaya, siday noo warisay Suuradda Qul Uuxiya ama Suuratu Al Jinni. Waxaana Xadiithka dhacdadaas noo wariyay Al Bukhaarii, sida ugu xusan Fatxu Al Baarii, mujalladka sideedaad bogga lix boqol iyo afar iyo toddobaatan iyo Xadiithka afar kun iyo sagaal boqol iyo kow iyo labaatanaadba. Jinnigaas Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, ugu yimid Nakhlah waxay ahaayeen Jinniga degmada Nasiibiin (waana saad), oo ah, siduu Al Baghawii tafsiirka Aayadda sagaal iyo labaatanaad ee Suuratu Al Axqaafi ku yiri, ashraafta iyo madaxda iyo laan dheerta jinnigoo idil oo yiri: "Marka Samada xiddigo dab ah iyo danabyo looga soo celiyay ayuu Ibliis wuxuu kala diray cidammadiisa si ay warka arrinkaas kusoo helaan. Ergada ugu horreysey oo uu dirayna waxay ka koobnayd kuwa Nasiibiin dega, kuwaasoo ah madaxda jinniga iyo hoggaamiyaashoodaba. Wuxuuna u diray gobolka Tihaamah, oo ay Makah Al Mukarramah iyo Al Madiinah Al Munawwarah ku yaalliin, Yamanna ay ka mid tahay."

Ma bannaana faalinta iyo in faaliye loo tago

Kuhaanta faaliya in loo tago oo laga wareysto mustaqbalka waxa dhici doona ma bannaana, siduu Al Bukhaarii uga wariyay Mucaawiyah bin Al Xakam: "Nabigaa waxaa loo sheegay inay rag naga mid ihi ay faaliyayaasha u tagaan, markaasuu wuxuu yiri: **"Fa laa ta'tuuhu"**, oo macneheedu yahay: " ha u tegina." Muslim wuxuu wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri**: "man ataa carraafan fa sa'alahu can shay'in lam tuqbal lahu salaatun arbaciina yawman."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "qofka u taga faaliye oo wax weydiiya la aqbali mayo, oo ajar ku heli mayo, salaad uu tukaday, afartan maalmood." Al Nawawii wuxuu isaguna ku wariyay xadiithkiisa kun lix boqol sagaal iyo lixdan ee Riyaadu Al Ssaalixiina. Ghaybka maqan Ilaahay keli ah ayaa og, qofka ka warramana been ayuu sheegay.

Al Nawawii wuxuu xadiiythkiisa kun lix boqol toddobaatan ee Riyaadu Al Ssaaxilixiina ku wariyay inuu Abuu Daauud ka wariyay Qabiisah bin Al Mukhaariq inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"al ciyaafatu, wa al dh-dhayratu, wa al dh-dharaqu mina al jibti."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "al ciyaafatu waa faalinta waxa mustaqbalka dhici doono oo la yiraahdo sidaasay ahaan doontaa. Al dh-dhayratu, waa shinbiraha oo ay Carabtu zamanka jaahiliyada islaamka ka horreysay ku faashan jireen oo intay shinbir cirka u tuuraan hadday midig u duushana ay wax fiican u qaadan jireen oo waxay doonayaan ku dhaqaaqi jireen, hadduu bidix u duulana ay kahan jireen oo waxaa ay doonayaan ka hari jireen, iyo al dh-dharqu oo ah dhagax ama quruurux lagu faaliyo, intaasoo idil waxay ka mid yihiin al al jibtu, oo ah kalimad tilaamaysa sanamka iyo saaxirka iyo kaahinka iyo waxa la midka ah siduu Al Rraazii Mukhtaaru Al Ssixaax ku yiri." Ilaahay Tacaala wuxuuba Aayadda kow iyo kontonaad ee Suuratu Al Nnisaa'i ku yiri: **"A lam tara**

ilaa allathiina uuttu nasiiban mmina al kitaabi yu'minuuna bi al jibti wa al dh-dhaaguuti(51)**"**, oo macneheedu yahay: "Bal arag kuwa nasiibka u helay in kitaab la siiyay, oo ah yuhuudda iyo krishtaanka, oo markaas hadana rumaysan oo caabudaya jibti iyo dhaaghuut oo ah asnaamta iyo wax kasta oo Ilaahay sokadiisa la caabudo(51)." Wuxuu kaloo ibnu Cabbaas ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "**mani iqtabasa cilman mina al nnujuumi, iqtabasa shucbatan mina al ssixri zaada maa zaada."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "qofka xiddigaha cilmi ka qaata wuxuu qaatay qayb sixirka ka mid ah, ha ku daro wuxuu ka daree." Wuxuu kaloo xadiithkiisa kun lix boqol shan iyo toddobaatan ibnu Cumar uga wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Laa cudwaa wa laa dhiirata"**, oo macnihiisu yahay: "ma bannaana al cudwaa, oo ah caado ay lahaan jireen islaamka hortiisa oo markay rati cadho ku dhacdo ayay geela intiisa kale ka takoori jireen si uusan cudurka ugu daaran, tasoo islaamku buriyay ayadoo uu Ilaahay cudurka soo dejiyo, oo tusaale ahaan ratigii ugu horreeyey cadhada ku riday, daaweeyana siduu ibnu Al Athiir ugu fasiray Al Nihaayah, mana bannaana faalintu."

Al Nawawii wuxuu Al Majmuuc ku wariyay, kitaabu al buyuuci, inuu Abuu Daauud ka wariyay Abuu Hurayrah inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"laa yaxillu thamanu al kalbi wa laa xulwaanu al kaahini wa laa mahru al baghyi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "xalaal ma aha lacagta ey la iibiyay laga helay, iyo lacagta la siiyo faaliyaha iyo lacagta la siiyay haweeneyda laga zinaystay." Waxaa kaloo waiyay Al Bukhaarii oo ka wariyay Abuu Abuu Mascuud Al Badrii Al Ansaarii, waana xadiithkiisa laba kun laba boqol toddoba iyo labaatan, iyo shan kun saddex boqol lix iyo afartan, lafdigiisuna waa: **"anna Rasuula Allaahi nahaa can thamani al kalbi, wa mahra al baghiyyi wa xulwaani al kaahini"**, oo macnihiisu yahay: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu reebay qiimaha eyga, iyo lacagtay qaataan haweenka zinaysta iyo lacagtay qaataan faaliyayaashu". Wuxuu kaloo ibnu Cabbaas ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"inna Allaaha ithaa xarrama calaa qawmin akla shay'in xarrama calayhim thamanahu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "hadduu Ilaahay qawm shay ka xaaraantimeeyo inay cunaan, wuxuu kaloo ka xaaraantimeeyaa lacagta laga helo, oo ah qiimihiisa." Waxaana wariyay Abuu Daauud, kuna wariyay kitaabu al buyuuci.

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, jinnigana waa loo diray

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa loo diray jinniga iyo insigaba. Ilaahay Tacaalaa wuxuu Suuratu Al Axqaafi ku yiri: "**Wa ith sarafnaa ilayka nafaran mina al jinni yastamicuuna Al Qur'aana falammaa xadaruuhu qaaluu ansituu falammaa qudiya wallaw ilaa qawmihim mmunthiriina**(29)**Qaaluu yaa qawmanaa innaa samicnaa Kitaaban unzila min bacdi Muusaa musaddiqan limaa**

bayna yadayhi yahdii ilaa al xaqqi wa ilaa dhariiqin mmustaqiimin(30)**Yaa qawmanaa ajiibuu daaciya Allaahi wa aaminuu bihi yaghfir lakum mmin thunuubikum wa yujirkum mmin cathaabin aliimin**(31)**."** Aayadaha oo ah kuwa sagaal iyo labaatanaad, sodoon iyo kow iyo soddon ee Suuratu Al Axqaafi macnohoodu waxaa weeye: "Bal xusuuso markaan xaggaaga usoo duwnay koox jinni ah oo ay Quraanka dhegeysteen. Markaasey markay yimaadeen meesha lagu akhrinayey waxay isku yiraahdeen: "Aamusa oo dhegeysta". Markii akhrinta Quraanka la dhammeeyeyna waxay u gaddoomeen xagga tolkooda ayagoo u digaya(29) Waxayna yiraahdeen markay tolkood u tageen: "Tolkeenow annagu waxaan maqalnay Kitaab lasoo dejiyay Muuse dabadiis, rumaynayana kutubbadii isaga ka horreeyey, runtana u hanuuninaya qofka rumeeya oo raaca iyo dariiqa toosan(30)Waxayna yiraahdeen markay u tageen: "Tolkeenow yeela wuxuu idiinku yeerayo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu idiinku yeerayana rumeeya. Markaasuu Ilaahay dambiyadiinna dhaafayaa, wuxuuna idinka korinayaa cathaab xanuun badan(31)." Al Baghawii wuxuu yiri: "jamaaco waxay tiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa la amray inuu jinniga u digo, uuna Ilaahay xaggiisa ugu yeero, Quraanna uu ku dul akhriyo. Markaasuu xaggiisa usoo duway rag jinni ah oo ah kuwa dega arliga Niinawaa, uuna u kulmiyay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"innii umirtu an aqra'a calaa al jinni al llaylata, fa ayyukum yattabicunii?"** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "aniga waxaa la igu amray inaan caawa jinniga Quraan ku dul akhriyo, ee kiinnee baa i raacaya?" Markaasay aamuseen. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar labaad weydiiyay kooda raacaya. Markaasay aamuseen. Markaasuu mar saddexaad Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam weydiiyay kooda raacaya. Markaasay aamuseen. Markaasaa waxaa raacay Cabdu Allaahi bin Mascuud. Cabdu Allaahi wuxuu yiri: "umana uusan raacin oo lama joogin, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aniga ghayrkay. Markaasaan dhaqaaqnay oo markaan Makkah tagnay ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu galay ban la yiraahdo shicbu al xajuun, oo uu markaas halkaas diillin (goobaabin) ah dhulka iigu jeexay, kaddibna uu i amray inaan dhexdeeda fariisto, wuxuuna yiri: **"laa takhruj minhu xattaa acuuda ilayka"**, oo macnihiisu yahay: "diillintaas dhexdeeda ha kasoo bixin jeer aan kaaga soo laabto." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dhaqaaqay oo uu socday ilaa uu ka istaago, oo uu markaas Quraanka akhriyay. Markaasaan waxaan arkay muqaallo u eg gorgorka oo soo deganaysa, waxaanna maqlay codad xoog badan ilaa aanba Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u baqay, oo waxaaba daboolay madow xoog badan oo aniga iyo isaga na kala dhex galay, oo aan codkiisaba maqli waayay. Markaas kaddib ayay kala googo'een, una kala tageen sida daruuraha oo kale. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu kasoo jeestay waabariga, oo uu xaggayga soo aaday oo u ii yimid, yirina: **"a nimta?"** oo macnihiisu yahay: "ma seexatay?"

Waxaan iri: "maya wa Allaahi Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaanba ku sigtay intaasoo goor inaan dadka ka gargaar dalbo, ilaa aan ka maqlay adigoo ushaada ku garaacaya oo leh: **''ajlisuu''**, oo ah: "fariista." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **''law kharajta lam aamin calayka an yatakhadh-dhafuka bacduhum''**, o macnihiisu yahay: " haddaad diillinta kasoo bixi lahayd kama aanan amni heli lahayn inay qaarkood ku dafaan", kaddibna wuxuu yiri: **''hal ra'ayta shay'an?''** oo macnihiisu yahay: "wax ma aragtay?" Waxaa iri: "haa Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo waxaan arkay rag madmadow o dhar cadcad guntan." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **''uulaa'ika jinnu Nasiibiin, sa'aluunii al mataaca, wa al mataacu al zaadu. Fa mattactuhum bi kulli cathamin xaa'ilin wa rawthatin wa bacratin. Fa qaaluu: ''Yaa Rasuula Allaahi taqthiruhaa al nnaasu.''** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "kuwaasu waa jinniga Nasiibiin, waxayna i waydiisteen cunnadooda, waxaanna cunno uga dhigay laf kasta oo is haysata iyo saalada iyo digada geela, lo'da iyo ariga." Markaasay waxay yiraahdeen: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dadkaa wasakheeya." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dadka ka reebay inay ku istinjoodaan, oo ay xaarka isaga tiraan, lafaha iyo saaladaba." Markaasaan waxaan iri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kuwaasu maxayna tarayaan?" Wuxuu Sallaa Allaahu calayhi Wasallam yiri: **''innahum laa yajiduuna cathaman illaa wajaduu calayhi laxmahu yawma uklihi, wa laa rawthatan illaa wajaduu fiihaa xabbahaa yawma ukilat.''** Xadiithka macnihiisu waxaa weeyey: "laftay helaanba waxay korkeeda ka helayaan hilibka ku yiillay korkeeda maalinta la cunay. Mana helayaan saalo iyo digaba ee waxay helayaan ayadoo ay ku yaallaan badarkii ku yiillay maalinta la cunay." Waxaan iri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan maqlay cod xoog badan ee muxuu ahaa?" Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri: **''inna al jinna tadaara'at fii qatiilin qutila baynahum, fa taxaakamuu ilayya fa qadaytu baynahum bi al xaqqi.''** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: " waxay jinnigu isku qabsadeen qof ay iska dileen, markaasay iga codsadeen inaan kala xukumo, markaasaan ugu garsooray si xaq iyo caddaaladi ku jirto." Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu xaaray, oo intuu markaas ii soo noqday ayuu wuxuu yiri: **''hal macaka maa'?''** oo macnihiisu yahay: "biyo ma wadataa?" Waxaan iri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan wataa weel ay ku jiraan xoogaa biyo ah oo timir lagu miiray." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam keen igu yiri, oo aan gacantiisa ku shubay, uuna weysaystay, kaddibna uu yiri: **''tamratun dhayyibatun wa maa'un dhahuurun''**, oo macnihiisu yahay: "waa timir xalaal ah oo wanaagsan iyo biyo daahir ah."

Xadiithka Calii, Calayhissalaamu

Waxay ibnu Jariir iyo ibnu Kathiir Calii bin Abii Dhaalib, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyeen inuu yiri markuu fasirayey Aayadda kow iyo sideetanaad ee Suuratu Aali Cimraana oo oranaysa: **"Wa ith akhatha Allaahu miithaaqa al Nnabiyyiina lamaa aataytukum min kitaabin wa xikmatin thumma jaa'akum Rasuulun musaddiqun limaa macakum la tu'minunna bihi wa la tansurannahu qaala a'aqrartum wa akhaththum calaa thaalikum isrii qaaluu aqrarnaa qaala fa ash-haduu wa anaa macakum mina al sh-ahaahidiina**(81)**",** oo macneheedu yahay: "Xusuuso markuu ka qaaday Ilaahay ballan adag Nabiyada waxaan idin siiyo oo kitaab iyo xikmo ah markaas uu idiin yimaado Rasuul rumaynaya una gargaartaan, kuna yiri: "Ma qirteen oo ma qaadeen arrintaas ballankayga ah oo ay yiraabdeen waan qirnay (oggolaannay) markaas ku yiri marag ka noqda, Anna la jirkiinna ayaan ka mid noqonayaa kuwa marag kacaya(81)", inuu yiri: "Ilaahay Nabi ma dirin, laga bilaabo Aadan iyo inta ka dambeysayba ee waa illaa kan ka qaaday cahdi iyo ballan adag oo ku saabsan Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, in haddii la soo diro ayagoo nool uu midka nolol kusoo gaara oo ayaga ka mid ihi uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rumaynayo oo uu u gargaarayo, ayna tahay inuu cahdigaasoo kale dadkiisa loo dirayna uga qaado." Xadiithkaas oo kalena waxaa kaloo laga wariyay ibnu Cabbaas , siduu tafsiirkiisa ugu xusay Al Cimaadu Al Xaafithu Ismaaciil bin Cumar ibnu Kathiir Al Qaysii Al Muftii Al Muxaddith, oo dhintay sanadka toddoba boqol iyo afar iyo toddobaatanka Hijriga. Sidoo kale waxaa wariyay ibnu Casaakir iyo Al Baghawii. Al Shaykhu Taqiyyu Al Diini Al Subkii wuxuu yiri: "Aayaddaan shariifka ah ee kow iyo sideetanaad ee Suuratu Aali Cimraana (oo aan kor kusoo xusnay) waxaa ku sugan dareen la is dareensiinayo oo la is tusayo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo waynayn qadarkiisa sarreeya oo aan la qarin karin la waynaynayo. Waxaa kaloona ku sugan in la qadaray inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yimaado oo la soo diro zamankooda isagoo ayaga loo soo diray, oo ay Risaaladiisa iyo Nabinnimadiisu ku ahaato mid caam ah oo guud oo saamaysa khalqiga oo idil min Aadan ilaa maalinta qiyaame, ayna Anbiyada iyo ummadahoodu ay ummaddiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka mid ahaadaan. Sidaas ayuuna hadalkiisa uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri oo ahaa **"Wa bucithtu ilaa al nnaasi kaafatan"** oo macnihiisu yahay "Waxaana la ii diray dadka dhammaantood (Carab, cajam, madow, guduud, iwm)", ayna wariyeen Al Bukhaarii iyo Muslim, wuxuu noqonayaa mid aan ku koobnayn oo keli ah dadka jiray laga bilaabo isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, zamankiisa ilaa yawmul qiyaamaha, ee balse wuxuu koobaya kuwa ayagana ka horeeyey. Muslim riwaayad uu wariyay wuxuuba Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: **"llaa al kha1qi kaafatan",** oo macneheedu yahay: "Waxaa la ii diray khalqiga dhammaantiis", oo ah inta Ilaahay, Cazza wa Jalla, kasoo

haratah, oo uu Isagu abuuray. Eraygaasna wuxuu koobayaa insiga, jinniga iyo malaa'igtaba.

Intaas aan soo sheegnay, oo ah inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Nabi yahay oo ay waagaas horreysey Nabinnimo u sugnaatay, oo Anbiyada kalena cahdi iyo ballan looga qaaday inay rumeeyaan oo raacaan, iyo in arwaaxda la abuuray ka hor intaan jirarka la abuurin, ayaa waxay macneyneysaa hadalkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu yiri oo ah **"kuntu Nabiyyan waa Aadamu bayna al ruuxi wa al jasadi",** oo macneheedu yahay "Waxaan ahaa Nabi ayadoo uu Aadan ku sugan yahay xaalad u dhexeysa ruuxa iyo jirka. Taas macneheedu waxaa weeye inay xaqiiqadiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ay Nabinnimo u sugnaatay oo ay la muuqatay ka hor intaan Aadan la abuurin, oo uusan ruuxiisu jirkiisa dhex gelin. Marka haddaad taas ogaatay oo aad garatay, waxaad ogaatay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yahay Nabiga Anbiyada , oo ayagoo idilna loo diray, ayagoo ayaguna Nabinnimadooda ku sugan. Taas ayaana u sabab ah inay maalinta qiyaame Anbiyadoo idili calankiisa hoostiisa ku sugan yihiin, siduuba isagu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu yiri Xadiithka uu Axmad ka wariyay Anas: **"Wa bi yadii liwaa'u Al Xamdi Aadama fa man duunahu taxta liwaa'ii".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Gacantaydana waxaa ku jira Calanka Xamdiga, Aadan iyo inta ka sokeysana waxay yihiiin calankayga hoostiisa." Adduunkaanna waa sidaasoo kale, oo habeenka la dheelmiyay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu tujiyay oo uu imaam u noqday Anbiyada. Hadduu imaatinkiisa adduunkaanna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waafiqi lahaa oo uu ku beegnaan lahaa zamanka Aadan iyo Nuux iyo Ibraahiim iyo Muuse iyo Ciise, Calayhimussalaamu, waxaa dhammaantood waajib ku ahaan lahaa inay isaga rumeeyaan oo ay u garggaraan. Sidaas ayaana cahdiga iyo ballanka iyo xarigga adag looga qaaday,

Shaydaanka iyo heshiiska Al Caqabah

Kacab bin Maalik wuxuu yiri: "Markaan kasoo jeesannay heshiiska Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waana heshiiska labaad ee Al Caqabah, ayuu shaydaanku wuxuu kula qayliyay jiirta dusheeda codka ugu dheer oo aan weligayba maqlay, wuxuuna yiri: "Dadka degmooyinka Mina degganow, ogaada inuu Muthammam (uuna ka wado Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Qurayshna waxay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu yeeri jirtay Muthammam oo ay ku caayi jireen. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu oran jiray: **"Alaa tacjabuuna limaa yasrifu Allaahu cannii athaa Qurayshin, yasubbuuna wa yahjuuna Muthammaman, wa anaa Muxammadun"** oo macnihiisu yahay: "Soo lama yaabtaan siduu Ilaahay dhibka Quraysh iiga duway? Waxay caayayaan oo ay habaarayaan nin la yiraahdo Muthammam, aniguna waxaan ahay Muxammad." Muthammam macnihiisu waxaa weeye "Kan la eedeeyo oo dulliga ah", Muxammadna

waa "Kan lagu xamdiyo oo la wada mahdiyo.") iyo kuwa diintooda ka leexday oo la jira ay xarbigiinna ku heshiiyeen." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Haathaa Azabbu Al Caqabah, haathaa ibnu Azbab"**, oo macnihiisu yahay: "Kani waa shaydaanka la yiraahdo Azabbu Al Caqabah, waana midkuu dhalay Azbab." Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Ibnu Azyab, istamic ay caduwwa Allaahi, amaa wa Allaahi la afrighanna laka"**, oo macnihiisu yahay: "waa Ibnu Azyab, ee i dhegeyso cadawga Ilaahayow, oo wa Allaahi waan kuu soo jeesanayaa." Waxaana Xadiithka wariyay Axmad.

Al Suhaylii wuxu yiri: "Abuu Al Ash-hab wuxuu Al Xasan ka wariyay inuu yiri: "Marka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Mina heshiiska lagula galay, ayuu shaydaanku qayliyey. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Haathaa Abuu Lubaynaa, qad anthara bikum, fa tafarraquu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Kani waa Lubaynaa aabeheed, oo dadka xaalkiinna uga digay ee kala taga." Lubaynaa waa gabarta magaceedu yahay Lubnaa oo la yareeyey, waana gabadha uu Ibliis dhalay."

Afarta qaylo ee Ibliis Allaha lacnadee

Al Suhaylii wuxuu ka wariyay Baqiyyi bin Mukhlad inuu tafsiirkfisa ku wariyay inuu Ibliis -Allaha lacnadee- uu afar goor qayliyay (ranna arbaca rannaatin, waana qaylada sanka laga dhawaaqo): (Kow) Qaylo rnarka la lacnaday, (Labo) Qaylo marka arligaan loo soo dejiyay, (Saddex) Qaylana maalintuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dhashay iyo (Afar) Qaylo marka Suuratu Al Faatixah la soo dejiyay.

Jinnigu dadkuu dhex galaa

Jinnigu wuxuu dhex geli karaa banii aadanka, oo uu dhexdiisa degaa oo ka hadlaa, oo uu markaas qofkuu galo waalanayaa, waxaana u daliil ah Aayadda laba boqol shan iyo toddobaatan ee Suuratu Al Baqarah: **"Allathiina ya'kuluuna al rribaa laa yaquumuuna illaa kamaa yaquumu allathii yatakhabbadhahu al sh-shaydhaani mina al massi**(275)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "kuwa ribada cuna qubuurtooda uga soo bixi mayaan maalinta qiyaame ma ahane siduu usoo kaco kuwa dhacdacaya oo uu shaydaan legdayo oo waalan, oo siduu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu soo arkay habeenka la dheelmiyay uuna noo sheegay: **"kullu rajulin minhum badhnuhu mithla al bayti al dakhmi"** oo macnihiisu yahay: "nin walboo ka mid ahna calooshiisu waxay la mid tahay guri wayn", oo uusan taas daraadeed si fiican ugu istaagi karinba (275)."Kitaabka axkaamu al jaanni wuxuu Imaam Axmad, Abuu Dauudd iyo Al Dhabraanii ka wariyay xadiithka Ummu Abaan bintu Al Waazic inuu aabeheed yiri: "awooweheed ayaa wuxuu ula tegey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wiil uu dhalay oo waalan, ama wiil ay walaashiis dhashay, wuxuuna yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan wadaa wiil aan anigu dhalay, ama ay walashay dhashay oo waalan, waxaanna

kuugu keenay inaad Ilaahay Tacaala u baridid." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"i'itinii bihi"**, oo macnihiisu yahay: "ii keen." Markaasaan u tegey wiilka oo gaadiidka meeshaan ku furnay ku sugnaa, oo aan dharka safarka ka dhigay aanna u labbisay laba go' oo qurxoon, aanna gacanta soo qabtay ilaa aan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uga keenay, oo yiri: **"adnuhu minni, wa ijcal thahrahu mimmaa yaliinii"**, oo macnihiisu yahay: "ii soo dhowee, isaga dhabarkiisana aniga i soo xiji." Markaasaan sidaas yeelay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu uga dhegay meeshay labadiisa go' isaga yimaadaan xagga kore iyo xagga hooseba, oo uu markaas dhabarkiisa garaacay ilaa heer aan caddaanta labadiisa kilkilood ka arkay, isagoo leh: **"ukhruj caduwwa Allaahi"**, oo macnihiisu yahay: "soo bax cadawga Ilaahayow." Markaasuu wiilku si fiyow wax u fiiriyay, oo aan ahayn siduu markaas ka hor wax u fiirinayay. Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu fariisiyay hortiisa, oo uu biyo ha la ii keeno yiri, oo uu markaas wajiga ka mariyay, uuna u duceeyey. Markaas kaddib markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u duceeyey kaddib, kuma uusan jirin wafdiga axad isaga ka fadli badan, oo ka fiyow." Waxaana Xadiithkaan ku sugan daliil in jinniga la garaaco, marka loo baahdo. Xadiithka Usaamah bin Zayd oo uu ibnu Casaakir ku wariyay kitaabka labaad ee Kitaabu Al Arbaciina al dhuwaali, wuxuu yiri: "waxaan la xajjinnay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xajka uu xajjiyay. Markaasaan markaan kusoo daadegannay bartamaha Al Rrawxaa' (ahna tuulo ay ku taallo ceel Al Rrawxaa' la yiraahdo oo Al Madiinah u jirta shan iyo toddobaatan kiiloomitir, xujayda Maghrib ka timaadana ay jeceshay inay biyihiisa ka cabaan) ayaa waxaa hor istaagtay haweeney sidata cunug ay dhashay. Markaasay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, salaantay isagoo hashiisa saaran oo ku socda, kaddibna waxay tiri: "kani waa wiilkayga hebel, waxaanna ku dhaartay Midka xaqqa kugu soo diray ma uusan reebin qalbigiisu hal garaacidna tan iyo goortaan dhalay ilaa saacaddaan aan joogno." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hashiisa istaajiyay, oo uu xagga dambe ee kooraha dib isugu qabtay, uuna gacantiisa u fidiyay, uuna yiri: **"haatiihi"**, oo ah "keen". Markaasay labada gacnood oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wiilkeeda saartay, oo uu kor u qaatay, uuna dhigay bartamaha kooraha uu ku fadhiyay, kaddibna uu afka dhexdiisa candhuuf uga tufay, uuna yiri: **"ukhruj yaa caduwwa Allaahi, fa innii Rasuulu Allaahi"**, oo macnihiisu yahay: "soo bax cadawga Ilaahayow, oo anigu waxaan ahay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Kaddibna hooyadiis ayuu u dhiibay, kuna yiri: **"khuthiihi falan tariina minhu shay'an takrahiinahu bacda haathaa in shaa'a Allaahu"**, oo macnihiisu yahay: "qaado, oo kama arki doontid waxaad kahato intaan ka bacdi inshaa'a Allaahu." Al Daaruqudhniyyu wuxuu ibnu Cabbaas ka wariyay inay haweeney wiil ay dhashay ula timid Nabiga, Sallaa Allaahu

Calayhi Wasallam, ayna tiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wiilkayga waalli ayaa haysa, waxayna qabaynaysa markaan qadaynaynno ama cahsaynaynno." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laabtiisa gacanta mariyay, uuna u duceeyey. Markaasuu wiilku matagay oo uu uurkiisa kasoo baxay wax la mid ah ey dhashay oo yar oo madow, oo cararay."

Zinniirah

Zinniirah waxay ahayd kaahinad Makkah deggan, wayna islaamtay bilowga islaamkaba.

Al Zarqaanii wuxuu soo guuriyay oo uu yiri: "Cumar wuxuu lahaa gabar addoon ah oo isga hortiis islaamtay, lana yiraahdo Zinniirah. Markaasuu islaamiddeeda ku dili jiray. Gaalada Qurayshna waxayba oran jireen: "Hadduu islaamku khayr leeyahay Zinniirah noogama ay hormarteen." Markaasuu Ilaahay Tacaala wuxuu soo dejiyay Aayadda kow iyo tobnaad ee Suuratu Al Axqaafi: **"Wa qaala allthiina kafaruu lillathiina aamanuu law kaana khayran maa sabaquunaa ilayhi wa ith lam yahtaduu bihi fa sayaquuluuna haathaa ifkun qadiimun**(11)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Gaaladii waxay ka yiraahdeen kuwa rumeeyey: "Hadday Diinta Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, khayr leedahay hebel iyo hebel noogama ay hormareen. Markay ku hanuuni waayeen Quraankana, siday ugu hanuuneen kuwa rumeeyey, waxay yiraahdeen: "Kani waa beenihii hore." Ibnu Sacadna sidoo kale ayuu wariyay. Markay islaantay kaddib ayay Zinniirah indho beeshay. Markaasey gaaladu waxay yiraahdeen: "Waxaa indho tiray Al Llaata iyo Al Cuzzaa", oo ah asnaamtay caabudi jireen qaarkood. Abuu Jahalna wuxuu ku yiri: "Al Laata iyo Al Cuzzaa waxay kugu faleen waad u jeeddaa." Markaasey waxay tiri: "Wa Allaahi inayan sidaas ahayn, oo Al Llaata iyo Al Cuzzaa kuwa caabudaba kama ay warhayaan, laakiin waxaan igu dhacay waa amar Samada ka yimid. Rabbigayna wuu awoodaa inuu araggayga ii soo celiyo." Markaasuu Ilaahay subixii habeenkaas ku xigay araggeeda usoo celiyay. Markaasey Qurayshi waxay tiri: "Kani waa sixirka Muxammad, Sallaa Allaahi Calayhi Wasallam." Markaasuu Abuu Bakr Al Siddiiqu gatay, uuna xoreeyey. Ibnu Athiir wuxuu Usudu Al Ghaabah ku yiri: "Waa Zinniirah Al Ruumiyyah, oo roomaanka ahayd, oo ka mid ah kuwa horeba islaamka ugu horreeyey, waxayna addoon u ahayd reer Banii Makhzuum, oo sidaasuu Abuu Jahl ku cathaabi jiray. Waxaa kaloo la yiri waxaa lahaa reer Banii Cabdu Al Daar(11)."

Khaatimka Nabinnimada

Waxay saxiixu Muslim, Al Dhabraanii, Al Xaakim, ibnu abii Al Dunyaa iyo Cabdu Allaahi bin Axmad ka wariyeen Abuu Tharr Al Ghifaarii, Allaha raalli ka noqdee, inuu yiri: "Waxaan iri: "Rasuulka ILaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sideebaad ku ogaatay inaad Nabi tahay, maxaadna ku ogaatay oo aad ku yaqiinsatay?" Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"yaa abaa Tharrin, ataanii Malakaani, wa anaa bi badhxaa'i Makkata. Fa waqaca axaduhumaa bi al**

ardi, wa kaana al aakharu bayna Al Samaa'i wa al ardi. Fa qaala axaduhumaa li saaxibihi: "a huwa huwa?" Qaala: "huwa huwa". Qaala: "fa zinhu bi rajulin". Fa wazananii bi rajulin, fa rajaxtuhu. Thumma qaala: "zinhu bi cashratin". Fa wazananii, fa rajaxtuhum. Thumma qaala: "zinhu bi mi' atin ". Fa wazananii, fa rajaxtuhum. Thumma qaala: "Zinhu bi alfin". Fa wazananii, fa rajaxtuhum, xattaa jacaluu yatathaaqaluuna calayya min kiffati al miizaani. Fa qaala axaduhumaa li saaxibihi: "shuqqa badhnahu". Fa shaqqa badhnii. Fa akhraja qalbii. Fa akhraja minhu maghmaza al shaydhaani, wa calaqa al dami, fa dharaxahumaa. Fa qaala axaduhumaa li saaxibihi: "aghsil badhnahu ghasla al inaa'i, wa aghsil qalbahu ghasla al mulaa'i." Thumma qaala axaduhumaa li saaxibihi: "khidh badhnahu." Fa khaadha badhnii, wa jacala al khaatima bayna katifayya, kamaa huwa al aana, wa wallayaa cannii. Fa ka annii ucaayinu al amra mucaayanatan." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Abuu Tharrow, waxaa ii yimid labo Malag, anigoo Makkah waadigeeda ku sugan (riwaayada uu Al Bazzaar Curwah ka wariyayna, kanoo Abuu Tharr ka wariyay erayga Makkah kuma jiro, oo siday ibnu Isxaaq iyo ghayrkiisba u wariyeen, wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la joogay markaas Xaliima Al Sacdiyyah, joogayna arliga qabiilkaas reer Banuu Sacd bin Bakr, ee Makkah ma uusan joogin). Markaasuu labadooda midkood dhulka kusoo degay, kan kalena wuxuu ku sugnaa Samada iyo arliga dhexdooda. Markaasuu midkood wuxuu saaxiibkiis ku yiri: "Kanu ma isagiibaa?" Wuxuu yiri: "Kani waa isagii!". Wuxuu yiri: "La miizaan nin." Markaasuu igu miizaamay. Markaasaan ka culusaaday. Markaasuu wuxuu yiri: "Toban la miizaan". Markaasuu ila miizaamay. Markaasaan ka culusaaday. Markaasuu wuxuu yiri: "Boqol la miizaan." Markaasuu ila miizaamay. Markaasaan ka culusaaday. Markaasuu wuxuu yiri: "Kun la miizaan." Markaasuu ila miizaamay. Markaasaan ka culusaaday, ilaa aan ka arkay ayagoo gacanta kale ee miizaanka, oo korreysa oo is culaysiinaya. Markaasuu midkood wuxuu saaxiibkiis ku yiri: "Dillaaci calooshiisa." Markaasuu caloosheyda dhanbalay, oo uu qalbigayga soo bixiyay. Markaasuu qalbigayga wuxuu kasoo bixiyay maghmazata al shaydhaani, oo ah barta uu shaydhaanku ka taabto cunug kasta oo dhasha, oo uu markaas la booyo. Bartaasi waa meesha ay ku jirto rabidda dhaqdhaqajisa shahwada minada , dhaqdhaqaaqeedana waxaa goob joog ah shayaadhiinta." Xadiithkaan, oo uu cilmi qiimo badan ku sugan yahay, wuxuu kaloo noo sheegayaa goorta khaatimka meeshuu ku yaallo la dhigay, iyo sida loo dhigay iyo cidda dhigtay. Allaha cilmiga noo kordhiyo, inaan ka mahad celinana cilmiga nala barayna na waafajiyo. Ka mahad celintiisuna waa ku dhaqankiisa iyo gudbintiisa. Xadiithku wuxuu kaloo caddeynayaa jawaabta su'aasha Abuu Tharr, markuu weydiiyey: "Sidee baad ku ogaatay inaad Nabi tahay?", oo markaasuu Nabigu, Sallaa

Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay siduu ku ogaaday.

Xikmada khaatimka Nabinnimada

Xikmada ku jirta khaatimka Nabinnimada, ayuu Al Suhaylii yiri, waxaa weeye: "xagga tixgelinta (ictibaar) in marka qalbigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lagu buuxiyay xikmo iyo yaqiin, ayaa waxaa loo aaburay sida weelka ay miski iyo luul ka buuxaan loo aaburo oo kale. Saaridda khaatimka la saarayse madaxa lafta garabkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa inuu isagu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, macsuum ka yahay, oo uu ka dhawrsan yahay, waswaasinta shaydhaanka, oo bartaas khaatimka la saaray waa barta uu shaydhaanku banii Aadanka ka waswaasiyo. Maymuun bin Mahraan ayaa wuxuu ka wariyay Cumar bin Cabdu Al Caziiz, inuu nin Rabbigiis waydiistay inuu tuso meeshuu isaga shaydhaanku ka saaran yahay (oo waa isaga uu qof walba shaydhaan isaga ku lammaansan leeyahay, uuna kan Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku lammaansana islaamay). Markaasaa waxaa la tusay jasad, waa qof jirkiise, oo saafi ah,oo qaruurad oo kale ah, oo dibaddiisa gudihiisa looga jeedo, sida qaaruuradda oo kale, uuna shaydhaanku, oo muuqaalka rakaha ama raha oo kale leh, uu ku sugan yahay madaxa lafta ballaaran ee garabkiisa, lana siman qalbiga ninka. Shaydhaankaasina wuxuu leeyahay gafuur dheer oo la mid ah midka kaneecada, uuna dhex geliyay qalbiga ninka, uuna waswaasinayo. Markaasuu hadduu addoonku Ilaahay Tacaalaa xusuusto, shaydhaanku cararaa oo uu ka fogaadaa addoonka." Intaas ayuu ku egyahay warka Al Suhaylii.

Shaydaanka qof walba ku lammaansan

Qof walba oo banii aadanka ka mid ahi wuxuu leeyahay shaydaan qariin u ah oo ku lammaansan, oo waswaasiya, kuna dadaala inuu baadiyeeyo. Bartuu shaydaankaasu ku sugan yahayna waxaan kusoo aragnay markaan xikmada khaatimka ka hadalnay.

Muslim iyo Axmad iyo ghayrkoodba waxay Caa'ishah ka wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, habeen agteeda ka baxay. Waxay tiri: "markaasaan masayray. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam soo noqday, uuna arkay xaaladdaan ku suganahay, wuxuuna yiri: **"maa laki yaa Caa'ishah a ghirti?"**, oo macnihiisu yahay: "maxaad leedahay Caa'ishoy, miyaad masayrtay?" Waxaan iri: "oo maxaa yeelay oo anigoo kale aan adigoo kale ugu masayri waayay?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"a fa akhathaki shaydaanuki?"** oo macnihiisu yahay: "oo ma shaydaankaaga ayaa ku qabtay?" Markaasaan waxaan iri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ma shaydaan ayaan leeyahay oo ila jira?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"nacam wa maca kulii insaanin"**, oo macnihiisu yahay: "haa, qof kastana waa leeyahay." Waxaan iri: "adiguna ma leedahay oo kula jiraa Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"nacam wa laakin Rabbii Cazza wa Jalla acaananii calayhi xattaa aslama"**, oo macnihiisu yahay: "haa, laakiin Rabbigay Cazza wa Jalla ayaa

iga caawinay oo wuu islaamay." Lafdi kalena wuxuu wariyay: **"acaananii calayhi fa aslama"**, oo macnihiisu yahay: "korkiisuu igu caawinay oo uu markaas islaamay."

Sababta astaantaas khaatim loo yiri

Al Qurdhubii wuxuu sheegay in calaamaddaas khaatimi Al Nubuwwati loogu bixiyay inay ayadu ka mid tahay astaamaha ay culummada kutubbadii hore Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku aqoonsanayaan. Taas ayaana u sabab ah inuu Salmaan Al Faarisii, Allaha raalli ka noqdee, kaddib markuu hubsaday runnimada Rasuulnimadiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kaddib markuu arkay qaar ka mid ah calaamadaha daliilka u ah, sida makaanka laga soo bixiyay oo Makkah ah, iyo meeshuu usoo haajiray oo Al Madiinah ah, uu ku dadaalay inuu, hadana, arko khaatimka oo calaamadahaas ka mid ah. Markaasuu intuu dhabarka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maray ayuu goobay. Markaasuu wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ogaaday inuu Salmaan goobayo Khaatimka. Markaasuu go'a garbaha u saarnaa uu ka qaaday. Markaasuu Salmaan khaatimka Nabinnimada arkay, oo uu markaas intuu ku foorarsaday dhunkaday, oo uu yiri: "Ash-hadu annaka Rasuulu Allaahi", oo ah "Waxaan marag ka ahay inaad adigu Rasuulka Ilaahay tahay". Wadaadka Baxiiraa-na qisadiisa, waa isaga oranaya: "Waxaan ku aqaannaa khaatimka Nabinnimada". Sababo kalena waa la sheegay. Khaatimkana waxaa kasoo kaahayey carafta miskiga.

Ekaanshaha khaatimka

Wuxuu Muslim Jaabir bin Samurata ka wariyay inuu Xadiith uu wariyay ku yiri: "Khaatimkana waan arkay, oo garabkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, agtiisa ayuu ahaa, oo le'eg ukunta qoolleyda, jirkiisana, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u eg." Al Bukhaarii wuxuu kitaabkiisa taariikhda ku wariyay, siduu u wariyay oo kale Al Bayhaqii, inuu khaatimku yahay hilib haraggiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hoostiisa ku jira,oo soo foocsan ama soo kuusan. Ibnu Hishaam wuxuu yiri: ""Khaatimku wuxuu ahaa sida soo foocidda hilibka ee ku harta kaddib marka qofka la toobo." Khaatimka hareerihiisana waxaa ku yiillay dhawr tin oo madow. Waxaa kaloo lagu tilmaamay inuu tufaaxa oo kale ahaa. Waxaa kaloo lagu sifeeyey sida ruugga ceesaanta oo kale, siduu kitaabka al Istiicaabu u wariyay. Al Bukhaarii iyo Muslim waxay wariyeen sifo shanaad oo ah Zirru al Xajalati. Al Nawawii wuxuu Sharxu Muslim ku yiri: "AI Xajalatu waa guri khaymadda oo kale ah, lehna azraarun kibaarun, oo ah wacaran oo ah jamcu curwah oo ah daloolka dharka ku yaalla oo uu guluusku galo". Ibnu Xajar wuxuu yiri: "Meeshaan al xajalu waa marada sariirta korkeeda lagu suro, oo arooska loogu qurxiyo". Waxaa weeye wax sariirta ka korreeya sida waayahaan marada shabaqa ah ee kaneecada la isaga celiyo, sariirta looga kor dhiso oo kale. Al Qurdhubii wuxuu yiri: "Axaadiithta sugani waxay tilmaamayaan inuu khaatimka Nabinnimadu ahaa wax muuqda oo guduudan, kuna yiillay garabkiisa bidixeed agtiisa,oo markuu soo uruuro oo uu yaraado ukunta qoolleyda

le'eg, markuu batana oo uu faafo tantoonyo le'eg." Al Qaalli Ciyaad wuxuu yiri: "Riwaayadahaasoo idil way isku dhow yihiin, ayna isku waafaq san yihiin inuu khaatimku jirkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kasoo foocsanaa in le'eg ukunta qoolleyda iyo zirru al xajalati. Riwaayadaha ku tilmaamayna tantoonyo waxaa muuqata inay khilaafsantahay riwaayadaha badan oo la wariyay."

Khudbada ibliis "khudhbatu al maqti" ee is nicidda

Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aayadda laba iyo labaatanaad ee Suuratu Ibraahiima ku yiri: **"Wa qaala al sh-shaydhaanu lammaa qudiya al amru inna Allaaha wacadakum wacda al xaqqi wa wacadtukum fa akhlaftukum wa maa kaana liya calaykum mmin suldhaanin illaa an dacawtukum fa istajabtum lii fa laa taluumuunii wa luumuu anfusakum mmaa anaa bi musrikhikum wa maa antum bi musrikhiyya innii kafartu bimaa ashraktumuuni min qablu inna al th-thaalimiina lahum cathaabun aliimun**(22)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Shaydaanku wuxuu yiri marka xukunka la riday oo laga soo jeestay, oo inta jannada geli lahaydna ay galaan, inta naarta geli lahaydna ay galaan, ayay gaalda naarta ku jirta Ilaahay baryayaan, ayna ka baryayaan inay dhintaan, markaasuusan u jawaabayn sideetan sano, oo sanad walba ka kooban yahay saddex boqol iyo lixdan maalmood, oo ay maalintiiba la mid tahay kun sano oo aad tirsataan. Markaasay markay arkaan inaan loo jawaabayn, ayay quusanayaan, ayna hubsanayaan inay halkaas ku nagaadayaan. Markaasay inay adkaystaan isku dayayaan, kaddibna way qaylinayaan, labadooduna waxba u tari mayaan. Markaasay ibliis u tegayaan. Markaasaa ibliis waxaa naarta dhexdeeda loo dhigayaa minbar dab ah oo intuu fuulo uu u khudbeenayaa, waana khudbada la yiraahdo "khudhbatu al maqti", oo macneheedu yahay "khudbada is naca iyo shallaytida", oo al maqtu waa nacaybka qalbiga wax laga naco, uuna leeyahay: "Ilaahay wuxuu idiin qaaday ballan run ah wuuna idiin oofiyay. Aniguna ballan ayaan idiin qaaday, ahna inuusan bacthi la isi soo saari doono jirin iyo janno iyo naar toona, markaasaan ballanka Ilaahay idin khilaafiyay, aniguna adinka awood idinkuma lahayn, waxaan idin irina daliil idiinma keenin, oo waxaan falay wuxuu ahaa oo keli ah inaan idiin yeeray, adinkuna waad iga yeesheen waxaan idiinku yeeray." Markaasay eedeyeen ibliis. Markaasuu wuxuu ku yiri: "aniga ha i eedeynina, ee naftiinna eedeeya adinkoo i raacay anigoo wax daliil iyo xujjo ah aan idiin keenin. Aniguna maanta ma ihi kan idin badbaadin kara, adinkuna ma ihidin kuwa aniga i badbaadin kara, oo naarta iga saari kara weeye. Aniguna waxaan barii iyo dambi laawe ka ahay inaad aniga Ilaahay shariik iiga dhigteen oo ila caabudeen." Gaaladuna waxay leeyihiin oo u sugnaatay cathaab xanuun badan(22)." Markay khubada ibliis maqlaan ayay gaalada naarta ku jirta naftooda nacayaan. Markaasaa loo dhawaaqayaa oo lagu leeyahay**: "Inna allathiina kafaruu yunaadawna la maqtu Allaahi akbaru min mmaqtikum anfusakum ith tudcawna ilaa al iimaani fa takfuruuna**(10)**"**, oo ah Aayadda tobanaad ee Suuratu Ghaafir oo

macneheedu yahay: "kuwa gaaloobay markay naarta galaan maalinta qiyaame ayaa loo dhawaaqayaa oo lagu leeyahay: "nicidda aad naftiinna nacaysaan hadda inaad naarta gasheen, oo aad la timaaddeen waxaad naarta ku gashaan waxaa ka wayn siduu Ilaahay adduunka idiinku nacay marka iimaanka la idiinku yeeray oo aad diideen oo gaalowdeen(10)." Markaasay mar labaad qaylinayaan oo leeyihiin: **"Rabbanaa absarnaa wa samicnaa fa arjicnaa nacmalu saalixan innaa muuqinuuna**(12)**"**, oo ah Aayadda laba iyo tobnaad ee Suuratu Al Sajdah oo macneheedu yahay: "Rabbigeenow waan aragnay inayan Rusuhsaadu been noo sheegin, Adigana waan kaa maqalnay rumaynta waxay noola yimaadeen, ee adduunka nagu celi aan camal suuban sameynnee, waan yaqiinsannaye(12)." Markaasaa waxaa loogu jawaabayaa: **"Wa law shi'naa la ataynaa kulla nafsin hudaahaa wa laakin xaqqa al qawlu minni la amla'anna jahannama mina al jinnati wa al nnaasi ajmaciina**(13)**Fa thuuquu bimaa nasiitum liqaa'a yawmikum haathaa innaa nasiinaakum wa thuuquu cathaaba al khuldi bimaa kuntum tacmaluuna**(14)**."** Waana labada Aayadood ee saddex iyo toban iyo afar iyo toban ee Suuratu Al Sajdah oo macnohoodu yahay: "Haddaan doonno kulli naf walba waxaan siin lahayn hanuunkeeda, oo iimaankaan waafajin lahayn, laakiin waxaa waajib noqday hadalkayga ah: "waxaan ka buxinayaa jahannama jinni iyo insi dhammaantood"(13)Markaasay malaa'igta maamushaa naarta waxay gaalada ku leedahay: "hadaba dhedhemiya ciribta ka dhalatay inaad adduunka uga tagteen oo diideen inaad rumaysaan maalintaan aad joogtaan oo ah maalinta qiyaame. Annaguna waan idinka tagnay dhexdeeda, ee dhedhemiya cathaab lagu waaro oo aad ku mutaysateen waxaad adduunka ahaydeen kuwa fala"(14)." Markaasay mar saddexaad qaylinayaan oo leeyihiin: **"Rabbanaa akhrijnaa ilaa ajalin qariibin nnujib dacwataka wa nattabici Al Rrusula**(44)**"** oo ah Aayadda afar iyo afartanaad ee Suuratu Ibraahiima, oo macneheedu yahay: "Rabbigeenow noo kaadi oo naarta naga bixi, adduunkana noo celi, aan markaas waxaad noogu yeereysid yeelnee"(44)." Markaasaa waxaa loogu jawaabayaa oo lagu leeyahay: **"A wa lam takuunuu aqsamtum mmin qablu maa lakum mmin zawaalin**(44)**"**, ahna Aayadda afar iyo afartanaad ee Suuratu Ibraahiima oo macneheedu yahay: "oo soo ma ihidin kuwa intay adduunka joogeen ku dhaaranayay inuusan bacthi iyo isi soo celin jirin?"(44)." Markaasay marka afaraad qaylinayaan oo leeyihiin: **"Rabbanaa akhrijnaa nacmal saalixan ghayra allathii kunnaa nacmalu**(37)**"**, ahna Aayadda toddoba iyo soddonaad ee Suuratu Faadhir oo macneheedu yahay: "Rabbigeenow, naarta naga saar oo adduunka nagu celi aan markaas camal fiican la nimaadnee, kana duwan waxaan samayn jirnay oo gaalnimo iyo dambi ahaa"(37)." Markaasaa waxaa lagu leeyahay oo loogu jawaabayaa: **"A wa lam nucammirkum mmaa yatathakkaru fiihi man tathakkara wa jaa'akum al nnathiiru fa thuuquu famaa lilth-thaalimiina min nnasiirin**(37)**."** Waana Aayadda toddoba iyo soddonaad ee Suuratu Faadhir oo macneheedu yahay: "oo soo

cimri idiin ma siin oo aad nooleydeen ilaa da'da uu qofku ka waantoobo?" Da'daas waxaa la yiri waa midda lagu qaan gaaro. Cadhaa' iyo Qataadah iyo Al Kalbii waxay yiraahdeen waa sideed iyo toban sano. Al Xasan wuxuu yiri waa afartan sano. Ibnu Cabbaas wuxuu yiri waa lixdan sano. Waxaana idiin yimid mid naarta idiinka diga, ahna Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Hadaba dhedhemiya, oo daallimiintu ma laha cid u gargaarta"(37)." Markaasay xaaladdaas ku sugnaayeen intuu Ilaahay doonay inay ku sugnaadaan, kaddibna waa u yeeray oo uu ku yiri: **"A lam takun Aayaatii tutlaa calaykum fa kuntum bihaa tukath-thibuuna**(105)**."** Waana Aayadda boqol iyo shan ee Suuratu Al Mu'minuuna oo macneheedu yahay: "oo soo ma aydnaan ahayn kuwa Aayaadkayga lagu dul akhriyo oo lagu cabsiiyo, oo aad markaas adinkuna ahaydeen kuwa beeniya?"(105)." Markaasay markay taas maqleen ayay waxay is yiraahdeen: "hadduu noo naxariisanayaa!", oo ay markaas yiraahdeen: **"Qaaluu Rabbanaa ghalabat calaynaa shiqwatunaa wa kunnaa qawman daalliina**(106)**Rabbanaa akhrijnaa minhaa fa in cudnaa fa innaa thaalimuuna**(107)**."** Waana Aayadaha boqol iyo lix iyo boqol iyo toddoba ee Suuratu Al Mu'minuuna oo macnohoodu yahay: "Waxay yiraahdeen: "Rabbigeenow waxaa naga adkaatay shaqinnimadeenna aad noo dhigtay oo ma hanuunin, waxaanna ahayn qawm hanuunka ka lunsan"(106)Rabbigeenow naarta naga bixi, oo haddaan ku laabanno waxaad kahanayso, annagaa markaas daallimiin ah"(107)." Markaasuu wuxuu yiri: **"Qaala ikhsa'uu fiihaa wa laa tukallimuuni**(108)**"**, ahna Aayadda boqol iyo sideed ee Suuratu Al Mu'minuuna oo macneheedu yahay: "Cathaabta dhexdeeda ku sii fogaada hana ila hadlina", oo Al Qurdhubii yiri: "waxaa markaas go'aya rajada ay lahaayeen, oo markaasay intay ayagu isku soo jeestaan ayay qaarkoodba qaarka kale wajiyada uga qaylinayaan sida eeyahay oo kale, naartana lagu aaburaa"(108)."

Al Baghawii wuxuu tafsiirka Aayadda laba iyo labaatanaad ee Suuratu Ibraahiima ku yiri: "markuu Ilaahay Tacaala addoommadiisa kala xukumo maalinta qiyaame oo cidda jannada geli lahaydna ay gasho Allaha naga mid dhigee, cidda naarta geli lahaydna ay galaan, Allaha naga fogeeyee,, waana qayb ka mid ah Xadiithka shafaacada ayuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"yaquulu Ciisaa Calayhissalaamu: "thaalikumu Al Nabiyyu Al Ummiyyi." Fa ya'tuunii, fa ya'thanu Allaahu lii an aquuma fa yathuuru min majlisii adhyaba riixin shammahaa axadun xattaa aatiya Rabbii Cazza wa Jalla, fa yushfficunii wa yajcalu lii nuuran min shacri ra'sii ilaa thahra qadamayya, thumma yaquulu al kuffaaru: "qad wajada al mu'minuuna man yashfacu lahum, fa man yashfacu lanaa?" Fa yaquuluuna: "maa huwa ghayru ibliisa, huwa allathii adallanaa!" Fa ya'tuunahu, fa yaquuluuna lahu: "qad wajada al mu'minuuna man yashfacu lahum, fa qum anta fa ashfac lanaa, fa innaka anta adlaltanaa." Fa yaquumu, fa yathuuru min majlisihi antana riixin**

shammahaa axadun. Thumma tacithuhum jahannamu wa yaquulu cinda thaalika "inna Allaaha wacadakum wacda al xaqqi wa wacadtukum fa akhlaftukum wa maa kaana liya calaykum mmin suldhaanin illaa an dacawtukum fa istajabtum lii fa laa taluumuunii wa luumuu anfusakum mmaa anaa bi musrikhikum wa maa antum bi musrikhiyya innii kafartu bimaa ashraktumuuni min qablu inna al th-thaalimiina lahum cathaabun aliimun." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "markaasuu Ciise Calayhissalaamu wuxuu leeyahay: "waa kaas Nabiga Ummiga ahe isaga u taga inuu Ilaahay khalqiga uga shafeeco qaado, oo uu kala xukunka bilaabo." Markaasay ii imaanayaan, waana wafdi Anbiyo ka kooban oo uu gargalyoonaya inuu Ilaahay uga shafeeco qaado inuu banii Aadanka xuxunkooda bilaabo, oo inta jannada geleysana ay galaan, inta naarta geleysana ay galaan, oo dadka la kala diro. Markaasuu Ilaahay ii oggolaanayaa inaan fadhiga ka kaco. Markaasaan markaam kaco waxaa meeshaan ka kacay kasoo kacaysa wax la ursado kan ugu caraf badan wuxuu midkiin uriyay. Markaasaan Rabbigay u imaanayaa Cazza wa Jalla, oo uu markaas shafeecadayda aqbalayaa, uuna ii yeelayaa nuur ku sugan inta u dhexeysa timaha madaxayga ilaa dhabarka cagahayga. Markaasay gaaladu waxay leeyihiin: "mu'miniintu waxay heleen qof u shafeeco qaada, ee annaga yaa noo shafeeco qaadaya?" Markaasay waxay leeyihiin: "ma aha qof aan ibliis ahayn, oo isagaa na baadiyeeyey." Markaasay u imaanayaan, ayna ku leeyihiin: "mu'miniintu waxay heleen qof u shafeeco qaada, ee hadaba adigu kac oo noo shafeeco qaad, maxaa yeelay adigaa na baadiyeeyey." Markaasuu sare kacayaa, oo ay markaas meeshuu ka kacay kasoo haadaysaa urka ugu qurmoon oo uu midkiin uriyay. Markaasay jahannama la xujjaytamaysaa ayadoo wayn. Markaasuu ibliis wuxuu leeyahay: "Ilaahay wuxuu idiin qaaday ballan run ah wuuna idiin oofiyay. Aniguna ballan ayaan idiin qaaday, ahna inuusan bacthi la isi soo saari doono jirin iyo janno iyo naar toona, markaasaan ballanka Ilaahay idin khilaafiyay, aniguna adinka awood idinkuma lahayn, waxaan idin irina daliil idiinma keenin, oo waxaan falay wuxuu ahaa oo keli ah inaan idiin yeeray, adinkuna waad iga yeesheen waxaan idiinku yeeray." Markaasay eedeyeen ibliis. Markaasuu wuxuu ku yiri: "aniga ha i eedeynina, ee naftiinna eedeeya adinkoo i raacay anigoo wax daliil iyo xujjo ah aan idiin keenin. Aniguna maanta ma ihi kan idin badbaadin kara, adinkuna ma ihidin kuwa aniga i badbaadin kara, oo naarta iga saari kara weeye. Aniguna waxaan barii iyo dambi laawe ka ahay inaad aniga Ilaahay shariik iiga dhigteen oo ila caabudeen."

Sida shaydaan guryaha looga celiyo

Guriguu shaydaan wax ka deggan yahay waxaa taalla dagaal, qaylo, xanaaq iyo kala jeesasho. Guriga laga eryana waxaa yaalla jacayl iyo nabad iyo farax, ee jinniga guryaha ha laga ceshado. Muslim iyo Abuu Daa'uud waxay Jaabir ka wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"ithaa dakhala al rrajulu manzilahu fa thakara Isma Allaahi cinda dukhuulihi wa cinda dhacaamihi qaala al sh-**

shaydhaanu laa mabiita lakum wa laa cashaa'a, wa ithaa thakara Isma Allaahi cinda dukhuulihi wa lam yathkurhu cinda dhacaamihi yaquulu adrakrtumu al cashaa'a wa laa mabiita lakum, wa ithaa lam yathkur Isma Allaahi cinda dukhuulihi qaala adraktumu al mabiita wa al cashaa'a." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Hadduu ninku galo gurigiisa oo markuu gelayo uu yiraahdo Bismi Allaahi, markuu cunnadiisa cunayana yiraahdo Bismi Allaahi, markaas shaydaanku wuxuu shyaadiinta la joogta ku yiraahaa: "caawa hoy ma lihidin, cashana ma lihidin." Hadduu Bismi Allaahi yiraahdana markuu gurigiisa gelayo, uusanna Bismi Allaahi oran markuu cunnadiisa cunayo, shaydaanku wuxuu yiraahdaa: "casho ayaad hesheen, hoyse ma lihidin." Hadduusanna Bismi Allaahi oran markuu gurigiisa gelayo iyo markuu cunnadiisa cunayaba shaydaanku wuxuu yiraahdaa: "caawa waxaad leedihiin hoy iyo cashaba."

Sida shaydaanka la isaga ilaaliyo

Qaalli Badru Al Ddiini Abii Cabdi Allaahi Cumar bin Cabdi Allaahi Al Sh-shiblii Al Xanafii, o la oofsaday sanadka toddoba boqol sagaal iyo lixdan Hijriga, wuxuu kitaabkiisa Aakaamu al murjaani fii axkaami al jaanni boggiisa boqol iyo konton ku wariyay toban xirzi oo jinniga la isaga ictisaamo oo la isaga ilaaliyo, la isagana celiyo shartooda, waxayna kala yihiin: **(kow)** Cawthi billaysiga, oo ah inuu yiraahdo **acuuthu bi Allaahi mina al sh-shaydhaani al rrajiimi**, oo macnihiisu yahay: "Ilaahay ayaan ka magan galay shaydaanka la dhagaxyeeyey oo raxmada Ilaahay laga fogeeyey." Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aayadda lix iyo soddon ee Suuratu Fussilat ku yiri: **"Wa immaa yanzaghannaka mina al sh-shaydhaani nazghun fa istacith bi Allaahi innaHu Huwa Al Ssamiicu Al Caliimu**(36)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Hadday waswaasid kaaga timaaddo shaydaanka, markaas ka cawthibillayso oo Ilaahay ka magan gal, oo Ilaahay waa Midka ah Al Ssamiicu oo wax walba maqla, Al Caliimu oo wax walba ogsoon(36)." Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aayadda laba boqol ee Suuratu Al Acraafi ku yiri: **"Wa immaa yanzaghannaka mina al sh-shaydhaani nazghun fa istacith bi Allaahi innaHu Samiicun Caliimun**(200)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Hadduu shadaanku kula haleelo waswaasid yarba Ilaahay ka magan gal, oo Ilaahay waa Samiicun oo wax walba maqla, Caliimun, wax walbana og(200)." Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aayadda shan iyo afartan ee Suuratu Al Israa'i ku yiri: **"Wa ithaa qara'ta Al Quraana jacalnaa baynaka wa bayna allathiina laa yu'minuuna bi al aakhirati xijaaban mastuuran**(45)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Markaad Quraanka akhridana waxaan adiga iyo kuwa aan aakhiro rumaysnayn dhexdiinna yeelnaa oo dhignaa xijaab idin kala asturaya, oo idin kala qariya, oo run ahaantiiba ku arki mayaan, waana sidaas qof kasta oo Quraan akhrista." Waana Quraan kasta oo kitaabka Ilaahay ka mid ah.

Al Bukhaariina wuxuu wariyay inay laba nin isku caayeen Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, agtiisa, ilaa heer uu midkood wajigiisu guduutay. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu

yiri: **"innii la aclamu kalimatan law qaalahaa la thahaba canhu maa yajidu: acuuthu bi Allaahi mina al sh-shaydhaani al rrajiimi"**, oo macnihiisu yahay: "waxaan aqaanna kalimat hadduu yiraahdo ay ka tegi lahayd caraduu ku sugan yahay, ahna acuuthu bi Allaahi mina al sh-shaydhaani al rrajiimi". **(Laba)** Akhrinta macuuthataynka oo ah laba Suuradood ee Qul acuuthu bi Rabbi al falaqi iyo Qul acuuthu bi Rabbi al nnaasi. Al Tarmathii wuxuu Abuu Saciid Al Khudriyyi ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka cawthi billaysan jiray jinniga iyo isha dadkaba ilaa ay kasoo degeen al macuuthatayni, markaasuu markay soo degeen labadooda qaatay intii kalena uu iska daayay. **(Saddex)** Akhrinta Aayatu Al Kursii. Al Bukhaarii wuxuu ka wariyay Abuu Hurayrah inuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ii xil saaray zakada Ramadaan. Markaasaa waxaa yimid mid cunnada wax ka qaatay. Markaasaan qabtay, una sheegay inaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u gayn doono. Markaasuu wuxuu yiri: "waxaan ku baraya kalimooyin uu Ilaahay wax kugu tarayo." Waxaan iri: "waana kuwee?" Wuxuu yiri: "markaad gogoshaada u hoyatid waxaad akhrisaa Aayaddaan

Aayatu Al Kursii

"Allaahu laa ilaaha illaa Huwa Al Xayyu Al Qayyuumu laa ta'khuthu sinatun wa laa nawmun llaHu maa fii Al Ssamaawaati wa maa fii al ardi man thaa allathii yashfacu cindahu illaa bi ithniHi yaclamu maa bayna aydiihim wa maa khalfahum wa laa yuxiidhuuna bi shay'in mmin cilmihi illaa bimaa shaa'a wasica KursiyyuHu Al Ssamaawaati wa al arda wa laa ya'uuduHu xifthuhumaa wa Huwa Al Caliyyu Al Cathiimu." Aayadda macneheedu waxaa weeye: "**Allaahu** ilaah aan Isaga ahayn ma jiro. Isaguna waa **Al Xayyu** oo ah Midka nool, weligiis noolaan jiray, weligiisna noolaan doona oo aan weligiis dhimanayn. Isagu waa **Al Qayyuumu**, oo ah Midka khalqigiisa uu abuuray danahooda u quma oo maamula. Ma qabato gamaanyo iyo hurdo toona, wuxuuna iska leeyahay waxaa Samooyinka iyo arliga dhexdooda ku sugan. Waa kuma kan ka shafeeco qaadaya agtiisa oggolaashihiisa inuu siiyo mooyee? Ilaahay wuxuu ogyahay waxay khalqigu hormarsadeen oo ay adduunkaan ku sameeyeen iyo waxa ka dambeeya oo uu aakhiro u diyaariyay. Dadkuna ma koobo oo ma ogaan karo Cilmiga Ilaahay intaan ka ahayn wuxuu Isagu doono inuu ogaysiiyo. **Kursigiisuna** waa ka weyn yahay Samaawaadka iyo arligaba oo la isku daray. Ilaalinta iyo haynta Samaawaadka iyo arliguna culays iyo dhib kuma aha. Isaguna waa **Al Caliyyu** oo ah Midka khalqigiisa oo idil ka sarreeya xagga xoogga iyo lahaanshahaba, waana **Al Cathiimu**, Midka weyn oo wax ka weyn ayan jirin."

Carshiga iyo Kursiga

Al Zarqaanii wuxuu yiri: "Ibnu abii Xaatim iyo Abuu Al Shaykh waxay Sacad Al Dhaa'ii ka wariyeen inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Al Carshu Yaaquutatun xamraa'a".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Carshigu waa xabbad yaaquut ah oo

guduudan." Yaaquut waa jawharad qaali ah. Abuu Al Shaykh wuxuu Xaamid ka wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Khalaqa Allaahu Al Carsha min zumrudatin khadraa'a wa khalaqa lahu arbaca qawaa'imin min yaaquutatin xamraa'in, wa khalaqa lahu alfa lisaanin wa khalaqa fii al ardi alfa ummatin, kullu ummatin tusabbixu bi lisaanin min alsuni Al Carshi".** Xadiithka maciiihiisu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu Carshiga ka abuuray xabbad zumurud cagaaran ah (waa jawharad ama dhagax qaali ah), wuxuuna u abuuray afar lugood oo ka samaysan yaaquut guduudan, wuxuuna u abuuray kun carrab. Arligana, wuxuu ku abuuray kun ummadood, ayadoo ay ummad walba ku tasbiixsaneyso carrab ka mid ah carrabyada Carshiga." Al Xaafith Muxammad bin Abii Shaybah wuxuu uga wariyay kitaabkiisa "Sifatu Al Carshi" kuwa salafka ka mid ah oo horreeyey inuu Carshigu ka samaysan yahay xabbad yaaquut guduudan ah oo ay dhinacyadiisu konton kun oo sano oo safar ah isku jiraan, ballaciisana loo kala safrayo konton kun oo sano, Carshiga iyo Samada toddobaadna ay konton kun oo sano isku jiraan, Carshiga iyo arliga toddobaadna ay safar konto kun oo sano isku jiraan. Ibnu Jariir iyo ibnu Marduwayh iyo abuu Al Shaykh waxay abuu Tharr ka wariyeen inuu yiri: "Wuxuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Yaa abaa Tharr! Maa Al Ssamaawaatu Al Ssabcu fii Al Kursiyyi illaa ka xalqatin mulqaatin fii arli falaatin, wa fadlu Al Carshi calaa Al Kurisiyyi ka fadli al falaati calaa tilka al xalqati.** " Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Abaa Tharrow! Toddobada Samo marka la isku daro, waxay weynaantoodu ka le'egyiliiin marka la barbardhigo Kursiga sida intay dugaagadi (waa midda ay haweenku dhudhunka surtaan oo kale) ka le'egtahay arli saxra lama degaan ah oo lagu tuuray. Carshiguna wuxuu Kursiga ka weyn yahay intuu arligaas saxrada ahi dugaagaddaas ka weyn yahay oo kale." Midabyada kala duwan ee Carshiga lagu tilmaamayna waxaa la isu waafajiyay inuu midabkiisu is beddelo, midabkiisa asliga ahna uu caddaan yahay." Abuu Hurayrah wuxuu yiri: "Kurisgu waa makaan -meel- Carshiga hortiisa ah." Abuu Faraj bin Al Jawzii wuxuu kitaabkiisa Bustaanu Al Waacithiina wa Riyaadu Al Ssaamiciina, laguna daabacay Daaru Al Manaar, bogga boqol sagaal iyo sideetan ku sheegay inuu Ilaahay Tacaalaa adduunkaan ku abuuray sideed iyo afartan kun oo qabiil oo nool, uuna sideed kun oo qabiil badda dejiyay, afartanna inta u dhexeysa arligaan korkiisa ilaa Samaawaatka.

Asalka biyaha

Al Zarqaanii wuxuu yiri: "waxaa la wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: " **anna awwala maa khalaqa Allaahu yaaquutatan xamraa'a wa nathara ilayhaa bi al haybati fa saarat maa'an, fa wadaca Carshuhu calaa al maa'i** ". Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "waxa ugu horreeya ee uu Ilaahay abuuray waxaa weeye xabbad yaaquut ah oo guduudan (yaaquutku waa jawharad qaali ah sida fasaska faragashiga la suro oo kale, oo midabyo kala kuwan leh oo

luulkaba ka qaalisan. Dhagaxdaas qaaliga ahna waxaa ugu qiimo badan yaaquutka). Markaasuu si haybad leh u dhugtay oo ay markaas biyo noqotay. Fiiro haybad leh macneheedu waxaa weeye fiiro ay waynaan iyo cabsiini ku dheehan tahay, oo qofka lagu fiiriyo uu cabsanayo. Markaasuu Carshigiisa biyaha dul saaray." Abuu Hurayrah wuxuu yiri: "Al Kursiyyu waa meel Carshiga hortiisa ah." Wa Allaahu aclamu. Waxaan kasoo qaadannay kitaabkayga Mawlidka Nabigaan jeclahay, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, juzka labaad.

Abuu Hurayrah wuxuu yiri: "Markaasuu shaydaankuu Abuu Hurayrah qabtay Aayadda oo idil akhriyay, wuxuuna yiri: "haddaad Aayaddaan akhrisid waxaa korkaaga ahaanaya Ilaalo xagga Ilaahay kaaga timid, oo ku ilaalinaysa, shaydaanna kuuma soo dhowaanayo ilaa aad ka waabariisato." Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Abuu Hurayrah ku yiri: **"maa facala asiiruka al laylata?"** oo macnihiisu yahay: "ka warranka qafaalkaaga xalay?" Waxaan iri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu i baray shay uu leeyahay inuu Ilaahay Tacaalaa wax igu anfacayo." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"wa maa huwa?"** oo macnihiisu yahay: "waana maxay?" Wuxuu yiri: "wuxuu i amray inaan akhriyo Aayatu Al Kursii markaan gogoshayda u hoydo, wuxuuna yiri inuusan shaydaan ii soo dhowaanayn ilaa aan ka waabariisto, uuna korkayga ahaanayo ilaalo Ilaahay Tacaalaa." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"sadaqaka wa huwa kathuubun, thaaka al sh-shaydhaanu"** oo macnihiisu yahay: "run ayuu kuu sheegay, waana beenlow warkiisa la beensado. Waana shaydaan." **(Afar)** Akhrinta Suuratu Al Baqarah, oo wuxuu Al Bukhaarii Abuu Hurayrah ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"la tajcaluu buyuutakum qubuuran wa inna al bayta allathii tuqra'u fiihi Al Baqarah laa yaqrabuhu al sh-shaydhaanu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "guryihiinna ha ka dhiginna qubuur, waa xabaalee, oo qofka dhintay oo xabaalan hawl ma qabsado oo ma tukado, ma soomo, Quraanna akhriyo, oo wuxuu ajar ka helayo ma qabsado. Guriga lagu akhriyana Suuratu Al Baqarah shaydaanku uma soo dhowaado." **(Shan)** Akhrinta labada Aayadood oo Suuratu Al Baqarah ugu dambeeya, oo Al Bukhaarii wuxuu ibnu Mascuud Al Ansaarii kasoo wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"man qara'a Al Aayatayni min aakhiri Suuratu Al Baqarah fii laylatin kafataahu"**, oo macnihiisu yahay: "qofka akhriya labada Aayadood oo ugu dambeeya Suuratu Al Baqarah, way ku filan yihiin habeenkaas." Al Tirmithii wuxuu Al Nnucmaanu bin Bashiir ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Inna Allaaha kataba kitaaban qabla an yakhluqa al khalqa bi alfay caamin, anzala minhu Aayatayni khatama bihaa Suuratu Al Baqarah, fa laa yuqra'aani fii baytin thalaatha layaalin fa yaqrabuhaa shaydhaanun."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu dhigay kitaab intuusan khalqiga abuurin ka hor laba kun oo sano. Kitaabkaasna wuxuu kasoo dejiyay laba Aayadood

oo uu ku gunaanaday Suuratu Al Baqarah. Labadaas Aayadood guriga lagu akhriyo saddex habenn shaydaan usoo dhowaan mayo." **(Lix)** Akhrinta bilowga Suuratu Xaa Miim Al Mu'minu ama Ghaafir ilaa Al Masiiru, ahna ilaa Aayadda saddexaad, oo lala akhriyo Aayatu Al Kursii. Al Tirmithii wuxuu Abuu Hurayrah ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"man qara'a Xaa Miim Al Mu'min ilaa qawluHu ilayHi al masiiru wa Aayatu Al Kursii xiina yusbixu xufitha bihimaa xattaa yamsii, wa man qara'ahaa xiina yumsii xufitha bihimaa xattaa yusbixa"**, oo macnihiisu yahay: "qofka akhriya Xaa miim Al Mu'min ilaa qawlkiisa al masiiru iyo Aayatu Al Kursii markuu waabariisto labadoodaas ayaa lagu ilaaliyaa ilaa u habeenku ka dumo, qofka akhristana markuu habeenku dumana waxaa labadoodaas lagu ilaaliyaa ilaa uu ka waabariisto." **(Toddoba)** Akhrinta **laa ilaaha illaa Allaahu Waxdahu laa shariika laHu laHu al mulku wa laHu al xamdu wa Huwa calaa kulli shay'in Qadiirun** boqol goor, oo Al Bukhaarii wuxuu Abuu Hurayrah ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"man qaala laa ilaaha illaa Allaahu Waxdahu laa shariika laHu laHu al mulku wa laHu al xamdu wa Huwa calaa kulli shay'in Qadiirun mi'ata marratin kaanat lahu cadlu cashara riqaabin, wa kutiba lahu mi'atu xasanatin wa muxiyat canhu mi'atu sayyi'atin, wa kaana lahu xirzan mina al sh-shaydhaani yawmahu thaaka xattaa yumsii, wa lam ya'ti axadun bi afdala mimmaa jaa'a bihi illaa axadun camala akthara min thaalika."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "qofka yiraahdaa laa ilaaha illaa Allaahu Waxdahu laa shariika laHu laHu al mulku wa laHu al xamdu wa Huwa calaa kulli shay'in Qadiirun boqol goor waxay u dhigantaa oo u ahaata xoraynta toban qof oo addoommo ahaa, waxaana loo dhigaa boqol xasano, waxaana laga tirtiraa oo laga cafiyaa boqol dambi, waxaana u sugnaaday xirzi ka ilaaliya shaydaanka maalintiisaas ilaa uu habeenka ka gaaro, mana jiro axad la yimid wax ka fadli badan wuxuu isagu la yimid intaan ka ahayn axad la yimid camalkiisaas mid ka badan." **(Sideed)** Xusid badan oo Ilaahay la xuso (xusidda ugu fiicanna waa Quraanka oo la akhriyo). **(Sagaal)** In la wayso qaato, lana tukado, kana mid ah kuwa ugu waawayn oo la isku ilaaliyo. Sunanku waxay wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"inna al ghadaba mina al sh-shaydhaani, wa inna al sh-shaydhaanu mina al nnaari wa innamaa tudhfaa al nnaaru bi al maa'i, fa ithaa ghadaba axadukum fal yatawadda'."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "caradu waxay ka timmaadda shaydaanka, shaydaankuna wuxuu ka samaysan yahay dab, dabkana waxaa lagu damiyaa biyo. Marka markuu midkiin caroodo ha wayso qaato." **(Toban)** In la iska ilaaliyo fiiradaan loo baahnayn, oo uu ninka haweenta fiiriyo ama ay haweentu ninka fiiriso, iyo hadalkaan loo baahnayn, iyo cunnadaan loo baahnayn, iyo dadka oo la dhex galo, oo shaydaanku wuxuu banii Aadanka kasoo galaa afartaas irdood. Imaam Axmad wuxuu wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"al nnathratu sahmun**

masmuumun min sihaami ibliisa fa man ghadda basarahu Lillaahi Cazza wa Jalla awrathahu Allaahu xalaawatan yajiduhaa fii qalbihi ilaa yawma yalqaaHu." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "fiiradu waa fallaar sumaysan oo fallaaraha ibliis ka mid ah. Marka qofka Ilaahay Cazza wa Jalla daradiis indhihiisa u gaabiya wuxuu Ilaahay dhaxalsiiyaa oo uu siiyaa macaan uu qalbigiisa dhexdiisa ka helayo, kuna sugnaanaysa ilaa maalintuu Ilaahay kala kulmayo."

Kitaabka axkaamta jinniga waxaa sharxay Al Shaykhu Qaasim Al Shumaacii Al Rifaacii, oo ah guddoomiyaha waaxda arrimaha diinta ee Daaru Al Fatwaa ee jamhuuriyadda Lubnaan wuxuu bogga boqol toddoba iyo konton, ku sheegay kaddib inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isku ilaalin jiray isagoo middiiba saddex goor akhriya oo kaddibna gacnihiisa inta ku tufa madixiisa, wajigiisa iyo jirkiisa marin jiray Suurada Al Ikhlaas, Al Falaq iyo Al Nnaas, ku yiri: "qofka buka ama sixran isagu ha isku akhriyo, ama qof kale ha amro inuu ku akhriyo macuuthataynka, oo ah Al Falaq iyo Al Nnaas middiiba kow iyo afartan jeer. Markaas Ilaahay Tacaalaa wuu bogsiinayaa. Sidaasna ha yeelo saddex maalmood, ama shan maalmood ama toddoba maalmood. Qofkay awhaamta madow ka adkaadaan, iyo isla hadalka naftiisu, oo ay musiibooyin ku yimaadaan, ama dawladdaba uga yimaadaan, ha akhristo boqol goor Suuradaha Al Falaq iyo Al Nnaas, ama ka badanba ilaa kun goor. Markaas ha fiiriyo siduu amarku noqonayo. Sidaasaa ku dhigan Khawaasu Al Quraani." Waa intaas warka muftigu.

Faataxada

Asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay isku daawayn jireen Faataxada. Al Nawawii wuxuu Al Athkaar ku wariyay inay Al Bukhaarii iyo Muslim Abuu Saciid Al Khudriyyi, Allaha raalli ka noqdee, ka wariyeen inuu yiri: "koox ka mid ah asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, (waxayna ahaayeen sodoon nin oo daabado saaran oo uu isagu ka mid yahay) ayaa safar galay, markaasay waxay ku degeen qabiil Carbeed, oo ay ka codsadeen inay marti geliyaan. Markaasay u diiden inay marti geliyaan. Markaasaa ninka qabiilkaas u madaxda ah waxaa qaniinay halaq. Markaasuu tolkiis isku dayay inuu ninkaas daaweeyo oo wax kasta ayay ku dayeen, waase anfici wayday oo bogsoon waayay. Markaasay waxay isku yiraahdeen: "aan u tagno kooxda ragga ah oo halkaas degay (oo geed ayay hoos degeen), oo waxaaba dhici karta inay wax daawo ah hayaane." Markaasay u yimaadeen oo ku yiraahdeen: "ragow madexeenna ayaa la qaniinay waana isku dayna wax walba inaan daaweynno, waase anfici wayday. Hadaba midkiinna ma hayaa wax daawo ah?" Markaasuu midkood wuxuu yiri (waana Abuu Saciid Al Khudriyyi laftiisa siduu u wariyay Al Tirmithii iyo Al Nasaa'ii): "wa Allaahi anigu waxaan haya ruqyah oo ah wax haddaan ku sameeyo cudurka ka qaadaya. Laakiin wa Allaahi waxaan hore idiin weydiisannay inaad na marti gelisaan (waana inaad amni na siisaa oo aydnaan na dilin, xooleheenna dhawrtaan, cunno iyo biyo iyo hoyna na siisaan, intaasoo

saddex maalmood lagu leeyahay cidda loo soo martiyo) waadna diideen inaad na marti gelisaan. Marka, idiinku tufi mayo, jeer aan aad abaalgud maal ah noo yeeshaan." Markaasay waxay ku heshiiyeen tiro ari ah (oo la wariyay inay soddon neef oo ari ah ahaayeen). Markaasuu u tegey ninka buka (jirkiiso oo idil ayaana bararsanaa, wuuna suuxsanaa) oo uu intuu Al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina, oo ah Faataxada ku akhriyo ayuu ku tufaa (waxaana la wariyay inuu toddoba goor ku akhriyay, oo markuu mar dhammeeyaba uu candhuuf ku tufo, meeshuu halaqqu ka qaniinayna uu gacantiisa la mariyo). Markaasuu ninka buka wuxuu noqda si isagoo dabar laga furay oo kale, uuna intuu sare kacay socday isagoo aan wax xanuun ahi hayn. Markaasay siiyeen arigay kula heshiiyeen. Markaasuu midkood wuxuu yiri: "noo qaybiya." Markaasuu midka ninka ku tufay, oo ah Abuu Saciid Al Khudriyyi, wuxuu yiri: "ha yeelina jeer aan Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u nimaadno, aanna u sheegno waxa dhacay, oo aan markaas aragno wuxuu na amrayo." Markaasay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimaadeen, oo ay wixii dhacay u sheegeen, markaasuu yiri: **"wa maa yudriika annahaa ruqyatun?"**, oo macnihiisu yahay: "maxaadna ka ogtahay inay ruqyah tahay, cudurka qaada oo lagu daaweeyo?" Kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"qad asabtum, aqsimuu wa adribuu lii macakum sahman"**, oo macnihiisu yahay: "waad haleesheen oo waa ruqyah cudurka daaweysa. Arigana qaybsada, anigana qayb iga siiya ariga." Kaddibna Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu qoslay." Waa intaas warka Al Nawawii. Culummadu waxay yiraahdeen: Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu qayb ariga uga qaatay inuu caddeeyo inay bannaan tahay in Quraanka bariddiisa iyo akhrintiisaba maal lagu qaato, maalkaasna uu xalaal yahay, oo sidaasna Quraanka la isugu daaweeyo." Runtama Rabbi ayaa og. Wuxuu kaloo Al Nawawii Abuu Daauud ka wariyay inuu Khaarijah bin Al Ssalt adeerkiis yiri: "waxaan u imid Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markaasaan islaamay. Markaasaan gaddoomay oo aan soo maray qawm haya nin waalan oo bir ku xiran. Markaasay ehelkiis waxay igu yiraahdeen: "waxaan maqalnay inuu saaxiibkaagaan, waana Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la yimid khayr, ee ma haysaa wax ninkaan lagu daaweeyo?" Markaasaan waxaan ku akhriyay Faataxada Kitaabka, oo uu markaas bogsooday. Markaasay waxay i siiyeen boqol neef oo ari ah. Markaasaan waxaan u imid Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo aan khabarka u sheegay, markaasuu yiri**: "hal illaa haathaa?"** oo macnihiisu yahay: "Faataxada maa hane wax kale ma tiri?" Riwaayad kalena ay warisay: **"hal qulta ghayra haathaa?"** oo macnihiisu yahay: "intaas maahane wax kale miyaad tiri?" Waxaan iri: "maya." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"khuth-haa fa la camrii laman akala bi ruqyati baadhilin, la qad akalta bi ruqyati xaqqin."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "qaado oo waa xalaal, ee la camrii kan ruqyo baadhil ah wax ku cuna. Adiguse waxaad ku cuntay ruqyo run ah." Adeerkaas magaciisu waa Culaaqah bin Suxaar, waxaana

kaloo la yiri waa Cabdu Allaahi.
Al Nawawii wuxuu kaloo isla baabkaan uga wariyay kitaabka ibnu Al Sunnii inuu Cabdu Al Rraxmaanu bin Abii Laylaa nin ka wariyay inuu aabihiis yiri: "nin ayaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid oo yiri: "walaalkay waa xanuun san yahay." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri: **"wa maa wajacu akhiika?"** oo macnihiisu yahay: "muxuuna yahay xanuunka walaalkaa?" Wuxuu yiri: "waa waashay." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"fa ibcath bihi ilayya"**, oo macnihiisu yahay: "aniga ii soo dir." Markaasuu yimid oo uu hortiisa fariistay, uu Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku akhriyay Faataxada Kitaabka, iyo afarta Aayadood oo ugu horreeya Suuratu Al Baqarah, iyo laba Aayadood oo dhexdeed ah oo ah **"Wa Ilaahukum Ilaahun Waaxidun llaa Ilaaha illaa Huwa Al Rraxmaanu Al Rraxiimu**(163)**Inna fii khalqi Al Ssamaawaati wa al ardi wa ikhtilaafi al llayli wa al nnahaari wa al fulki allatii tajrii fii al baxri bimaa yanfacu al nnaasa wa maa anzala Allaahu mina Al Ssamaa'i min mmaa'in fa axyaa bihi al arda bacda mawtihaa wa bath-tha fiihaa min kulli daabatin wa tasriifi al rriyaaxi wa al ssaxaabi al musakh-khari bayna Al Ssamaa'i wa al ardi la aayaatin lli qawmin yacqiluuna**(164), iyo Aayatu Al Kursii, iyo saddexda Aayadood oo Suuratu Al Baqarah ugu dambeeya, iyo Aayadda ku jirta Suuratu Aali Cimraana bilowgeeda oo ah**: "Shahida Allaahu annahu laa ilaaha illaa Huwa wa al malaa'ikatu wa uulu al cilmi qaa'iman bi al qisdhi laa ilaaha illaa Huwa Al Caziizu Al Xakiimu**(18)**."** Iyo Aayadda afar iyo kontonaad ee Suuratu Al Acraafi oo ah: **"Inna Rabbakumu Allaahu Allathii khalaqa Al Ssamaawaati wa al arda fii sittati ayaamin thumma istawaa calaa Al Carshi yugh-shii al llayla al nnahaara yadhlubuhu xathiithan wa al sh-shamsa wa al qamara wa al nnujuuma musakh-kharaati bi amrihi alaa lahu al khalqu wa al amru Tabaaraka Allaahu Rabbu al caalamiina**(54)**."** Iyo Aayadda boqol lix iyo toban ee Suuratu Al Mu'minuuna, oo ah: **"Fa tacaalaa Allaahu Al Maliku Al Xaqqu laa ilaaha illaa Huwa Rabbu Al Carshi Al Kariimi**(116)**."** Iyo Aayadda saddexaad ee Suuratu Al Jinni oo ah: **"Wa annahu Tacaalaa Jadduu Rabbinaa maa ittakhatha saaxibatan wa laa waladan**(3)**."** Iyo tobanka Aayadood oo Suuratu Al Ssafaat ugu horreeya, iyo saddexda Aayadood oo Suuratu Al Xashri ugu dambeeya, iyo Qul Huwa Allaahu Axadun iyo labada Macuuthatayni."
Ibnu Al Sunnii wuxuu kitaabkiisa Cabdu Allaahi bin Mascuud kaloo uga wariyay, Allaha raalli ka noqdee, inuu nin waalan dhegta wax uga akhriyay, oo uu markaas miyirsaday. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"maa qara'ta fii uthunihi?"** oo macnihiisu yahay: "maxaad dhegtiisa ku dhex akhriday?" Wuxuu yiri: "waxaan ku akhriyay: **"A fa xasibtum annamaa khalaqnaakum cabathan** (oo ah Aayadda boqol shan iyo toban ee Suuratu Al Mu'minuuna) ilaa Suuradda dhammadkeeda." Markaasuu Rasuulka

Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"law anna rajulan muuqinan qara'a bihaa calaa jabalin la zaala"**, oo macnihiisu yahay: "hadduu nin yaqiinsan ku akhriyo buur way zuuli lahayd."

Macnaha Faataxada

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi(1)**Al xamdu Lillaahi Rabbi al caalamiina** (2), macneheedu waxaa weeye: "mahad oo idil Ilaahay ayaa iska leh, Allahaasoo caalamiinta oo idil kii abburay oo Rabbi u ah, maamulayana. **Al Rraxmaani**, naxariistah, naxariista teeda guud ku naxariistah, naxariista teeda ballaaran ku naxariistah, naxariista teeda caamka ah ee adduunyada dhexdeeda ah, oo mu'min iyo kaafir iyo wax nool oo idil ayan la'aanteeda jiri karin, ku naxariistah. **Al Rraxiimi**, naxariista teeda gaarka ah, mu'miniinta u gaarka ah, yawmul qiyaamaha u gaarka ah ku naxariista(3)**Maaliki yawmi al Ddiini**: abaalmarinta maalinteeda, oo ah yawmul qiyaamaha, Maaliggeeda iska leh iyo Boqorkeeda ah (4)**Iyyaaka nacbudu wa Iyyaaka nastaciinu**: Adiga Kaligaa yaan Ilaahow Ku caabudeynnaa, oo Adigaan cibaadadeenna kugu gooni yeeleynaa. Adigaanna kaalmo ku weydiisaneynaa(5)**Ihdinaa al ssiraadha al mustaqiima**: jidka toosan nagu hanuuni, jidkaasoo lagu fasiray jidka islaamka iyo Diinta islaamka(6)**Siraadha allathiina ancamta calayhim**: kuwa jidkooda ah aad u nicmeysey, kuwaasoo ah Nabiyada, Rususha Ilaahay soo diray, shuhadada, saalixiinta, dadka wanwanaagsanaa. **Ghayri al maghduubi calayhim**: jidka kuwa loo carooday ghayrkood ah. Kuwa Ilaahay u carooday waxaa lagu fasiray inay yihiin yuhuudda. **Walaa al ddaalliina**: kuwa lumayna aan jidkooda ahayn, kuwaasoo ka baadiyoobay jidkii Ilaahay. Kuwaas jidka Ilaahay ka baadiyoobay waxaa lagu fasiray krishtaanka inay yihiin.

Muslim wuxuu Xadiithkiisa saddex boqol shan iyo sagaashan ku wariyey inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ilaahay Rabbi Al Cizzah ka wariyey Xadiith Qudsi : **"Qasamtu al ssalaata baynii wa bayna cabdii nisfayni, nisfuhaa lii wa nisfuhaa li cabdii. Fa ithaa qaala al cabdu: "Al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina" qaala Allaahu: "xamadanii cabdii." Wa ithaa qaala: " Al Rraxmaani Al Rraxiimi" qaala: "athnaa calayya cabdii." Wa ith qaala: " Maaliki yawmi al Ddiini", qaala: "majjadanii cadii." Wa qaala marratan: "fawwada ilayya cabdii." Fa ithaa qaala: " Iyyaaka nacbudu wa Iyyaaka nastaciinu" qaala: "haathaa baynii wa bayna cabdii wa li cabdii maa sa'ala." Fa ithaa qaala: " Ihdinaa al ssiraadha al mustaqiima siraadha allathiina ancamta calayhim ghayri al maghduubi calayhim walaa al ddaalliina" qaala: "haathaa li cabdii wa li cabdii maa sa'ala."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "salaadda waan qaybiyey, Aniga iyo addoonkeygaan ku dhex qaybiyey. Qayb Anigaa iska leh, qaybna addoonkeygaa iska leh. Addoonkeygu wixii uu i weydiisto ayuu leeyahay. Addoonkeygu markuu yiraahdo Al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina waxaa markaas Ilaahay yiraahdaa "addoonkeygu wuu i mahdiyey". Markuu yiraahdo Al Rraxmaani Al Rraxiimi Illahay markaas wuxuu

yiraahdaa "addoonkeygu waa i ammaanay". Markuu yiraahdo Maaliki yawmi al Ddiini, wuxuu Ilaahay yiraahdaa "addoonkeygu wuu i Sharrifay". Marna wuxuu yiri: "addoonkaygu wuu i talo saartay." Markuu yiraahdo Iyyaaka nacbudu wa Iyyaaka nastaciinu, Ilaahay wuxuu yiraahdaa: "taas Aniga iyo Addonkeygey u dhexeysaa". Markuu yiraahdo Ihdinaa al ssiraadha al mustaqiima siraadha allathiina ancamta calayhim ghayri al maghduubi calayhim walaa al ddaalliina, Ilaahay wuxuu yiraahdaa "taasu addonkeygey u sugnaatay, addoonkeygu wuxuu weydiisto ayuu leeyahay".

Suuraddaan toddobada Aayadood ka kooban waxyaalo waaweyn oo saldhigga caqiidada islaamka ka mid ah ayaa laga faaiideysanayaa. Midda u horreysa waxaad arkeysaa Suuradda in lagu bilaabay Bisinka Ilaahay, sida Suuradaha Quraanka oo dhan loogu bilaabanayo, Suuratul Baraa'ah mooyee. Marka taasi waxay tusineysaa in magaca Ilaahay wax kastoo muhim ah inay habboon tahay in lagu bilaabo, siduu Abuu Daauud Nabiga, Sallaa Allaahu Caleyhi Wasallam, wariyey inuu yiri: **"kullu amrin thii baalin laa yubda'u fiihi Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi aqdhacu"**, oo Xadiith macnihiisu waxaa weeye: "amar kasta oo muhim ah oo aan lagu bilaabin Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi waa naaqus, waana barako yar yahay."

Ilaahay, Subxaanahu Wa Tacaalaa, wuxuu Aayadda toddoba iyo sideetan ee Suuratu Al Xijri Rasuulkiisa Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: **"wa la qad aataynaaka sabcan mina al mathaanii wa Al Quraana al Cathiima."** Aayadda macneheedu waxaa weeye 'Ilaahay wuxuu ku siiyey toddobada lasoo celceliyo iyo Quraanka Weyn". Toddobada lasoo celceliyo waxaa lagu fasiray Faataxada toddobadeeda Aayadood iyo soo celcelinteeda oo akhriska had iyo jeer lagu soo celceliyo. Qofka muuminka ah oo salaadda tukanaya wuxuu Faataxada ku akhriyaa shanta salaadood 17 jeer. Salaad aan Faataxada lagu akhrinna maba ansaxeyso, siduu Al Bukhaarii Xadiithkiisa toddoba boqol lix iyo konton Cubaadah binu Al Ssaamit uga wariyay inuu Nabigeenna Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"laa salaata liman laa yaqra'u fiihaa bi Faatixati Al Kitaabi"**, oo macnihiisu yahay: "Salaad ma laha oo laga aqbali mayo oo ka rogmi mayso, ajarna ku heli mayo salaad aan Faataxada Kitaabka lagu akhrin."

Magacda Faataxada

Al Nawawii wuxuu Al Majmuuc, mujalladka saddexaad bogga laba boqol toddoba iyo toddobaatan ku wariyay inay Faataxadu leedahay toban magac oo kala ah: (Kow) **Faatixatu Al Kitaabi,** oo ah Suuradda Kitaabka laga bilaabo oo lagu furo. (Laba) **Suuratu Al Xamdi,** oo ah Suuradda Ilaahay lagu xamdiyo, oo lagu mahdiyo. (Saddex) **Ummu Al Quraani,** oo macneheedu yahay Quraanka hooyadiis, ayadoo uu cilmiga iyo khayrka Quraanku ku wada sugan yahay. (afar) **Ummu Al Kitaabi,** ahna Kitaabka hooyadiis, looguna bixiyay inay ayadu Imaamka Kitaabka oo dhan tahay, rakca walbana lagu akhriyo, ayna tahay Suuradda Quraanka ugu wayn,

ayadoo uu Abuu Hurayrah yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa wuxuu soo maray Ubayya bin Kacb oo salaad u taagan oo tukanaya, markaasuu u yeeray oo ku yiri: **"tacaala yaa Ubayya"**, oo macneheedu yahay: "kaalay Ubayyow." Markaasuu Ubayya salaadda dedejiyay, kamana uusan bixin, kaddibna uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid oo ku yiri: **"maa manacaka yaa Ubayya an tujiibanii ith dacawtuka, a laysa Allaahu yaquulu: "Yaa ayyuhaa allathiina aamanu istajiibuu Lillaahi wa LilRrasuuli ithaa dacaakum limaa yuxyiikum"?** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "maxaa kuu diiday Ubayyow inaad i yeeshid markaan kuu yeeray oo aad ii timaadid? Oo soo Ilaahay ma uusan oran: "kuwiinna rumeeyeyow, ajiiba Ilaahy iyo Rasuulka markuu idiinku yeero wax idin nooleynaya, oo ah Quraanka?" Waana Aayadda afar iyo labaatanaad ee Suuratu Al Anfaali. Ubayya wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laa jarama, haddaad ii yeertid waan ku ajiibayaa oo kuu imaanayaa xattaa haddaan tukanayo." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"a tuxibbu an ucallimaka Suuratan lam yanzil fii Al Ttawraati wa laa fii Al Injiili wa laa fii Al Zzabuuri wa laa fii Al Quraani mithluhaa?"** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "ma jeceshahay inaan ku baro Suurad aan lagu soo dejin Tawraadda iyo Injiilka iyo Zabuur iyo Quraankaba mid la mid ah?" Markaasuu Ubayya wuxuu yiri: "haa Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu ku yiri: **"laa takhruj min baabi al masjidi xattaa taclamuhaa"**, oo macnihiisu yahay: "ha ka bixin albaabka masjidka jeer aad ogaatid." Markaasna Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u socdaa xagga albaabka masjidka, isagoo doonaya inuu ka baxo, markaasuu markuu albaabka gaaray uu Ubayya ku yiri: "Suuradda ii sheeg Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam istaagay, uuna yiri: **"nacam! Kayfa taqra'u fii salaatika?"** oo macnihiisu yahay: "waa yahay! Ee maxaad salaaddaada ku akhridaa?" Markaasuu Ubayya wuxuu akhriyay Faataxada. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri: **"wa Allathii nafsii bi yadiHi maa unzila fii Al Ttawraaati wa laa fii Al Injiili wa laa fii Al Zzabuuri wa laa fii Al Quraani mithluhaa wa innamaa hiya Al Ssabcu Al Mathaanii allatii ataaniya Allaahu Cazza wa Jalla."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "waxaan ku dhaartay Midkay naftaydu Gacantiisa ku jirto laguma soo dejin Tawraadda, Nabi Muuse lagu soo dejiyay, iyo Injiilka, Nabi Ciise lagu soo dejiyay, iyo Zabuurka Nabi Daauud lagu soo dejiyay, iyo Quraanka toona Suurad ayada la mid ah, waana Al Ssabcu Al Mathaanii oo ah Faataxada, oo toddoba Aayadood ka kooban." Waana Xadiithka Al Bukhaarii ee afar kun afar boqol afar iyo toddobaatan, kuna yaalla Fatxu Al Barii mujalladka sagaal, bogga sideed. (Shan) **Al Ssalaatu**, looguna bixiyay inuu Ilaahay Tacaalaa Salaat ku magacaabay uu u qaybiyay Isaga iyo addoonkiisa, sidaan kor ugu soo aragnay ee Xadiithka Muslim ee saddex boqol shan iyo

sagaashan (Lix) **Al Ssabcata Al Mathaanii**, sidaan kor ugu soo aragnay. (Toddoba) **Al Waafiyata,** oo macnreheedu yahay midda kaamilka ah oo ku filan, looguna bixiyay in dhammaanteed rakca walba lagu akhriyo, oo aan laba rakco loo kala qaybin karin, sida Suuradaha kale la yeelo oo kale. (Sideed) **Al Kaafiyata** , midda kaafiga ah oo rakca walba ku filan in keligeed lagu akhriyo, Suurad kalena ayan ku filnayn in rakco lagu akhriyo Faataxada la'aanteed. Ibnu Kathiir wuxuu tafsiirka Faataxada ku wariyay: **"Ummu Al Quraani ciwadun min ghayrihaa wa laysa ghayruhaa ciwadan minhaa"**, oo macnihiisu yahay: "Ummu Al Quraani waxay cawil celin u tahay oo beddeshaa Suuradaha Quraanka intooda kale, Suurad kalena ayada ma beddesho oo meesheeda ma geli karto." (Sagaal) **Al Asaasu** oo ah asaaska Quraanka sida ibnu Cabbaas looga wariyay oo yiri: "Aasaaskeeduna waa Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi." (Toban) **Al Shifaa'**, looguna bixiyay inay daawo u tahay oo bogsiiso cudurrada jirka iyo kuwa naftaba iyo ruuxa, siduu Al Daarimii uga wariyay Abuu Saciid Al Khudriyyi, ibnu Kathiirna uu tafsiirkiisa ku wariyay, inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Faatixatu Al Kitaabi shifaa'un min kulli summin"**, oo macnihiisu yahay: "Faataxada Kitaabku waxay daawo u tahay oo bogsiisaa sun kasta." Bisinku waa Aayad ka mid ah Faataxada siduu ibnu Khuzaymah Xadiithkiisa afar boqol saddex iyo sagaashan uga wariyay Caa'ishah oo tiri: "Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi wuu akhrin jiray wuxuuna u tiriyay Aayad Faataxada ka mid ah." Al Tarmatii wuxuu ibnu Cabbaas ka wariyay, waana Xadiithkiisa laba boqol shan iyo afartan, inuu yiri: "Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,wuxuu Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi wuxuu u akhrinayay si jahri ah oo la maqlayo." waana in loo akhriyaa si la maqlayo, waana salaadda jahriga ah.

Xirziga ama qardhaasta la xirto

Xirziga qoorta lagu xirto oo shaydaanka la isaga ilaaliyo way bannaan tahay in la xirto, saxaabada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaana laga dhaxlay.

Al Imaamu Al Nawawii wuxuu Al Majmuuc, mujalladka labaad, bogga sideed iyo sideetan ku yiri: "Abuu Cumar bin Al Salaax wuxuu fatwo ku yiri: "way bannaan tahay in la xirto xirziyo ay ku dhigan yihiin Quraan, ayna xirtaan haweenka, caruurta iyo ragaba." Wuxuu kaloo yiri: "waana inay iska ilaaliyaan oo ayan musqusha la gelin. Warqadduu Quraanku ku dhigan yahayna waxaa lagu duubayaa shumac (ama harag ama qalin ama dahab hadday dumar xiranayaan, sida hadda la yeelo). Sababtuna waxay tahay inuusan jirin nas diidaya in xirziyada la xirto." Ibnu Jariir Al Dhabarii wuxuu isaguna ka wariyay Imaam Maalik inuu sidaasoo kale yiri, wuxuuna yiri: "Maalik wuxuu yiri: "xumaani kuma jirto waxa loo xiro haweenka dhiigga qaba iyo caruurta oo Quraanka ah, haddii la dhex geliyo warqadday ku dhigan yihiin bir ama harag lagu ilaalinayo." Inay taasu bannaan tahayna waxaa u daliil ah Xadiithka uu Camr bin Shucayb (oo ah Abuu Muxammad Camr bin Shucayb bin Muxammad ibnu Cabdu Allaahi

bin Camr bin Al Caas Al Qurashiyyi Al Ssahmiyyi Al Madanii) ka wariyay aabihiis oo ka wariyay awoowihiis, oo ah Cabdu Allaahi bin Camr, inuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu bari jiray inay markay cabsadaan ama naxaan kalimaatkaan ku ducaystaan: **"acuuthu bi kalimaati Allaahi al ttaamati min ghadabihi wa sharri cibaadihi wa min hamazaati al sh-shayaadhiini wa an yaxduruuna."** Ducada macneheedu waxaa weeyey: "waxaan ka magan galay oo aan isku ilaaliyay hadalka Ilaahay (oo uu al caalimu al callaamah Muxammad bin Callaan Al Ssiddiiqii al shaaficii al ashcarii al Makkii oo la oofsaday kun toddoba iyo konton Hijriga, Allaha u naxariistee, oo dhigay kitaabka Kitaabu Al Futuxaatu Al Rrabbaaniyyah calaa Al Athkaari Al Nawawiyyah, oo afar mujalla oo waawayn oo qiimo badan ka kooban, mujalladka labaad, juzka afaraada bogga lix iyo afartan ku yiri: "waxay ixtimaaleysa inuu hadalkaan Ilaahay yahay Magacda Ilaahay ee suusuuban iyo kutubbadiisa lasoo dejiyay, kuwaasoo la isku ilaaliyo, uuna ku sifeeyey kalimaat taam ah ayagoo ah hadalka Ilaahay oo ka maran naaqusnimo iyo wax ka hor imaanaya iyo khilaafba".) anigoo ka magan galay caradiisa iyo sharta addoommadiisa, iyo waswaasinta shayaadiinta iyo inay shayaadiintu ii yimaadaan." Camr bin Shucayb wuxuu yiri: "Cabdu Allaahi bin Camr bin Al Caas wuxuu ducadaas la isku ilaaliyo bari jiray caruurtiisa inta garadka gaartay . Intaan garadka gaarin oo aan garannaynna intuu dhigo ayuu luqunta ugu xiraa." Xadiithkana waxaa wariyay Abuu Dauud oo ku wariyay kitaabu al dhibbi, waana xadiithka saddex kun sideed boqol saddex iyo sagaashan. Waxaa kaloo wariyay Al Tirmithii, oo ku wariyay al dacwaati, waana xadiithkiisa saddex kun shan boqol sideed iyo labaatan. Waana Xadiith Xasan ah." Waa intaas warka Al Nawawii.

Al Ruqyah waxaa la yiraahdaa waxa dadka buka lagu akhriyo si cudurkaas Ilaahay uga qaado oo ay ku bogsoodaan, waana bannaan tahay, waana waxay soomaalidu u taqaanno tufidda, sidaan ugu soo aragnay Xadiithka Abuu Saciid Al Khudriyyi. Al Bukhaarii wuxuu Caa'ishah ka wariyay inay tiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu rukhseeyey in la isaga tufo kulli wax kasta oo sun leh." Waana Xadithka Al Bukhaarii ee kitaabka al dhibbi ee toddoba kun shan boqol kow iyo afartan, iyo kan Muslim, Baabu Al Ssalaami ee laba kun boqol saddex iyo sagaashan. Muslim wuxuu Caa'ishah ka wariyay inay tiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu igu amray inaan isha, waana isha la isku cawriyo xumaanta, isaga tufo." Waana Xadiithkiisa laba kun boqol shan iyo sagaashan, iyo Xadiithka Al Bukhaarii shan kun toddoba boqol sideed iyo soddon. Abuu Daauud (Baabka xirashada xirziyada saddex kun sideed boqol saddex iyo sideetan) wuxuu wariyay inay Zaynab haweenta Cabdu Allaahi bin Mascuud ka warisay Cabdu Allaahi bin Mascuud inuu yiri: "waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo leh: "inna al al rruqaa wa al tamaa'ima wa al biwalata shirkun", oo macnihiisu yahay: "Tufidda iyo tamaa'imta iyo sixirkay u sameeyaan inuu ninku haweentiisa jeclaado waa

shirki." Markaasay Caa'ishah waxay tiri: "maxaad sidaas u leedahay oo wa Allaahi ishaydu way dhaqdhaqaaqi jirtay, markaasaan waxaan ku noqnoqon jiray hebel kan yuhuudiga ah oo igu tufi jiray. Markaasuu markuu tufka igu akhriyo ayaan xasilaa." Cabdu Allaahi wuxuu yiri: "taasu waxay ahayd camalka shaydaan oo gacantiisa ku nuuxnuuxiya oo markuu ruqyada ku akhriyo uu ka joogsadaa. Waxaana kugu filnayd inaad tiraahdo siduu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oran jiray, oo ah**: "ath-hib al ba'sa Rabba al nnaasi, ashfi Anta Al Sh-shaafii laa shifaa'a illaa shifaa'uka, shifaa'an laa yughaadiru saqaman"**, oo ducada macneheedu waxaa weeye: "xanuunka qaad Rabbiga dadkow, oo bogsii oo Adigaa ah Midka wax bogsiiya, bogsiin aan cudur soo dhex galayn oo ku jirin." Abuu Cubaydah wuxuu yiri: "al biwalatu waa midka haweenta ninkeeda jecel siiya, wuxuuna ka mid yahay, waa waxaas uu sameynayee, sixirka. Sidaasuusan u bannaanayn. Al Riqaa'u iyo al tamaa'imuse ujeedadoodu waxaa weeye in la iska reebay waxaan lagu oran afka Carabiga oo aan la aqoon wuxuu yahay." Al Bayhaqii wuxuu yiri: "Al Tamiimatu waxaa la yiraahdaa aleel, taasoo ay luqunta ku xiran jireen, ayna u arki jireen inay xumaanta ka reebeyso." Al Bayhaqii wuxuu Cutbah bin Caamir ka wariyay (9/350) inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"man callaqa tamiimatan falaa atamma Allaahu lahu, wa man callaqa wadacatan falaa wadaca Allaahu lahu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "qofka aleel luqunta ku xirta Ilaahay taam ugama dhigo, qofka aleesha cad oo baddu soo tufto, oo markay caariso oo ay dib u noqoto xeebta uga tagto, oo sidaasba wadacah loo yiri ayadoo ay baddu xeebta dhigtay oo uga tagtay, halkaasoo ay wadiicah ka timid oo ah waxa la isu dhiibto oo la isu amaanaysto, luqunta ku xirtana, oo caruurtay luqunta ugu xiri jireen zamanka jaahiliyada ayagoo in la ilaysto uga baqaya, Ilaahay wuxuu ka baqanayo ugama khafiifiyo, siduu Ibnu Athiir ugu sharxay Al Nihaayah". Al Bayhaqii wuxuu yiri: "ka reebiddaan iyo kahashada ku dhaqankeeda iyo waxa la midka ahba wuxuu ixtimaalayaa in laga reebay qofka luqunta ugu xiranaya isagoo u arka inuu ku helayo caafimaad taam ah, cudurkuna uga zuulayo, siday rumaysnaayeen zamanka jaahiliyada. Qofkase xirziga u xiranaya xusidda Ilaahay Tacaalaa , isagoo isla markaasna ogsoon inuusan cudurka qaadin oo bogsiin Ilaahay mooyee, markaas xumaani kuma jirto in la xirto isagoo ka barakaysanaya." Al Bayhaqii wuxuu kaloo Caa'ishah ka wariyay (9/350) inay tiri: "Tamiimah ma aha waxa luqunta lagu xirto intayan balaayadu imaan ka hor, ee tamiimada (la diidayo) waa midda luqunta lagu xirto kaddib markay balaayadu soo degatay ayadoo lagu doonayo in maqaadiirta lagu celiyo." Al Bayhaqii (9/351) wuxuu isnaad saxiix ah uga wariyay Saciid bin Al Musayyib inuu amri jiray in Quraanka luqunta lagu xirto.

Caruurta iyo ghayrkoodba waxa lagu ilaaliyo

Caruurta aan Quraanka akhrin karin, ducooyinkana aan korka ka aqoon iyo ghayrkoodba waxaa shaydaanka looga ilaaliyaa ayadoo xirzi loo xiro, oo

ama luqunta loo suro, ama cududaba, siday reer Banaadir yeelaan oo kale. Xirziga waxa lagu dhigayaa oo keli ah Quraan iyo ducooyin Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga dhaxlay. Quraankana, waxaa lagu dhigi karaa, tusaale ahaan, Bisinka Ilaahay, Faataxada, Aayatu Al Kursiga, Qul Huwa Allaahu, Qul Acuuthu bi Rabbi Al Falaqi iyo Qul acuuthu bi Rabbi al nnaasi, iyo Quraan kaleba, iyo ducooyinka ay ka mid yihiin kuwaan kitaabkaan ku warinnay.

Al Bukhaarii wuxuu ibnu Cabbaas ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wiilashiisa Al Xasanu iyo Al Xusaynu ku magan gelin jiray**: "uciithukumaa bi kalimaati Allaahi al taammati min kulli shaydhaanin wa haamatin wa min kulli caynin laamatin** wa yaquulu **"inna abaakum yucawwithu bihaa Ismaaciila wa Isxaaqa Sallaa Allaahu Calayhim ajmaciina."** Ducada macneheedu waxaa weeye: ""waxaan idin magan galiyay oo aan idinku ilaaliyay hadalka Ilaahay (oo uu Al Ssiddiiqii yiri: "waxay ixtimaaleysa inuu hadalkaan Ilaahay yahay Magacda Ilaahay ee suusuuban iyo kutubbadiisa lasoo dejiyay, kuwaasoo la isku ilaaliyo, uuna ku sifeeyey kalimaat taam ah ayagoo ah hadalka Ilaahay oo ka maran naaqusnimo iyo wax ka hor imaanaya iyo khilaafba".), idiinkana magan geliyay shaydaan kasta, oo jinni ah ama insiba, iyo daabad kasta oo sun wax disha leh, sida abeesada iyo xasharaadka dhulka ku socda oo idil oo dhibaato iyo xanuun keena, iyo il kasta oo xumaan wax ku fiirisa oo qofkay fiiriso xanuun iyo waalli u keenta." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiraahdaa: "aabihiin, oo ah Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, ayaa wuxuu ku magan gelin jiray oo ku ilaalin jiray Ismaaciil iyo Isxaaq Sallaa Allaahu Calayhim ajmaciina."

Siday Quraanka iyo ducadu jirka shaydaanka u saameeyaan

Ilaahay Tacaalaa wuxuu Quraanka iyo carrabka Rasuulkiisa Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, nagu siiyay hub aan ibliis iyo dhashiisa isaga ilaalinno, oo aan isaga celinno, oo shayaadiintu markay maqlaan Quraanka iyo ducada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga dhaxlay iyo tufiddaba dhibaataa gaarta wayna cararaan. Wuxuu kitaabka aakaamu al murjaani ku wariyay inuu Qays bin Al Xajjaaj yiri: "shaydaankaygu wuxuu igu yiri: "waxaan ku galay anigoo rati le'eg, hadana waxaan dhexdaada ku jiraa maanta anigoo shinbir le'eg." Waxaan iri: "maxayna taasu sidaas ku noqotay?" Wuxuu yiri: "waxaad igu dhalaalisaa (waana sida cusbada biyaha loogu dhalaaliyo oo kale) Kitaabka Ilaahay Cazza wa Jalla." Wuxuu kaloo Cabdu Allaahi ka wariyay inuu yiri: "shaydaanka mu'minka ahi waa caato." Wuxuu kaloo Abuu Hurayrah ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"inna al muminu yadnii** (waa daadka ku xiga saadka) **shaydhaanahu kamaa yadnii axadukum baciirahu fii al ssafari"**, oo macnihiisu yahay: "qofka mu'minka ahi wuxuu shaydaankiisa u caateeyaa si xoog leh, una tabar yaraadaa oo u bokoodaa, si la mid ah siduu midkiin ratigiisa u caateeyo markuu ku safro oo uu wayd u noqdo." Wuxuu kaloo Khaalid Al

Waalibii ka wariyay inuu yiri: "anigoo ehelkaygu ila socdo ayaan soo aadnay Cumar Allaha u naxariistee. Markaasaan meel dariiqa ka mid ah degnay, ayadoo ay haweentayduna gadaashayda joogto. Markaasaan waxaan maqlay codadka caruurta iyo qayladooda. Markaasaan Quraanka cod kore ku akhriyay, oo aan markaas maqlay sharqanta wax dhulka lagu tuuray. Markaasaan caruurta weydiiyay, waxayna yiraahdeen: "shayaadiinta ayaa na qabatay oo nagu cayaartay. Markaasay markaad Quraanka cod kore ku akhriday ayay na tuureen oo ay tageen."

Shaydaanku wuxuu la jiraa kan jamaacada ka leexda

Qofka muslimiinta madowgooda gooni uga baxa, oo arrimaha Diinta ku khilaafa waxaa la jira shaydaan. Al Imaamu Al Shaaficii iyo Al Imaamu Axmad waxay Cumar bin Al Khadh-dhaab ka wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"man araada minkum buxbuuxata al jannati falyalzimi al jamaacata, fa inna al sh-shaydhaana maca al waaxidi, wa huwa mina al ithnayni abcadu."** Kanna waa lafdiga Axmad. Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "qofka doonaya bartamaha jannada inuu dego, ha laazimo oo la jiro jamaacada muslimiinta, oo shaydaanku wuxuu la jiraa qofka keligiis ah, labada qofna wuu uga fog yahay intaas." Al Imaamu Al Shaafici wuxuu Xadiithkiisa oo intaan ka dheer ku fasiray inay laazimiddaasu tahay inuu waxay jamaacada muslimiintu tiraahdo inay xalaal yihiin uu xalaal ahaan u qaato, waxay waa xaaraan yiraahdaaanna uu xaaraan u qaato oo ka reebtoomo. Jamaacada muslimiinta laga waayo mayo qof Aayad macneheeda yaqaanna ama Xadiithba, oo hadduusan mid aqoon mid kale ayaa yaqaanna. Firqooyinkase intaasba waa laga helayaa iyo waxaan Aayadda iyo Xadiithkaba aqoon ama macnohoodaba. Wuxuu kaloo wariyay Xadiith kale oo sugaya inay ducada ay jamaacada muslimiintu ku Alle baryayaan ay hareerohooda oo idil shaydaanka ka ilaalinayso iyo waswaasintiisaba, oo Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"ducaa'uhum taxiidhu min waraa'ihim"**, oo ah inay ducadoodu waswaasinta shaydaan ka ilaalinayso. Axmad wuxuu kaloo Curfujah ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri**: "yadu Allaahi calaa al jamaacah, wa al sh-shaydhaanu maca man yukhaalifu al jamaacah"**, oo macnihiisu yahay: "Gacanta Ilaahay waxay tahay korka jamaacada, shaydaankuna wuxuu la jiraa kan jamaacada khilaafa." Riwaayada kalena waxay warisay: **"Yadu Allaahi maca al jamaacah"**, oo ah: "Gacanta Ilaahay waxay la jirtaa jamaacada." Aayado Quraan ah oo badanna arrinkaan way ka hadleen.

Shaydaanku wuxuu jecel yahay acmaasha xun

Aakaamu al murjaani wuxuu Abuu Muusaa Al Ashcarii ka wariyay inuu yiri: "markuu waagu baryo ayuu ibliis ciidammadiisa kala diraa, wuxuuna ku yiraahdaa: "qofka muslin baadiyeeya waxaan u labisayaa oo aan madaxa u saarayaa taaj." Markaasuu midkood wuxuu ku yiraahdaa, waana markay galabtii shaqada kasoo laabtaan oo ay ibliis warbixin siinayaan: "hebel waan ku waday ilaa uu haweentiisa ka furay". Markaasuu ibliis

wuxuu ugu jawaaba; "waxaa dhici karta inuu dhowaan guursado." Mid kalaa wuxuu yiraahdaa: "hebel ayaan ku waday ilaa uu labada dhashay caaq ku noqdo oo uu caasiyo." Markaasuu ibliis wuxuu yiraahdaa: "waxaa dhici karta inuu dhowaan hadana baarri u noqdo." Markaasuu mid kale wuxuu yiraahdaa: "hebel waan ku waday ilaa uu khamro ka cabo." Markaasuu ibliis wuxuu ku yiraahdaa: "adigaa hawl fiican soo qabtay." Midk kalaa wuxuu yiraahdaa: "hebel waan ku waday ilaa uu ka zinaysto." Markaasuu ibliis wuxuu yiraahdaa: "adigaa hawl fiican soo qabtay." Mid kalaa wuxuu yiraahdaa: "hebel waan ku waday ilaa uu qof ka dilo." Markaasu ibliis wuxuu yiraahdaa: "adigaa hawl fiican soo qabtay." Musulim wuxuu Jaabir ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"inna carsha ibliisa calaa al baxri, fa yabcathu saraayaahu. Fa yaftinuuna bayna al nnaasi. Fa acthama fitnatan yajii'u axaduhum fa yaquulu facaltu kathaa wa kathaa. Fa yaquulu maa sanacta shay'an. Thumma yajii'u axaduhum fa yaquulu facaltu katha wa kathaa. Fa yaquulu maa taraktuhu xattaa farraqtu baynahu wa bayna imra'atihi. Fa yudniihi minhu, wa yaquulu: "nacam anta thaaka allathii tastaxiqqu al ikraama."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "carshiga ibliis wuxuu saaran yahay badda. Markaasuu duullaannadiisa soo diraa, oo ay markaas dadka fitneeyaan. Markaasay fitnada ugu wayn uu midkood keenaa, markaasuu yiraahdaa: "waxaan sameeyey kaas iyo kaas." Markaasuu ibliis wuxuu ku yiraahdaa: "waxba ma aadan samayn." Markaasuu mid kale u yimaadaa oo ku yiraahdaa: "waxaan sameeyey kaas iyo kaas." Wuxuuna yiraahdaa: "kamana aanan soo tegin jeer aan kala geeyey oo kala furay isaga iyo haweentiisa." Markaasuu ibliis midkaan soo dhoweystaa, uuna yiraahdaa: "haa oo adigaa ah midka mutaystay in la karaameeyo." Wuxuu kaloo wariyay oo yiri: "Sulaymaan bin Daauud, waana Nabi Sulaymaan, ayaa wuxuu cifriit jinniga ka mid ah ku yiri: "war hooge, mee ibliis?" Wuxuu cifriitku ku yiri: "Nabiga Ilaahayow, ma wax isaga ku saabsan ayaa lagu soo amray?" Wuxuu yiri: "maya, ee xagee buu joogaa?" Wuxuu yiri: "hadaba anigaa kuu geynayee isoo raac." Markaasuu hor socday oo uu badda la qaaday, uuna u keenay ibliis oo kadiifado biyaha korkooda saaran ku fadhiya. Markaasuu markuu Sulaymaan arkay ayuu ka baqay oo uu u istaagay, uuna ku yiri: "Nabiga Ilaahayow, ma wax aniga igu saabsan ayaa lagu soo amray?" Wuxuu yiri: "maya, waxaanse kuugu imid inaan ku waydiiyo kuu yahay shayga aad ugu jeceshahay oo uu Ilaahayna Cazza wa Jalla ugu neceb yahay?" Ibliis wuxuu yiri: "wa Allaahi haddaadan ii soo safri lahayn oo aadan ii soo lugayn lahayn kuuma sheegeen. Ma jiro shay uu Ilaahay Tacaalaa ka neceb yahay inuu ninku ninka u tago, waana khaniisnimada, haweentuna ay haweenta u tagto." Sunnaduna waa in khaniiska la dilo, labadoodaba, oo waxay Al Nasaa'ii iyo ibnu Maajah ka wariyeen Cikrimah inuu ibnu Cabbaas wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"man wajadtumuuhu yacmalu camala qawmi luudhin fa uqtuluuhu al faacala wa al mafcuula bihi"**, oo macnihiisu yahay:

"qofkaad heshaan isagoo falaya camalka qawmu Luudh dila, kana samaynaya iyo midka lagu samaynayaba."

Hubkuu shaydaan dadka u adeegsado

Shaydaan wuxuu ku isticmaalaa hub uu dadka ku fitneeyo, ayna ka mid yihiin haweenka, bakhiilnimada, xaasidnimada, adduun jacayla, carada, khamrada, beenta iyo kuwo kaleba.

Aakaamu al murjaani wuxuu Cabdu Allaahi bin Mascuud ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"al mar'atu cawratun wa innahaa ithaa kharajat istashrafahaa al sh-shaydhaanu, fa laa yakuunu abadan aqraba ilaa Allaahi Tacaalaa minhaa ithaa kaanat fii qacri baytihaa."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "haweentu waa cawro, oo hadday kasoo baxdo gurigeeda ayuu shaydaanku ilaashadaa. Ebedkeedna haweenta mar ay uga dhow Ilaahay Tacaala ma jirto markay ku sugan tahay salka gurigeeda, oo ah qolkay seexato." Wuxuu kaloo Xusayn bin Saalix ka wariyay inuu yiri: "waxaan maqlay shaydaan oo haween ku leh: "adigu waxaad tahay nus askartayda, waxaadna adigu tahay fallartayda aan gano oo aanan la gafin, waxaadna tahay middaan sirtayda ku kaydsado iyo ergayda aan xaajadayda u dirsado." Wuxuu kaloo wariyay inuu Maalik bin Diinaar yiri: "madaxa dambigoo idil waa jacaylka adduunka, haweenkuna waa dabinka shaydaan." Wuxuu kaloo ibnu Cabbaas ka wariyay inuu yiri: "shaydaanku wuxuu ninka uga jiraa, oo uu xooggiisa saaray weeyey, saddex meelood oo kala ah labadiisa indhood, iyo qalbigiisa iyo thakarkiisa. Haweentana wuxuu uga jiraa saddex meelood oo kala ah labadeeda indhood, iyo qalbigeeda iyo barideeda." Wuxuu kaloo Samurah bin Jundub ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"lilsh-shaydhaani kuxlan wa lucuuqan, fa ithaa kaxala al insaana min kuxlihi thaqulat caynaahu, wa ithaa alcaqahu min lucuuqihi daraba lisaanahu bi al sharri."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "shaydaanku wuxuu leeyahay indho kuul iyo calyo. Markaasuu qofkuu indha kuushiisa ugu indha kuulu ay labadiisa indhood culusaadaan, oo ah siduu al Xasan u yiri indha kuushiisu waxaa weeye wuxuu seexdaa marka thikriga la hayo. Hadduu calyadiisa leefiyana carrabkiisu wuxuu bartaa oo ku hadlaa wax xun, oo uu Al Xasn yiri inuu shaydaanku weel ay calyadu ugu jirto leeyahay, weelkaasoo ah sheegidda beenta."

Carada

Wuxuu kaloo Wahab bin Munabbah ka wariyay inuu yiri: "waxaa jiray nin caabid ah oo degmaysta, markaasuu shaydaan doonay inuu fitneeyo, wuuse kari waayey. Markaasuu wuxuu ninkaas ku yiri: "maad i weydiisid waxaan banii aadanka ku lumiyo?" Wuxuu yiri: "ii sheeg waxay naftaadu ugu kalsoon tahay inaad ku baadiyeysid." Ibliis wuxuu yiri: "waa bakhaylnimada iyo carada iyo sakraannimada. Hadduu ninku bakhiil yahay, maalkiisa ayaan indhiisa ku yaraynnaa oo uu u arkaa inuu maalkiisu yar yahay, oo aan markaas maalka dadka kale damac ka gelinnaa. Markuu caroodana waxaan ugu cayaarnaa oo aan isugu dhiib dhiibnaa siday

caruurta cayaaraysa kubbadda isugu dhiib dhiibaan oo kale oo hadduu yahay mid ducadiisa maydka kusoo nooleeya kama quusanno. Markuu sakhraamana waxaan u hoggaaminnaa shahwa kasta si la mid ah sida ceesaanta loo hoogaamiyo inta dhegta la qabto oo kale." Wuxuu kaloo Khaythamah ka wariyay inay oran jireen inuu shaydaanku yiri: "sidee buu iiga adkaan karaa ina Aadan, oo markuu raalli yahayna intaan u imaado ayaan qalbigiisa degaa, markuu caroodana madixiisa ayaan degaa." Riwaayad kalena wuxuu ku yiri: "ina Adan markuu caroodo intaan sida ratiga oo kale sanka uga duleeliyo oo aan dugaagad gashado oo aan dugaagadda xarig geliyo, ayaan dhabarka ka fuulaa sida ratiga dhabarka looga fuulo oo kale, oo aan markaas u hoggaamiyaa meeshaan doono, uuna i adeecaa oo uu sameeyaana waxaan doonayo inuu sameeyo." Shaydaanku wuxuu qofka caraysan ku xambaaraa inuu ku hadlo wuxuu hadhow kahanayo oo ka shallaynayo, uuna waxaas u leeyahay inuu kulayka iyo dabka carada isaga damiyo oo ku qaboojiyo. Shaydaanka waxaa laga abuuray dab, dabkana biyaa lagu damiyaa oo qofku markuu caroodo ha wayseysto, siduu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **''inna al ghadaba mina al sh-shaydhaani, wa inna al sh-shaydhaana mina al nnaari, wa innamaa tudhfi'u al nnaaru bi al maa'i, fa in ghadaba axadukum falyatawadda'.''** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: " caradu waxay ka timaadda shaydaanka, shaydaankana waxaa laga abuuray dab, dabkana waxaa lagu damiyaa biyaha. Marka, hadduu midkiin caroodo ha wayso qaato."

Shaydaan, Allaha lacnadee, riyaan ku arkay

Sanadka kun afar boqol kow iyo labaatan Hijriga, una dhiganta laba kun miilaadiga ayuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu igu mannaystay inuu iigu nicmeeyey inaan xajjiyo. Jamaacadaan la socday waxaan ku hormarnay Al Madiinah Al Munawwarah oo aan Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo booqannay, kaddibna aan xajinnay. Waxaan Al Madiinah ku nimid dayuurad aan Jiddah kasoo raacnay habeennimo, kaddib marka salaadda cishaha la tukaday. Waxaan qolalkeenna galnay waqti dambe oo habeen barkii ah. Waanna daallanayn, annago laba maalmood iyo laba habeen safar kusoo jirnay, oo maalinta koowaad waagu noogu dillaacay London, annagoo habeenka ka horreeyay soo guuraynnay, annago maraykanka kasoo ambabaxnay. Waaga labaadna wuxuu noogu baryay Jiddah annagoo habeenka ka horreeyey soo guuraynnay. Waxaan ku degannay hoteel la yiraahdo Al Dakhiil, oo qofka deggani uu guriga Nabigaba, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uba jeedo ayna ka xigaan xabaalaha Baqiicu Al Ghardaq, oo qofka isagoo hurda salaadda loo aathaano intuu ka kaco oo uu waysaysto uu salaadda oo aan loo iqaamin masjidka tegi karo.

Markaasaan seexday, anigoo doonaya inaan salaadda subax ku tukado masjidka. Markaasaan aathaanka hortiis waxaan ku riyooday shaydaan muuqaalka abeeso wayn leh intay lugtayda bidix kor fuushay ay xagga lugtayda midig u gudubtay oo ay hoosteeda soo martay, ayna bawdadeyda

bidix kasoo hoos baxday, ayadoo dabadeedu weli lugtayda bidix cagtayda iyo dhudhunkayga saaran tahay. Kaddibna waxay madexeeda keentay bawdadayda midig misigtayda hoosteeda. Markaasay ilkeheeda halkaas hilibkayga gelisay oo ay i qaniintay. Intaas ay i qaniinayso oo ilkeheedu hilibkayga ku jiraan, wajigeedu wuxuu kusoo jeeda wajigayga, oo ay sidaas indheheedu indhahayga ugu taagan yihiin. Midabka indheheedu wuxuu ahaa bunni khafiif oo uusan wax madaw ah ku jirin, mana libiq sanayso oo indheheedu kuwaygay ku taagan yihiin. Wajigeedu wuxuu u eg yahay wajiga dadka banii aadanka ah oo yar, oo waji, indho, san, laba dhegood, laba dhaban leedahay, iyo laba bashimood. Waxaan arkay inay shaaribbo khafiif ah lahayd, oo sidaasaan ugu qaatay inuu nin yahay. Wajigiisa waxaa ku daaran oo danka bidixdayda uga imaanaya nal wajgiisa si fiican ii tusaya. Ninkaasu wuu dheeraa, oo waa tuuba isku kay duubay. Dhumucdiisuna way waynayd, oo bawdadaydaba wuu ka dhumuc waynaa oo ka waynaa. Midabkiisuna wuxuu ahaa cagaar, mirir oo kale ku qasan yahay, sida birta mirirtay oo kale. Haraggiisuna wuxuu ahaa harag carfad ah, oo aan sulub ahayn, oo wuxuu lahaa kulligiis finan yaryar oo musbaar yar madixiisa le'eg oo haragga kasoo kuuskuusan. Isaguna ilama hadlin, aniguna lama hadli. Markaasaan anigoo weli hurda waxaan ku farxay inuusan dhanka bidixda ah oo qalbigu iigu yaallo uusan iga qaniinin. Isagoo sidaas iigu duuban oo ii qaniinsan ayaa salaadda subax loo aadaamay. Markaasaan kici waayay, anigoo maqlaya, anigoo garanaya inuu shaydaanku doonayo inuu salaadda iga reebo. Kaddibna salaadda ayaa loo aqiimay. Markaasaan kici waayay. Sidaasay salaadda subax oo aan masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, jamaacada la tukado subaxaas igu seegtay. Shaydaan, Allaha lacnadee, waa cadaw run ah, Ilaahay ayaanna ka magan galnay.

Jahannama riyaan ku arkay

Waxaan ku riyooday naarta jahannama, Allaana ka magan galaye. Waxaan arkay inay ciidda dhulkeedu yahay quruuxux leg le'eg xabbado mesoggo ah, meseggada xabbado waynta ah, oo bir ka samaysan midabka boorka birtana leh. Dhulkeeda waxaa kasoo baxaya uumi. Il qabadkaygana waxaan ku arkay saddex dab oo holcaya, oo holocoodu samada aad kor ugu kacay. Saddexdaas holac waxay ku kala yaallaan saddex jiho oo kala duwan. Markaasaan waxaan arkay nin aan aqiinnay, oo dhintay, intuu adduunkaan ku noolaana oran jiray inuusan Ilaahay jirin. Markaasaan waxaan ninkaas ku iri: "na keen oo kasoo bax meeshaan kulaylkeeda." Ninkaasu wuxuu siday saddex dhuumood oo bir ah, oo midna uu ku sito kilkisha bidixeed, labana uu gacnaha ku sido oo uu dhulka ku jiidayo, wuxuuna labbisnaa surweel iyo shaati. Markaasuu wuxuu yiri: "dhuumahaan ayaan dabkaas kusoo dhalaalinayaa." Markaasuu halkaas iyo dabka holcaya aaday. Aniguna aan Ilaahay xamdigiis ka gaddoomay.

Sidaasu kitaabku ku dhammaaday wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina wa Sallaa Allaahu Calaa Xabiibii Muxammadin, wa Calaa Aalihi wa Sallam Tasliiman kathiiran, bi abii wa ummii anta Rasuulkow.

Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan wuxuu ku dashay Gaalkacyo degmadaasoo uu aabihiis qaalli ka ahaa, dayrtii la magac baxday Hoobaaq. Hoobaaq waa beel daaqsiin ah oo ka mid ah dooxada Golol, halkaasoo ay eedi ku kala gaartay labada qabiil ee Cumar Maxamuud iyo Sacad dayrtaas, eedaasoo bilaabatay 1943 socotayna ilaa 1944. Xasanweli wuxuu u dhashay Shiikhaal Looboge, oo ah Quraysh, ayagoo ah ubadka Abuu Bakar Al Ssddiiqu, Saaxiibka iyo ina adeerka iyo soddogga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Looboge aabihiis Fiqi Cumar wuxuu ku noolaa Boqortooyada Harar siday u warisay tirada lix boqol iyo sagaal iyo afartan ee wargeyska dalka Sucuudiga kasoo baxa ee la yiraahdo Al Muslimuuna, soona baxay maalinta Jimce ee toddobada bisha Rabiicu al Awwal ee sanadka Hijriga ah ee kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhigantah kow iyo tobanka bisha Luulyo ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashanka, boggiisa tobanaad. Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shiikh oo maqaaladaas qoray wuxuu ku yiri: "Kaddib markay saliibiyiinta krishtaanka ahi ay gacanta ku dhigeen Bayti Al Maqdis, dhammaadka qarniga shan iyo tobnaad ee Miilaadiga ah iyo dhammaadka kan shanaad ee Hijriga, ayna ku sugnaadeen Shaam, ayna gacanta ku dhigeen Khaliiju Al Caqabah ee ku dara Badda Cas, ayay krishtaanku waxay raadiyeen cid ay is gaashaanbuursadaan, oo Badda Cas xagga koofureed uga goysa. Markaasey waxay heleen xabshada krishtaanka ah oo ay markaas gaashaanbuur la noqdeen, ayna kula heshiiyeen inay iska kaashadaan la dagaallanka islaamka iyo muslimiintaba, kuna gaaray taas inay xabashadu kusoo duusho oo ay qabsato Boqortooyada Islaamka ee Harar, taasoo gogol dhig u noqoneysa ku duulidda Xijaaz iyo duminta Kacbada la Sharfay. Sidaas ayayna ku heshiiyeen. Markaasey xabashadu waxay kusoo duushay Harar, waxaana usoo baxay oo ka hortegey Al Shiikh Abaadir oo soomaalidu u taqaanno Fiqi Cumar, ahna aabaha dhalay Aw Qudhub. Markaasuu Amiir Cumar bin Shamsu Al Ddiin (oo ah Fiqi Cumar) si xun u jebiyay oo ka adkaaday. Markaasey xabshadu waxay ka gargaar iyo gurmad dalbeen gaashaanbuurtooda krishtaanka ah. Qaylo dhaankoodaas waxaa kasoo jawaabay Richard the Lion-heart oo ahaa boqorka ingiriiska, ahaana maareeyaha hawlaha ka socday bariga dhexe "Bariga Carabta". Richard wuxuu soo diray ciidammadiisa ka kooban burtuqiis iyo talyaani, si ay xabashada ugu gargaaraan. Ciidammadaani waxay gacanta ku dhigeen oo qabsadeen dekadaha ay Harar lahayd oo ah Zaylac iyo Barbara iyo Bulaxaar, kuwaanoo hadda ku yaalla gobolka waqooyi ee Jamhuuriyada Soomaaliya. Ciidammadaasu waxay soo gareen ilaa dusha magaalada Harar. Markaasey Imaarada Makkah Al Mukarramah iyo Yaman ayay waxay Harar usoo direen ciidammo gurmad ah. Sidaas ayay ciidammada Islaamku uga adkaadeen kuwa krishtaanka ah, uusanna krishtaamiinta Shaam uga laaban hal askariba ha ahaadee, ayadoo dhammaantood lagu laayey inta u dhexeysa Harar iyo Muqdisho iyo Barbara. Muqdisho waxay Harar usoo dirtay gurmad ahaan fardo iyo hub." Xasanweli wuxuu 1970 ka

qalin jebiyay Jaamacadda Bologna ee dalka Talyaaniga halkaasoo uu ku bartay takhtarnimada xoolaha. Kaddib wuxuu noqday macallin Dugsiga Sare ee Xasan Barsane ee Muqdisho, Macallin Kulliyada Daawada Xoolaha ee Jaamacadda Qaranka Soomaaliyeed, Xildhibaan Golaha Shacbiga Qaranka ee Soomaaliya, Danjiraha Soomaaliya ee Dawlado Yurub ah, kaddibna wuxuu ku wareegay Jaamacadda Dawladaha Carabta, uuna noqday Danjireheeda Kenya, iyo Danjireheeda Qarammada Midoobay ee Vienna. Kaddib wuxuu soo degay USA, wuxuuna noqday Macallin Dugsiga Sare ee English High School ee Boston, Baare Shareecada Islaamka ee Islamic Legal Studies Program ee Harvard Law School ee Harvard University ee Cambridge. Siirada Ibnu Hishaam ayuu soomaali ku tarjumay 180 cajaloodna ku duubay. Kaddib wuxuu ilaa sideed sano ka ahaa imaam masjidyada xabsiyada ku yaalla gobolka Massachusetts oo ay Boston caasimadda u tahay ee dalka maraykanka, halkaasoo uu dadka xabbisan ku salaadana tujin jiray, barina jiray diinta islaamka, hortiisana ay ku islaameen khalqi badan oo rag iyo dumarba leh, uuna shahaadada xaqqa ah u mariyay, mahaddana Ilaahay ayaa iska leh.